Caruurta Nabi Muxammad

Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Waxaa dhigay

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM

Tusmada Kitaabka

Mawduuca	Gogga
1.Khadiijah bintu Khuwaylid Al Asadiyah خديجة بنت خويلد بن أسد القرشية الأسدية صلى الله عليها وسلم	3
2.Guursiga Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Khadiijah	5
3.Al Qaasimu, wiilka Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam القاسم إبن النبي صلى الله عليه وعلى آله وسلم	13
4. Cabdu Allaahi/Al Dhayyibu/Al Dh-dhaahiru Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam عبد الله\الطيب\الطاهر إبن النبي صلى الله عليه وعلى آله وسلم	17
5. Ibraahiim, wiilka Nabiga Salla Allaahu Calayhi Wa Sallam إبراهيم إبن النبي صلى الله عليه وعلى آله وسلم	19
6. Zaynab, gabadha Nabiga Sallaa Allaahu Calayhaa Wa Sallam زينب بنت النبي صلى الله عليه وعلى آله وسلم	27
7. Ruqayyah, gabadha Nabiga Sallaa Allaahu Calayhaa Wa Sallam رقية بنت النبي صلى الله عليه وعلى آله وسلم	40
8. Ummu Kulthuum, gabadha Nabiga Sallaa Allaahu Calayhaa Wa Sallam أم كلثوم بنت النبي صلى الله عليه وعلى آله وسلم	45
9. Faadhimah, gabadha Nabiga Sallaa Allaahu Calayhaa Wa Sallam فاطمة الزهراء بنت النبي صلى الله عليه وعلى آله وسلم	54

بسم الله الرحمن الرحيم

الحمد لله، والثناء لله، وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد النبي الأمي الذي بعثه الله رحمة للعالمين وعلى آله وسلم تسليما كنثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون، أما بعد

Ummu Al Mu'miniina Khadiijah\أم المؤمنين خديجة

Markay laba bilood iyo shan iyo labaatan maalmood kasoo wareegatay kasoo noqoshadiisa Shaam, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu guursaday Ummu Al Mu'miniina Khadiijah bintu Khuwaylid bin Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy bin Kilaab Al Qurashiyyah, Al Asadiyyah **أم المؤمنين خديجة بنت خويلد بن أسد بن عبد العزى بن قصي بن كلاب القرشية الأسدية**.

Khadiijah**خديجة** hooyada dhashayna waa Faadhimah binti Zaa'idah Al Asamm bin Jundab bin Harim bin Rawaaxah bin Xajr bin Maciis ben Caamir bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr/ **فاطمة بنت زائدة بن الأصم بن جندب بن هرم بن رواحة بن حجر بن معيص بن عامر بن لؤي بن غالب بن فهر**, siduu Maysarah**ميسرة**, addoonkay lahayd u yiri.

Ibnu Cabdu Al Barru**إبن عبد البر** wuxuu intaas ku daray inay ahayd ciribta bisha Safar**صفر** ee sanadkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee lix iyo labaatanaad.

Khadiijah**خديجة** waxaa Islaamka hortiis loogu yeeri jiray oo la oran jiray "Al Dh-dhaahirah **الطاهرة",** oo midda daahirka ah, iyo "Sayyidda ee hoggaamisa oo madaxda u ah haweenka Quraysh**سيدة نساء قريش".**

Khadiijah**خديجة** waxaa marka ugu horreysey guursaday ninka la yiraahdo Abuu Haalah bin Zuraarah Al Tamiimii**أبو هالة بن هند التميمي.** Abuu Haalah**هالة** magaciisa waa la isku khilaafay.
Al Zubayr ibnu Al Bakkaar**الزبير إبن البكار** iyo Al Daarqudhniyyu**الدارقطني** waxay yiraahdeen magaciisu waa Maalik**مالك.**

Waxaa kaloo la yiri waa Zuraarah**زرارة,** siday ibnu Mundah**إبن منده** iyo Al Suhaylii**السهيلي** u yiraahdeen.

Waxaa kaloo la yiri waa Hind**هند,** siduu Al Caskarii**العسكري** u yiri waa hubaal.
Waxaa kaloo la yiri magaciisu waxaa weeye Al Nabbaash**النباش.**

Ibnu Xajar Al Casqalaanii**إبن حجر العسقلاني** wuxuu Fatxu Al Baarii**فتح الباري** ku wariyay inuu Abuu Haalah**أبو هالة** zamanka jaahiliyada iyo Islaamka hortiis dhintay.

Khadiijah**خديجة** waxay Abuu Haalah**أبو هالة** u dhashay:
(Kow) wiil la yiraahdo Hind**هند,** oo saxaabi wayn ahaa, kana mid ah raga lagu yaqiin sifaynta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Hind**هند** wuxuu ka qayb galay oo uu goob joog ka ahaa Duullaanka Badr**غزوة بدر.** Waxaa kaloo la yiri midkuu ka qay galay waa duullaanka Uxud **غزوة أحد\.** Hind**هند** waxaa axaadithta ka wariyay Al Xasan ibnu Faadhimah**الحسن بن فاطمة,** Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam, oo oran jiray, markuu Xadiithka ka warinayo:
"Waxaa ii warramay abtigay ... ", maxaa yeelay Hind**هند** waa abtigiis la dhashay Faadhimah

فاطمة\, Al Xasan\الحسن hooyadiis, gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam.

Hind\هند wuxuu ahaa nin hadalkiisu faseex yahay, codkar ah, si fiican wax u sifeeya, siduu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, abuuritaankiisa u sifeeyey oo kale, wuxuuna oran jiray:
"Anigaa dadka ugu kariimsan xagga aabaha iyo xagga hooyada iyo xagga walaalkey iyo xagga walaashey. Aabahay waa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, walaalkeyna waa Al Qaasim\القاسم, walaasheyna waa Faadhimah\فاطمة, hooyadayna waa Khadiijah\خديجة."
Hind\هند waxaa lagu dilay Duullaanka Maalinta Yawmu Al Jamali\يوم الجمل, isagoo Calii\علي la socday, Allaha wajigiisa karaameeyee, sidayy u yiraahdeen Al Zubayr ibnu Al Bakkaar الزبير بن البكار iyo Al Daarqudhniyyu\الدارقطني.

Waxaa kaloo la yiri wuxuu ku dhintay daacuunka haleelay Basrah\بصرة.
Al Tajjaanii\التجان wuxuu yiri:
"waxaa sax ah inuu Hind\هند wiilkiisa, oo isagana Hind\هند magaciisu ahaa sida aabihiis oo kale, uu ahaa kan Basrah\بصرة ku dhintay".
Al Tajjaanii\التجان warkiisuna waa intaas.

Fatxu Al Baarii\فتح الباري wuxuu wariyay inuu saxaabiga ah Hind bin Abii Haalah هند بن أبي هالة leeyahay wiil isagana magaciisu yahay Hindهند.
Al Caskarii\العسكري wuxuu yiri:
"Saddexdoodaba, oo ah wiilka iyo aabihiis iyo awoowihiisba magaca way wadaagaan oo waxaa la wada yiraahdaa "Hind\هند".

Khadiijah\خديجة waxay kaloo Abuu Haalah bin Zuraarah\أبو هالة بن زرارة u dhashay

(Labo) wiil labaad oo la yiraahdo Haalah Al Tamiimii\هالة التميمي. Abuu Cumar\أبو عمر wuxuu yiri:
"Haalah\هالة saxaabi ayuu ahaa."

Al Mustaghfirii\المستغفري wuxuu Caa'ishah\عائشة, Allaha raalli ka noqdee, ka wariyay inuu wiil ay Khadiijah\خديجة dhashay uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid, lana yiraahdo Haalah\هالة, ayadoo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hurdo, oo ay tahay waqtiga duhurka ka dambeeya, oo qayluulo loo seexdo.
Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, codkiisa maqlay. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"هالة! هالة! هالة!"

"Haalah! Haalah! Haalah!"

Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu Haalah bin Abii Haalah\هالة بن أبي هالة ka wariyay inuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo galay isagoo hurda. Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hurdada kasoo kacay oo uu laabtiisa ku dhejiyay, uuna yiri:

"هالة! هالة! هالة!"

"Haalah! Haalah! Haalah!"

Kaddib Abuu Haalah\أبو هالة Khadiijah\خديجة wuu ka dhintay.

Abuu Haalah\أبو هالة kaddib waxaa Khadiijah\خديجة guursaday Catiiq bin Caabid bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum\عتيق بن عابد بن عبد الله بن عمر بن مخزوم.
Khadiijah\خديجة waxay Catiiq\عتبق u dhashay:
(Saddex) gabar la yiraahdo Hind\هند, oo islaantay, saxaabiyadna ahayd, siduu Al Zuhriyyu\الزهري u wariyay. Gabadhaanna waa hooyada dhashay Muxammad bin Sayfii Al Makhzuumii محمد بن صيفي المخزومي, o ina adeerkeed ah.
Ibnu Sacd\إبن سعد wuxuu yiri:
"Dhasha Muxammadakaan\محمد waxaa la yiraahdaa "Banuu Al Dhaahirahبنوا الطاهرة", oo ah "Dhasha midda Daahiradda ah", oo ka tarjumeysa Makaanka Khadiijah\خديجة ".

Waxaa kaloo la yiri waxay Catiiq\عتيق u dhashay wiilla yiraahdo Cabdu Allaahi\عبد الله, ama Cabdu Manaaf\عبد مناف, sida kaloo la sheegay.

Qataadah\قتادة iyo ibnu Shihaab\إبن شهاب iyo ibnu Isxaaq\إبن إسحاق waxay Yuunus\يونس ka wariyeen inuu Khadiijah\خديجة marka hore Catiiq\عتيق guursaday, ayadoo inan ah oo uu ka dhintay, dabadeedna uu guursaday Abuu Haalah\أبو هالة, tanoo uu Fatxu Al Baarii\فتح الباري wariyay, uuna ibnu Xajar\إبن حجر kitaabkiisa kale ee Al Isaabah\الإصابة uu labada riwaayadoodba ku wariyay.

Guursiga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Khadiijah\خديجة

Markay laba bilood iyo shan iyo labaatan maalmood kasoo wareegatay kasoo noqoshadiisa Shaam\الشام, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu guursaday Ummu Al Mu'miniina Khadiijah bintu Khuwaylid bin Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy bin Kilaab Al Qurashiyyah, Al Asadiyyah أم المؤمنين خديجة بنت خويلد بن أسد بن عبد العزى بن قصي بن كلاب القرشية الأسدية.

Markuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Khadiijah guursanayey wuxuu jiray shan iyo labaatan sano, Khadiijana\خديجة waxay jirtay afartan sano iyo xoogaa.
Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu wariyay inay Khadiijah\خديجة kaddib markay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka aragtay waxay ka aragtay iyo wixii looga warramay oo arrinkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku saabsan, ay ayadu isu soo bandhigtay, si toos ahna u weydiisatay inuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, guursado, wuxuuna yiri:

"Markaasey isu soo bandhigtay waxayna tiri:

"يا إبن عم! إني قد رغبت فيك لقرابتك وسلتطك في قومك وأمانتك وحسن خلقك وصدق حديثك!"
“Yaa ibna acmm! Inni qad raghabtu fiika li qaraabatika wa suldhatika fii qawmika wa

amaanatika wa xusna khuluqika wa sidqa xadiithika!”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ina adeerkeeyow! Waan ku doonayaa, waxaanna kuu doonayaa qaraabannimadaada iyo awoodda aad tolkaa dhexdiisa ku leedahay iyo ammaanadaada iyo suubanaanta khuluqdaada iyo runlownimadaada."

Ibnu Sacad**إبن سعد** wuxuu isaguna ka wariyay Al Waaqidii**الواقدي** inay gabadha la yiraahdo Nafiisah binti Munabbih**نفيسة بنت منبه** ay tiri:
"Khadiijah**خديجة** waxay ahayd haweeney go'aan iyo xoog leh, shariifad ah, ayna u wehliyaan intaas wuxuu Ilaahay ayada la doonay oo karaamo iyo khayr ah, ayadoo markaas Quraysh**قريش** ugu gobsan xagga nasabka, uguna sharaf badan, uguna maal badan, ragga tolkeeda oo idilna uu ku dadaalayey inuu guursado, hadday taas awoodaan.
Raggu way doonayeen, maalna ay ku bixiyeen daraadeed.
Markaasey aniga waxay ii dirtay, si qarsoodi ah Muxammad**محمد**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kaddib markuu Safarkeeda Shaam**الشام** kasoo celiyay.

Markaasaan intaan u tegey, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaan waxaan ku iri:
"Muxammadow**محمد** -Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam- maxay tahay sababta kuu diidan inaad guursatid?"
Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"ما بيدي ما أتزوج به."

"Maa bi yadii maa atazawwaju bihi",
oo macneheedu yahay:

"Gacanteyda kuma ay jiro wax maal ah oo aan ku guursado".
Waxaan iri:
"Haddii taas lagaaga filnaado, laguuguna yeero maal iyo qurux iyo sharaf iyo kafaa'o –oo ah haweeney kuu dhiganta, oo kufkaaga ah- soo yeeli meysid?"
Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"فمن هي؟"

"Fa man hiya?"
oo macneheedu yahay:

"Waana tee?"
Waxaan iri:

"Khadiijah**خديجة**."
Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"وكيف لي بذلك؟"

"Wa kayfa lii bi thaalika?"
oo macneheedu yahay:

"Sideebeyna taasi iigu ahaaneysaa?"
Markaasaan tegey oo aan Khadiijah\خديجة u sheegay. Markaasey isaga laftiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u ciddirtay oo ay fartiintaan u fartay:

"أن ائت لساعة كذا."

"Saacad hebla ii imow".

Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, warkaas adeerradiis u sheegay."

Waxaa labadaas riwaayadoodna la isugu geyn karaa sidatan: inay Khadiijah\خديجة marka hore Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nafiisah\نفيسة u dirtay, si ay u ogaato inuu guursigeeda raalli ku yahay, markay ogaatayna inuu ku yahay ay ayada lafteedu la hadashay.

Wuxuu kaloo ibnu Isxaaq\إبن إسحاق Al Mubtada'\المبتدء ku wariyay oo yiri:

"Haweenka Quraysh\قريش waxay lahaayeen maalin ay kulmaan. Markaasey maalin isku yimaadeen. Markaasaa shirkoodaas waxaa yimid nin yuhuudi ah, wuxuuna haweenka ku yiri:

"Haweenka Qurayshow\قريش! Waxaa hubaal ah inuu Quraysh\قريش Nabi kasoo bixi doono. Marka tiinna karta inay firaash (waana haweeney) u noqoto, sidaas ha yeesho".
Markaasey haweenku yuhuudiga quruurux la dhaceen oo ay caayeen, ayna si adag ula dhaqmeen. Khadiijase\خديجة hadalka yuhuudiga way ka aamustay, kumana ayan kicin waxay haweenka kale faleen oo ay ninka kala hortageen. Warka uu ninkaasi yirina qalbigeeda ayuu ku xasilay.

Markaasey markuu Maysarah\ميسرة uga warramay Aayaatka uu ku arkay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo waxay ayada lafteeduba aragtay, ayay waxay tiri:

"إن كان ما قال اليهودي حقا، ما ذاك إلا هذا."

“In kaana maa qaala al yahuudiyyu xaqqan, maa thaaka illaa haathaa.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Hadduu waxa uu yuhuudigu sheegay run yahay, kaasi ma aha -waa Nabigaase- mid aan kan ahayn." Intaasuu ku egyahay warka ibnu Isxaaq\إبن إسحاق ee arrinkaan.

Gogosha doonidda iyo guurga Khadiijah\خديجة

Gogosha Khadiijah\خديجة lagu doonayey waxaa kasoo qayb galay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, adeerradiis qaarkood, sida Abuu Dhaalib\أبو طالب iyo Xamzah\حمزة. Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:

"Waxaa goobjoog ahaa Abuu Dhaalib**أبو طالب** iyo madaxda Mudar**مضر** (Mudar**مضر** waa awoowaha toddoba iyo tobnaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayna ka farcameen qabiilka Carbeed oo weyn oo isagana Mudar**مضر** la yiraahdo, waana daad dhibic kor ku leh).

Markaasuu Abuu Dhaalib**أبو طالب** Khadiijah**خديجة** doonay, oo uu khudbo jeediyey, oo uu yiri:

"الحمد لله الذي جعلنا من ذرية إبراهيم، وزرع إسماعيل، وضئضى معد، وعنصر مضر، وجعلنا حضنة بيته، وسواس حرمه، وجعل لنا بيتا محجوجا، وحرما آمنا، وجعلنا الحكام على الناس، ثم إن ابن أخي هذا، محمد بن عبد الله، لايوزن برجل إلا رجح به، فإن كان في المال قلة، فإن المال ظل زائل، وأمر حائل، ومحمد ممن قد عرفتم قرابته (وفي نسخ: "ومحمد من الذين قد عرفتم قرابته لهاشم وعبد المطلب والآباء الكرام، فالحسب أعظم من كثرة المال)، وقد خطب خديجة بنت خويلد وبذل لها ما آجله وعاجله من مالي كذا، وهو – والله – بعد هذا له نبأ عظيم وخطر جسيم."

"Al xamdu li Allaahi Allathii jacalanaa min thurriyati Ibraahiima, wa zarca Ismaaciil, wa d'idi'ata Macadd, wa cunsura Mudar, wa jacalanaa xadanata Baytihi, wa suwaasa Xaramihi, wa jacala lanaa Baytan maxjuujan, wa Xaraman Aaminan, wa jacalanaa al xukkaama calaa al nnaasi, thumma inna ibna akhii haathaa, Muxammadun bin Cabdi Allaahi, laa yuuzanu bi rajulin illaa rajaxa bihi, fa in kaana fii al maali qillatun, fa inna al maala thillun zaa'ilun, wa amrun xaa'ilun, wa Muxammadun mimman qad caraftum qaraabatahu (waa fii nusakhin: "wa Muxammadun allathiina qad caraftum qaraabatuhu li Haashimin wa Cabdu Al Mudh-dhalib, wa al aabaa'i al kiraami, fa al xasabu acthamu min kathrati al maali), wa qad khadhaba Khadiijata bintu Khuwyalid wa bathala lahaa maa aajiluhu wa caajiluhu min maalii kathaa, wa huwa – wa Allaahi – bacda haathaa lahu naba'un cathiimun wa khadharun jasiimun."

"Mahad waxaa iska leh Ilaaha naga yeelay ubadka Ibraahiim**إبراهيم,** iyo abuurka Ismaaciil**إسماعيل** (oo ah aabaha Carabta dhalay, kuwaanoo dadka ugu sharaf badan), asalkeenana geliyey Macadd**معد** (oo ah awoowaha sagaal iyo tobnaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam), iyo Mudar**مضر,** nagana dhigay kuwa gurigiisa (waa Kacbadee) ilaaliya, oo dhaqaaleeya, oo u adeega, oo kafaalo qaaday, iyo kuwa deggan oo maamula Xaramkiisa, noona yeelay Guri**البيت** loo soo xajjiyo iyo Xaram**الحرم** aamin ah, oo uusan cadaw wax nagu yeeli Karin (Siduuba Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** Aayadda toddoba iyo kontonaad ee Suuratu Al Qasasi**سورة القصص** ku yiri:

أَوَلَمْ نُمَكِّنْ لَهُمْ حَرَمًا آمِنًا (57)

"Awa lam numakkin lahum Xaraman aaminan(57)**",**
oo macneheedu yahay:
"Miyaanan dejin oo ku sugin Xaram aamin ah?(57)"), nagana dhigay kuwa dadka u taliya oo xukuma, dadkuna ay ugu hoggaansan yihiin kariimnimada akhlaaqdooda iyo wanaagga la dhaqankooda, aanna ahayn xukun dadka lagu dhibayo oo lagu qahro. Intaas kaddib, wiilkaan uu walaalakay dhalay oo ah Muxammad bin Cabdu Allaahi**محمد بن عبد الله** -Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam- oo nin kastoo lala miisaamo uu rajaxayo oo uu ka culusaanayo, xagga sharafta,

gobannimada, fadliga iyo caqligaba.
Hadday maaalkiisa yaraani ku jirto, maalku waa har guura – oo sida hooska uu dhakhso u suulo oo kale ayuu isaguna u tagaa- iyo arrin aan harin –oo maalku qof ayuu ka guuraa oo uu qof kale u guuraa, ama sifooyinkiisa ayaaba is beddela- iyo caariyo lagaa ceshanayo. Muxammadna\محمد -Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam- wuxuu ka mid yahay kuwa aad ogsoon tihiin qaraabannimadiisa Haashimهاشم iyo Cabdu Al Mudh-dhalib\عبد المطلب iyo aabayaalkooda kiraamta ah, oo sidaasuu nasabku uga qiimo badan yahay maal badnida-, wuxuuna soo doonay Khadiijah bintu Khuwaylidخديجة بنت خويلد, wuxuuna siinayaa, si ay deeqsinnimo ku dheehantahay meher inta la hormarinayo iyo inta dib laga bixinayo, oo maalkeyga ah, intaas yahay. Intaas aan iri kaddibna, wa Allaahi\والله isagu (waana Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) wuxuu leeyahay mustaqbal wayn (oo aydnaan adinku ogayn, taasoo tilmaameysa wuxuu isaga laftiisu Abuu Dhaalib\أبو طالب ah ka arkay barakooyinkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu ciyaalkiisa cunnada la cunayo iyo wuxuu Baxiiraa\بحيرى uga sheegeyba) iyo qadar jaliil ah oo weyn."

Markaasuu u guuriyey.

Abuu Dhaalib\أبو طالب wuxuu khudhbaddiisa ku daray, siduu Al Suhaylii\السهيلي u wariyay, isagoo sheegay inay Khadiijana\خديجة guursiga Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay ayaduna dooneyso.

Markuu Abuu Dhaalib\أبو طالب khudhbadiisa dhammeeyey, ayaa waxaa hadlay Waraqah bin Nawfal\ورقة بن نوفل –oo ah Khadiijah\خديجة ina adeerkeed-, wuxuuna yiri:
"Mahad waxaa iska leh Ilaaha naga dhigay sidaad u xustay, nagana fadli yeelay kuwaad tirisay, maxaa yeelay annagu waxaan nahay madaxda Carabta iyo hoggaamiyayaalkooda. Adinkuna intaas oo idil ehel ayaad u tihiin oo mudan tihiin. Cashiiradu -waana Quraysh\قريش oo tolkooda ah- ma inkireyso fadligiinna, axad dadka ka mid ahoo diidaya faankiinna iyo sharaftiinnana ma jiro. Annaguna waxaan dooneynnaa inaan xariggiinna qabsanno, oo la xiriirno iyo sharaftiinnaba. Marka marag iiga ahaada, madaxda Qureeyshey\قريش, inaan Khadiijah bintu Khuwaylidخديجة بنت خويلد u guuriyey Muxammad bin Cabdu Allaahi\محمد بن عبد الله (Saallaa Allaahu Calayhi Wasallam), meherkeeduna uu yahay afar boqol oo diinaar."

Markuu Waraqah\ورقة intaas yiri kaddib, wuu aamusay. Markaasuu Abuu Dhaalib\أبو طالب wuxuu yiri:

"قد أحببت أن يشركك عمها."

“Qad axbabtu an yushrikaka cammuhaa.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaan jeclaan lahaa inuu arrinkaan adeerkeedna kula wadaago."

Markaasuu Khadiijah\خديجة adeerkeed Camr bin Asad\عمرو بن أسد wuxuu yiri:

"Marag iiga noqda, madaxdda Qureyshey\قريش, inaan Muxammad bin Cabdu Allaahi محمد بن عبد الله\ (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) u guuriyey Khadiijah bintu Khuwaylid خديجة بنت خويلد\."

Khadiijahخديجة aabeheed Khuwaylid bin Asadخويلد بن أسد\ markaas ma noola, oo wuxuu dhintay, siduu Al Suhayliiالسهيلي\ uga wariyay Al Dhabariiالطبري\, oo ka wariyay ibnu Cabbaasإبن عباس\ iyo Caa'ishahعائشة\ iyo Jubayr bin Mudhcimالجبير بن مطعم\, oo yiri:

"Wuxuu ahaa Camr bin Asadعمرو بن أسد\ kan Khadiijah bintu Khuwaylidخديجة بنت خويلد\ u guuriyey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayadoo uu Khuwaylidخويلد\ Xarbiga Al Fijjaariحرب الفجار\ hortood dhintay.

Khuwaylid bin Asadخويلد بن أسد\ ayuu ahaa ninka ku qabsaday boqorka Yamaneedيمن\ ee Tubbac Al Aakharتبع الآخر\ markuu inta soo xajjiyay uu damcay inuu Xajaru Al Aswadkaالحجر الأسود\, waa Dhagaxa Madoobe, inuu inta Kacbada kala baxo arligiisa Yamanيمن\ la aado oo uu u qaato.

Markaasuu Khuwayli\dخويلد\ ku qabsaday. Waxaa kaloo arrinkaas ku qabsashada ku dhinac istaagay ayaguna rag kale.

Markaasuu Tubbacتبع\ wuxuu ku riyooday riyo aad u cabsi gelisay. Markaasuu arrinkaas ka haray, uuna iska daayey, arligiisana uu dib ugu laabtay isagoo aan Dhagaxa Madow la bixin oo qaadan." Intaas weeye warka ibnu Cabbaasإبن عباس\.

Sidaas ayay madaxda Quraysh\قريش guurkaas markhaati uga ahaayeen. Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Khadiijah bintu Khuwaylidخديجة بنت خويلد\ meher ahaan u siiyey, uuna ka siiyey maalka adeerkiis Abuu Dhaalibأبوطالب\, laba iyo toban wiqiyadood oo dahab ah iyo wiqiyad nuskeed. Wiqiyad kastana waxay ahayd afartan dirham, siduu u yiri Al Muxibbu Al Dhabariالمحب الطبري\.
Sidaas ayuu meherka wadartiisu wuxuu yahay shan boqol oo dirham oo dahab sharci ah. Muslim مسلم\ wuxuu Caa'ishahعائشة\ ka wariyay, Allaha raalli ka noqdee, inay tiri:

"كان صداقه صلى الله عليه وسلم لأزواجه إثنتي عشرة أوقية ونشا. أتدري ما النش؟" قلت: "لا." قالت: "نصف أوقية، وذلك خمس مأة درهم."

"Kaana sadaaquhu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, li azwaajihi ithnatay cashrata awqiyatan wa nashan. A tadrii maa al nash-shu? Qultu: "Laa". Qaalat nisfu awqiyatin, wa thaalika khamsa mi'atin dirham."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Meherkiisa uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam haweenkiisa oo idil siiyay wuxuu ahaa laba iyo toban wiqiyadood iyo nash. Ma ogtahay wuxuu nash yahay?" Waxaan iri: "Maya". Waxay tiri: "Waa wiqiyad nuskeed." Sidaas ayay wadarta uu haweeney walba meher ahaan u siiyay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay shanh boqol oo dirham oo dahab ah tahay."

Markuu guurku dhacay, ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu CaIayhi Wasallam, u kacay inuu guriga ka

baxo.
Markaasey Khadiijah\خديجة waxay ku tiri:

"إلى أين يا محمد؟"

“Ilaa ayna yaa Muxammad?”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Xaggeebaad u socotaa Muxammadow?"
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"أذهب وأنحر جزورا أو جزورين، وأطعم الناس."

"Ath-habu wa anxaru jazuuran aw juzuureyni, wa adhcimu al nnaasa"
oo macneheedu yahay:
"Waxaan u baxayaa inaan rati ama laba rati gawraco, oo aan dadka cunno siiyo."

Sidas ayuuna yeelay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Taasna waxay ahayd waliimadii ugu horreysey oo uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sameeyo.

Al Zarqaanii\الزرقاني wuxuu kaloo Al Muntaqaa\المنتقى ka wariyay inuu qoray oo yiri: "Markaasey Khadiijah\خديجة jaariyadeheeda amartay inay cayaaraan oo ay dafka tumaan. Isagana, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay ku tiri:

"مر عمك ينحر بكرا من بكراتك، وأطعم الناس وهلم فقل مع أهلك."

“Mur cammaka yanxaru bakran min bakraatika, wa adhcimi al nnaasa wa halumma fa qil maca ahlika.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Adeerkaa waxaad amartaa inuu qaalin qaalmahayga ka mid ah gawraco, oo uu dadka cunno siiyo, ehelkaagana (waana xaaskaagee) la qayluulee (oo ah seexashada duhurka kaddib la seexdo, oo qorraxda laga harsado). Sidaas ayuuna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yeelay."

Abuu Dhaalib\أبو طالب wuxuu farxay farax xoog leh, inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Khadiijah\خديجة guursaday, wuxuuna yiri:

"الحمد لله الذي أذهب عنا الكرب ودفع عنا الهموم."

“Al xamdu li Allaahi Allathii ath-haba cannaa al kariba wa dafaca cannaa al humaama.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Mahadda waxaa leh Ilaahay, oo kurbada naga qaaday, walwal iyo hammina naga qaaday."

Ilmahay Khadiijah\خديجة Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam u dhashay

Ummu Al Mu'miniina Khadiijah\أم المؤمنين خديجة waxay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dhashay lix cunug, oo ay labana wiilal yihiin, afarna gabdho, siduu u wariyay Al Zubayr ibnu Al Bakkaar\الزبير إبن البكار.

Al Zubayr ibnu Al Bakkaar\الزبير إبن البكار , oo ah dhasha Al Zubayr ibnu Al Cawwaamu الزبير إبن العوام, saxaabiga wayn oo ay dhashay Safiyyah bintu Cabdu Al Mudh-dhalib صفية بنت عبد المطلب\, eedada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam iyo xawaarigiisaحواريه, wuxuuna dhashay sanadka boqol iyo labo iyo toddobaatan ee Hijriga, wuxuuna dhintay sanadka laba boqol iyo lix iyo konton, kitaabkiisana waxaa la yiraahdaa Jamharatu Nasabu Qurayshin wa Akhbaarihaa\جمهرة نسب قريش وأخبارها, oo marka ugu dambeysey lagu daabacay Riyaadh ee dalka Sacuudiga.

Al Zubayr ibnu Bakkaarالزبير إبن البكار wuxuu yiri:
"Waxaa ii warramay adeerkey Muscab\مصعب oo yiri:
"Khadiijahخديجة waxay u dhashay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam:
(kow) Al Qaasimالقاسم iyo
(Laba) Al Dhaahi\الطاهر, kanoo lana yiraahdo Al Dhayyibu\الطيب, magaciisuna waa Cabdu Allaahi\عبد الله."

Al Zubayr\الزبير adeerkiis waxaa la yiraahdaa Abuu Cabdu Allaahi Al Muscab bin Cabdu Allaahi bin Al Muscab Al Zubayrii\أبو عبد الله المصعب بن عبد الله بن المصعب الزبيري, noolaana inta u dhexeysa boqol iyo lix iyo konton ilaa laba boqol iyo lix iyo soddon, wuxuuna leeyahay kitaab la yiraahdo Kitaabu Nasabu Quraysh\كتاب نسب قريش.

Al Zubayr bin Bakkaarالزبير إبن البكار wuxuu kaloo wariyay oo uu yiri:
"Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ibraahiim\إبراهيم ka sokow, wuxuu lahaa Cabdu Allaahi\عبد الله oo isagoo yar Makkah\مكة ku dhintay, waxaana kaloo lagu magacaabaa Al Dhayyibu\الطيب iyo Al Dhaahiru\الطاهر, oo Cabdu Allaahi\عبد الله wuxuu leeyahay saddex magac."

Al Qasdhalaanii\القسطلاني wuxuu yiri: "
Taas weeye siday yiraahdeen inta badan ee culummada nasabka ku xeel dheer. Waxaana sidaas yiri Abuu Cumar\أبو عمر oo ah Yuusuf bin Cabdu Allaahi bin Muxammad bin Cabdu Al Barr\يوسف بن عبد الله بن محمد بن عبد البر, al xaafith\الحافظ, al callaamah\العلامة, al imaam\الإمام, midka dadka zamankiisa uga kor maray xifthiga iyo al itqaanu\الإتقان, oo ah sugidda runnimada warka, dhintayna sanadka afar boqol iyo saddex iyo lixdan, waana isaga allifay kutubbo uu ugu caan san yahay Al Istiicaabu fii Macrifati Al Asxaabi\الإستيعاب في معرفة الأصحاب, oo afar mujllad ka kooban.

Al Daarqudhniyyuna\الدارقطني wuxuu yiri:
"Taas weeye midda sugan", o ah inay wiilashiisu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, saddexdaas ahaayeen."

Gabdhaha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay ahaayeen, oo la isku wada waafaqay, afar, oo kala ah

(Kow) Zaynab\زينب,
(Laba) Ruqayyah\رقية,
(Saddex) Ummu Kulthuum\أم كلثوم iyo
(Afar) Faadhimah\فاطمة.
Taas weeye midda saxiixa ah, inay caruurtiisu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, toddoba ahaayeen, oo kala ah saddex wiil iyo afar gabdhood, ayna dhammaantood dhashay Khadiijah\خديجة, intaan lbraahiim\إبراهيم ka ahayn oo ay hooyadiis ahayd Ummu Al Mu'miniina Maariyah Al Qibdhiyyah\أم المؤمنين مارية القبطية.
Waxaan hadana mid walba oo caruurtaas ka mid u xuseynnaa goonidiis, annago sheegeynna wax ka mid intii laga wariyay, Inshaa'a Allaahu\إن شاء الله.

Kow. Al Qaasimu\القاسم, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Al Qaasimu\القاسم , wiilka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa ugu horreeyey caruurtiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Al Qaasim\القاسم wuxuu dhashay Nabinnimada horteed, siday u sugeen Al Zubayru ibnu Al Bakkaar\الزبير إبن البكار iyo ibnu Xajar Al Casqalaanii\إبن حجر القسقلاني oo yiri:
"Al Qaasim\القاسم waa curadkiisa" Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wiilkiisaan ayaa loogu koofaaray, oo loogu bixiyay **"Abaa Al Qaasim\أبا القاسم"** oo ah "Al Qaasim\القاسم aabihiis".
Al Qaasim\القاسم wuxuu noolaa ilaa uu ka socdo, siduu u wariyay Al Zubayr ibnu Al Bakkaar **الزبير إبن البكار** oo sheekhiisa ka wariyay oo yiri:
"Nuujintiisuse kaamil ma ayan noqon",
oo macneheedu yahay inuusan labo sano gaarin, ayadoo cunugga labo sano oo kaaamil ah la nuujiyo, kaddibna naaska laga gooyo.

Dhimashada Al Qaasim\القاسم

Al Imaamu, al callaamah, al xaafith Abii Bakr Jacfar bin Muxammad al Firyaabii **الإمام، العلامة، الحافظ أبي بكر جعفر بن محمد الفريابي**, oo loo nisbeeyey Firyaab**فرياب** oo ah degmo Turkiga**تركيا** ka tirsanayd oo Balkh**البلخ** agteeda ahayd, ahaana qaalliga Diinwar\دينور, oo kutubbada badan sannifay, thiqqada**ثقة** lagu kalsoon yahay oo la aamino, uuna Al Khadhiibu Al Baghdaadii **الخطيب البغدادي** ka yiri: "Wuxuu ka mid ahaa weelasha cilmiga iyo ehelka macrifada iyo fahmada", kuna wareegay arliga barigiisa iyo galbeedkiisa, dhashayna sanadka Hijriga ee laba boqol iyo toddoba, dhintayna bisha Muxarram**محرم** ee sanadka saddex boqol iyo kow, wuxuu Musnadkiisa**المسند** ku xusay wax tilmaamaya in Al Qaasimu\القاسم lagu oofsaday Islaamka dhexdiisa iyo Nabinnimada kaddib.

Imaamkaan iyo Al Dhayaalisii**الطيالسي** iyo Al Xarbii**الحربي** iyo ibnu Maajah**إبن ماجة** waxay ka wariyeen Faadhimah bintu Al Xusayn**فاطمة بنت الحسين,** oo aabeheed Al Xusayn**الحسين,** Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka warisay inuu yiri:

"لما مات القاسم، قالت خديجة: "يا رسول الله درت لبينة القاسم فلو كان الله أبقاه حتى يتم رضاعه."

“Lammaa maata Al Qaasimu, qaalata Khadiijah: “Yaa Rasuula Allaahi darrat labiinatu Al Qaasimi fa law kaana Allaahi abqaahu xattaa yatimma radaacahu.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Markuu Al Qaasimu**القاسم** dhintay ayay Khadiijah**خديجة** waxay tiri:

"Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Qaasimu**القاسم** caanihiisii way darareen oo bateen, oo hadduu Ilaahay baaqi ka dhigi lahaa ilaa uu nuujintiisa ka kaamilo".
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"كان تمام رضعه في الجنة."

"Kaana tamaamu radcihi fii Al Jannati",
oo macneheedu yahay:
"Nuujintiisa waxaa lagu kaamilay Jannada dhexdeeda".

Khadiijah waxay tiri:

"فلو أعلم ذلك يا رسول الله لهون علي أمره."

“Fa law aclamu thaalika yaa Rasuula Alaahi la hawwana calayya amruhu.”
Xadiithkla macnihiisu waxaa weeye:

"Hadda markaan taas ogaaday amarkeyga ayay khafiif ka dhigeysaa", oo ah walwalkii hooyo waa yaraanayaa. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"إن شئت دعوت الله فأسمعك صوته."

"In shi'ti dacawtu Allaaha, fa asmacaki sawtahu",
oo macneheedu yahay:

"Haddaad dooneysid Ilaahay ayaan baryayaa markaasuu codkiisa ku maqashiinayaa".

Markaasey waxay tiri:

"بل أصدق الله ورسوله."

“Bal usaddiqy Allaaha wa Rasuulahu.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bal waxaan rumaynayaa Ilaahay iyo Rasuulkiisa" Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
Al Xarbii**الحربي** wuxuu yiri: "Khadiijah**خديجة** Al Qaasimu**القاسم** way u murugtay ilaa ay caaneheedu ka dararaan."

Ibnu Xajar Al Casqalaanii**إبن حجر العسقلاني** wuxuu kitaabkiisa Al Isaabah**الإصابة** ku yiri:
"Taasi waa war aad u cad, inuu Al Qaasim**القاسم** Islaamka dhexdiisa ku dhintay, laakin sanadka

(xadiithka) waxaa ku sugan tabar yari".

Al Suhaylii\السهيلي wuxuu kitaabkiisa Al Rawdu\الروض ku yiri:
"Taasi waa calaamad tusineysa Khadijjah\خديجة fiqigeeda, ayadoo kahatay inay aragto wiilkeeda oo Jannada dhexdeweda lagu nuujinayo, oo uu markaas seego ajarkay ka heleyso rumaynta ghaybka araggeenna ka maqan. Ilaahayna wuu ammaanay kuwa ghaybka rumeeya".
Waa intaas warka Al Suhaylii\السهيلي.

Yuunus bin Bukayr\يونس بن بكير wuxuu ku wariyay kitaabka Fii Ziyaadati al Maghaazii في زيادة المغازي\, kana wariyay Calii bin Al Xusayn\العلي بن الحسين inuu yiri:
"Al Qaasim\القاسم wuxuu gaaray da'da uu daabadaha fuulo, uuna ku dheereeyo awrta xoogga badan oo lagu tartamo.

Soo degidda Suuradda AI Kawthar\سورة الكوثر

Markaasaa marka la qabtay (uu dhintay), ayuu Al Caasii bin Waa'il\العاصي بن وائل wuxuu yiri: "Muxammad\محمد -Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam- waa gablamay."

Markaasaa waxaa soo degatay Suuradda Innaa Acdhaynaaka Al Kawthara\سورة إنا أعطيناك الكوثر, oo cawil celin looga dhigayo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam musiibada ku gaartay dhimashada Al Qaasimu\القاسم."

Ibnu Xajar\إبن حجر wuxuu Al Isaabah\الإصابة ku yiri:
"Middaanna waa daliil kale inuu Al Qaasimالقاسم Islaamka dhexdiisa ku dhintay."

Al Qaasimuالقاسم wuxuu ahaa kan ugu horreeya oo caruurta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhinta. Ibnu Sacdإبن سعد iyo ghayrkiisba waxay wariyeen oo ay yiraahdeen:

"Salmaa\سلمى waxay ahayd mawlada Safiyyah bintu Cabdu Al Mudh-dhalib صفية بنت عبد المطلب\, oo Khadiijah\خديجة ka umulisay caruurteeda oo dhan, waxayna sheegtay inay Khadiijah خديجة ay wiil kasta ugu walqashay laba wan, gabar walbana wan, iyo inay labadii cunugba oo ay dhashay ay hal sano kala weynaayeen. Ilmeheedana ayada lafteeda ayaa nuujin jirtay."
Suuradda Al Kawtharسورة الكوثر wuxuu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى ku yiri:

بسم الله الرحمن الرحيم. إِنَّا أَعْطَيْنَاكَ الْكَوْثَرَ (1) فَصَلِّ لِرَبِّكَ وَانْحَرْ (2) إِنَّ شَانِئَكَ هُوَ الْأَبْتَرُ (3)

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Innaa acdhaynaaka al Kawthara(1)Fasalli li Rabbika wa anxar(2)Inna shaani'aka huwa al abtar(3)."
Suuradda macneheedu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Annagaa ku siinnay Al Kawthar(10)Ee Rabbigaa u tuko, daraadisna wax u gawrac(2)Midka cadawgaaga ah oo ku neceb isagaa khayr oo dhan laga fogeeyey, gablamayna oo cirib go'ay(3)".

Imaam Al Baghawii**البغوي** wuxuu tafsiirkiisa Anas**أنس** uga wariyay inuu yiri:
"Maalin maalmaha ka mid ah, ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhexdeenna ku sugan yahay oo aan la joogno, ayuu in gaaban indhaha isku qabtay, sida isagoo seexday oo kale. Kaddibna madaxa ayuu kor usoo qaaday isagoo ilko caddeynaya. Markaasaan waxaan niri:
"Maxaa kaa qosliyay Rasuulka Ilaahayow?"
Wuxuu yiri:

"نزلت علي سورة، فقرأ: بسم الله الرحمن الرحيم. إِنَّا أَعْطَيْنَاكَ الْكَوْثَرَ (1) فَصَلِّ لِرَبِّكَ وَانْحَرْ (2) إِنَّ شَانِئَكَ هُوَ الْأَبْتَرُ (3)**، ثم قال: "تدرون ما الكوثر؟" قلنا: "الله ورسوله أعلم." قال: "فإنه نهر وعدنيه ربي، فيه خير كثير. هو حوض ترد عليه أمتي يوم القيامة. آنيته عدد انجوم. فيختلج العبد منهم، فأقول: "رب، إنه مني." فيقول: "ما تدري ما أحدث بعدك."**

"Nazalat calayya aanifan Suuratun, fa qara'a: **"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Innaa acdhaynaaka al Kawthara(1)Fasalli li Rabbika wa anxar(2)Inna shaani'aka huwa al abtar(3)."** Thumma qaala: **"Tadruuna maa al Kawtharu?"** qulnaa: "Allaahu wa Rasuuluhu aclamu!" Qaala: **"Fa innahu nahrun wacadaniihi Rabbii, fiihi khayrun kathiirun. Huwa xawdun taridu calayhi ummatii Yawma Al Qiyaamati. Aaniyatuhu cadadu al nnujuumi. Fa yakhtaliju al cabdu minhum, fa aquulu: "Rabbi innahu minnii". Fa yaquulu: "Maa tadrii maa axdatha bacdaka!"**
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Maalin maalmaha ka mid ah, ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhexdeenna ku sugan yahay oo aan la joogno, ayuu in gaaban indhaha isku qabtay, sida isagoo seexday oo kale. Kaddibna madaxa ayuu kor usoo qaaday isagoo ilko caddeynaya. Markaasaan waxaan niri:
"Maxaa kaa qosliyay Rasuulka Ilaahayow?"
Wuxuu yiri:

"Waxaa haddeer igu soo degatay بسم الله الرحمن الرحيم. إِنَّا أَعْطَيْنَاكَ الْكَوْثَرَ (1) فَصَلِّ لِرَبِّكَ وَانْحَرْ (2) إِنَّ شَانِئَكَ هُوَ الْأَبْتَرُ (3) . Markaasuu Akhriyay: **"Bismi Allaahi Al Raxmaani Al Raxiimi. Innaa acdhaynaaka al Kawthar(1)Fasalli li Rabbika wa anxar(2)Inna shaani'aka huwa al abtar(3)."**
Kaddibna wuxuu yiri:
"Ma ogtihiin wuxuu Al Kawthar**الكوثر** yahay?"
Waxaan niri: "Ilaahay iyo Rasuulkiisa ayaa u cilmi leh."
Wuxuu yiri:
"Waa wabi uu iga ballan qaaday Rabbigay inuu isiiyo, dhexdiisa uu khayr badan ku sugan yahay, waana barkad ay usoo aroorto ummaddeydu Maalinta Qiyaame. Tirada weelashiisa -wax looga cabo- waa tirada xiddigaha oo kale. Markaasaa addoon ka mid ah inta la dhufto wabiga laga jiidaya. Markaasaan waxaan leeyahay:
"Rabbiyow, aniguu iga mid yahay".
Markaasuu wuxuu leeyahay:

"Maad ogsoonid wuxuu gadaashaa falay".

Wuxuu kaloo Al Baghawii\البغوي Anas\أنس ka wariyay inuu yiri inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"دخلت الجنة فإذا أنا بنهر يجري بياضه بياض الألبان، وأحل من العسل، وحافتاه خيام اللؤلؤ. فضربت بيدي، فإذا الثرى مسك أذفر. فقلت لجبريل: "ما هذا؟" قال: "الكوثر الذي أعطاكه الله عز وجل."

"Dakhaltu Al Jannah fa ithaa anaa bi naharin yajrii bayaaduhu bayaadu al alabani, wa axlaa mina al casali, wa xaafataahu khiyaamu al llu'lu'i. Fa darabtu bi yadii, fa ithaa al tharaa miskun athfar. Fa qultu li Jibriila: "Maa haathaa?" Qaala: "Al Kawtharu allathii acdhaakahu Allaahu Cazza wa Jaalla."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaan galay Jannada, markaasaan waxaa arkay wabi socda, oo ay caddaantiisu la mid tahay caddaanta caanaha, malabkana ka macaan, labadiisa jinna ay khaymado luul ah yihiin. Markaasaan gacanteyda dhulka ku dhuftay, mase ciidduba waa miskiga la yiraahdo athfar **المسك الأذفر**. Markaasaan Jibriil**جبريل** waxaan ku iri:
"Kani muxuu yahay?"
Wuxuu yiri:
"Waa Al Kawtharka**الكوثر** uu Ilaahay Cazza wa Jalla**الله عز وجل** adiga ku siiyey."

Aayadda labaad ee Suuraddana macneheedu waxaa weeye: "Marka hore Salaadda Ciidda tuko maalinta la yiraahdo Yawmu Al Naxri**يوم النحر**, oo ah Ciidda Carafo**عيد عرفاة**, kaddibna udxiyada **الأضحية** gawrac", o sidaas ayay u kala horreeyaan.

Siyaalo kalena waa lagu fasiray. Aayadda saddexaad siday noo sheegtayna, Al Caasii**العاصي** wuu cirib go'ay oo uu gablamay, waxaana ka haray dhashiisa kii islaamay, kanoo ay Diintu kala gaysay oo aan ciribtiisa ka mid ahayn.

Labo. Cabdu Allaahi**عبد الله**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Cabdu Allaahi**عبد الله**, wiilka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu dhintay isagoo yar.

Ibnu Sacd**إبن سعد** wuxuu sanad daciif ah uga wariyay Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas **عبد الله إبن عباس**\, labadoodaba Allaha raalli ka noqdee, inuu Cabdu Allaahi**عبد الله** dhintay isagoo yar, ayadoo aan hadda la ogayn intuu noolaa.
Markaasaa markuu Cabdu Allaahi dhintay**عبد الله**, ayuu Al Caasii bin Waa'il**العاصي بن وائل** wuxuu yiri:
"Wiilashii way ka go'een, wuuna cirib go'ay."

Markaasaa waxaa soo degatay

إِنَّ شَانِئَكَ هُوَ الْأَبْتَرُ (3)

"Inna shaani'aka huwa al abtar"
oo macneheedu yahay
"Midka cadawgaaga ah oo ku neceb isagaa khayr oo dhan laga fogeeyey gablamayna oo cirib go'ay."

Ibnu Jariir\ابن جرير wuxuu isaguna wariyay in ninka sidaas yiri uu ahaa Cuqbah bin abii Mucaydh\عقبة بن أبي معيط, oo yiri:
"Muxammad -Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam-wiilna baaqi u noqon mayo oo waa gablan."

Markaasey Aayaddaani soo degatay

إِنَّ شَانِئَكَ هُوَ الْأَبْتَرُ (3)

"Inna shaani'aka huwa al abtar".

Sidaas ayay Aayaddu labadaas ninba ugu soo degatay. Waa intaas warka ibnu Jariir\ابن جرير.

Cabdu Allaahi\عبد الله, wiilka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu dhashay Nabinnimada kaddib, isagaana caruurta Khadiijah\خديجة ugu yar.

Al Zubayr ibnu Bakkaar\الزبير إبن بكار wuxuu awoowihiis Muscab\مصعب ka wariyay inuu yiri:

"Al Zubayru bin Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim\الزبير بن عبد المطلب بن هاشم, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, adeerkiis ay aabihiis Cabdu Allaahi\عبد الله iyo adeerkiisa kale Abuu Dhaalib\أبو طالب isku hooyo iyo isku aabe yihiin, uuna Nabigu, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, aad u jeclaa, cayaarsiin jirayna intuu yaraa oo uu agoonka ahaa, wuxuu lahaa wiil magaciisu Al Dhaairu\الطاهر ahaa, oo wiilasha Makkah\مكة kuwa ugu caqli badan ka mid ahaa.
Wiilkaas ina adeerkiis ah, ayuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wiilkiisa ku sammiyay."

Sidaas ayuu wiilka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ee Cabdu Allaahi\عبد الله ah wuxuu leeyahay labo kuniyo ama koofaar oo kala ah Al Dhaahiru\الطاهر iyo Al Dhayyibu\الطيب.

Al Daarqudhniyyu\الدارقطني wuxuu yiri waxaa Al Dhayyibu\الطيب loogu koofaaray maxaa yeelay wuxuu dhashay Nabinnimada kaddib.
Al Dhayyibu\الطيب macneheeduna waa midka dhayyibka ah oo fiican.
Cabdu Allaahi\عبد الله, wiilka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku dhintay oo lagu duugay Makkah Al Mukarramah\مكة المكرمة wuxuuna hooyadiis Khadiijah\خديجة iyo walaalkiis Al Qaasimu\القاسم kula duugan yahay qubuuraha Makkah\مكة ee Al Xujuuna\الحجون oo maanta loo yaqaan Al Mucallaat \المعلاة una jirta Kacbada qiyaas shan boqol oo mitir kuna taalla dariiqa Shaaric Ghazzah\شارع غزة.

Saddex. Ibraahiimu\إبراهيم Sallallaahu Calayhi Wasaallam

lbraahiimu\إبراهيم , wiilka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ahaa kan ugu dambeeyey caruurta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Ibraahiim\إبراهيم hooyadiisa dhashay waa Ummu Al Mu'miniina Maariyah Al Qibdhiyyah أم المؤمنين\مارية القبطية, oo ahayd haweeney qurux badan oo cad.

lbraahiim\إبراهيم wuxuu ku dhashay Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة bisha Thuu Al Xijjah\ذو الحجة ee sanadka sideedaad ee Hijrada.

Al Zubayr ibnu Al Bakkaar\الزبير إبن البكار wuxuu wariyay inuu lbraahiim\إبراهيم ku dhashay xaafadda Al Madiinah\المدينة ee la yiraahdo Al Caaliyah\العالية, oo ahayd meeshuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Maariyah\مارية dejiyay.

lbraahiim\إبراهيم waxaa hoyadiis umuliso u ahayd haweenta la yiraahdo Salmaa Ummu Raafic\سلمى أم رافع, una dhaxday Abuu Raafic\أبورافع, ahaydna mawlad Safiyyah bintu Cabdu Al Mudh-dhalib\مولى صفية بنت عبد المطلب, eedada Nabi Muxammad, Sallaa Allaaahu Calayhi Wasallam.

Markuu lbraahiim\إبراهيم dhashay, ayuu Abuu Raafic\أبورافع Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u tegey oo uu ugu bishaareeyey dhalashada wiilkiisa.

Markaasuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Abuu Raafic\أبو رافع u hibeeyey oo uu siiyey addoon.

Maalinta toddobaad ee dhalashadiisa ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ugu walqalay laba wan, timaha madaxana waxaa ka xiiray Abuu Hind Al Bayaadii\إبو هند الباضي, mawlaha Farwah bin Camr Al Bayaadii \مولى فروة بن عمرو البياضيoo Ansaarta ka mid ah, siduu ibnu lsxaaq\إبن إسحاق u wariyay.

Magaca Abuu Hind|أبو هند waxaa lagu sheegay inuu yahay Cabdu Allaahi\عبد الله, siduu ibnu Al Sakn\إبن السكن u yiri.

Ibnu Mundah\إبن منده wuxuu yiri magaciisu waa Yasaar\يسار.

Waxaa kaloo la yiri Saalim\سالم.

Maalik\مالك wuxuu Al Muwadhaa'الموطأ ibnu Wahab\إبن وهب uga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, toobay Abuu Hind Yasaar\أبو هند يسار.

Ibnu Al Sakn\إبن السكن iyo Al Dhabraanii\الطبراني waxay Caa'isha\عائشة ka wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, yiri:

"من سره أن ينظر إلى من صور الله الإيمان في قلبه فلينظر إلى أبي هند."

"Man sarrahu an yanthura ilaa man sawwara Allaahu al iimaana fii qalbihi fal yanthur ilaa abii Hind".

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Qofka ku farxaya inuu arko mid uu Ilaahay qalbigiisa iimaanka ku masawwiray ha fiiriyo abii Hind."

Abuu Hind\أبو هند wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kala qayb galay duullaammada Badr\غزوة بدر ka dambeeyey dhammaantood.

Markuu dhashay lbraahiimإبراهيم , Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu amray in timaha madixiisa laga xiiray dhulka lagu duugo, wuxuuna masaakiinta ku sadaqaystay culayskooda oo qalin ah.
Maalintaas toddobaad ee kasoo wareegatay dhalashadiisa ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wiilkiisa magaca lbraahiimإبراهيم\ u bixiyey.

Waxay Al Bukhaarii\البخاري iyo Muslim\مسلم Thaabit\ثابت ka wariyeen inuu Anas bin Maalik أنس بن مالك yiri inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"ولد لي الليلة غلام سميته باسم أبي إبراهيم ، ثم دفعته إلى أم سيف امرأت قين بالمدينة."

"Walada lii al llaylata ghulaamun sammaytuhu bi ismi abii Ibraahiima, thumma dafactuhu ilaa ummi Sayf imra'ata qaynin bi Al Madiinati."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Waxaa xalay ii dhashay wiil aan ku sammiyey aabahay lbraahiim. Kaddibna waxaan u dhiibay haweenta ummu Sayf\سيف, una dhaxda tumaal reer Al Madiinah\المدينة ah, si ay u nuujiso."

Anas\أنس wuxuu yiri:
"Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhaqaaqay, aniguna aan daba galay. Markaasuu wuxuu u tegey Abuu Sayf\أبوسيف oo dabka ku buufinaya Buufin, gurigiina uu qiiq ka buuxsamay. Markaasaan socod boobay oo aan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hortiisa socday. Markaasaan waxaan iri:
"Abuu Sayfow\يا أبا سيف, jooji buufinka, waxaa yimid Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Markaasuu joojiyay."

Dhimashada Ibraahiimإبراهيم

Lafthiga Al Bukhaariina\لفظ البخاري, uuna Anas\أنس ka wariyay waxaa weeye:
"Waxaan lasoo galnay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, guriga Abii Sayf أبي سيف\, oo qabay haweenta nuujineysa, oo sidaas lbraahiimإبراهيم\ aabihiis xagga nuugmada ah.
Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu qaaday Ibraahiim إبراهيم\ oo uu dhunkaday, uuna carafsaday.
Markaas kaddib ayaan hadana soo galnay ayadoo uu lbraahiim geeridu hayso. Markaasey labada indhood ee Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ilmeeyeen. Markaasuu Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf\عبد الرحمن بن عوف wuxuu ku yiri:
"Adiguna ma ooyeysaa Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?"

Markaasuu wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"يا إبن عوف، إنها رحمة."

"Yaa ibna Cawf, innahaa raxmatun",
oo Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"lna Cawfow, ilmadaani waa naxariis", ahna inuu wiilkaasi dhintay oo aan la siin fursad oo ku

noolaado, ee ma aha boohin loo booyayo inuu dhintay. Sidaas weeye macnuhu.

Markaasu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, mid kale raaciyey, oo uu yiri:

"إن العين تدمع، والقلب يحزن، ولانقول إلا ما يرضي ربنا. وإنا بفراقك، يا إبراهيم، لمحزونون."

"Inna al cayna tadmacu, wa al qalbu yaxzanu, wa laa naquulu illaa maa yardii Rabbanaa. Wa innaa bi firaaqika, yaa Ibraahiimu, la maxzuunuuna."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Ishu way ilmeyneysaa, qalbiguna waa tiiraanyeysan yahay, mana aanan oraneynno oo kuma hadleynno waxaan ahayn wuxuu Rabbigeen raalli ka yahay. Annaguna firaaqiddaada, aan kala tagnay, Ibraahiimow\إبراهيم, waan ka tiiraanyeysannahay."

Anas**أنس** isagoo booqashadaas koowaad warkeeda wali ku guda jira wuxuu yiri:
"Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ibraahiim**إبراهيم** qaaday, oo uu dhunkaday, oo uu carafsaday. Haweentaas ayuu Ibraahiim**إبراهيم** la joogay ilaa uu ka dhinto."

Al Zubayr ibnu Al Bakkaar**الزبير إبن البكار** wuxuu wariyay, uuna ka wariyay, siduu ibnu Sacadna **إبن سعدد** uga wariyay sheekhiisa Al Waaqidii**الواقدي** oo ka wariyay Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Rraxmaan bin Abii Sacsacah**عبد الله بن عبد الرحمن بن أبي صعصعة**, oo yiri:

"Markuu lbraahiim**إبراهيم** dhashay, Ansaartu waxay ku tartameen haweenta ayaga ka mid ah oo nuujineysa, ayadoo ay mid walba dooneyso inay ayadu nuujiso. Sababtuna waxay tahay inay jeclaayeen inay Maariyah**مارية** Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u firaaqowdo oo ayan wiilka uga mashquulin, ayagoo ogaa inuu ayada jecelyahay. Markaasuu wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ibraahiim**إبراهيم** siiyey Ummu Burdah**أم بردة** oo magaceedu yahay Khawlah bintu al Munthir bin Zayd Al Ansaarii**خولة بنت المنذر بن ويد الأنصاري**, reer banii Al Najjaar**بني النجار** u dhalatay, ahna haweenta Al Baraa'u bin Aws bin Khaalid**البراء بن أوس بن خالد**, oo isaguna reer Banii Al Najjaar**بني النجار** u dhashay.

Markaasey waxay lbraahii**إبراهيم** ka nuujisay caanaha wiilkeeda, waxayna ku nuujisay xaafadda reer Banii Maazin bin Al Najjaar**بني مازن بن النجار**. Kaddibna waxay lbraahiim**إبراهيم** u celisay hooyadiis.

Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Umuu Burdah\أم بردة siiyay tiro geed timireed ah, nuujinta ay Ibraahiim**إبراهيم** nuujisay daraadeed. Marka, Xadiithka saxiixa ah ee ay Al Bukhaarii**البخاري** iyo Muslim**مسلم** wariyeenna wuxuu sheegay inay Ibraahiim**إبراهيم** nuujisay Ummu Sayf**أم سيف**.

Al Qasdhalaanii**القسطلاني** wuxuu yiri:
"Waxaa marka dhici karta inuu marka hore Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ibraahiim **إبراهيم**u dhiibay Ummu Burdah**أم بردة**, kaddibna Ummu Sayf**أم سيف**, tanoo uu agteeda ku sugnaa ilaa uu ka dhintay.

Waxaase la wariyay, siduu u wariyay ibnu Cabdu Al Barr\إبن عبد البر iyo ghayrkiisba, inuu lbraahiim\إبراهيم ku dhintay Ummu Burdah\أم بردة gurigeeda.
Sidaas ayaa waxaa la rajaxayaa oo ay sawaabtu ku jirtaa Xadiithka saxiixa ah."
Waa intas warka Al Qasdhalaanii\القسطلاني.

Waxay Muslim\مسنم iyo ibnu Xibbaan\إبن حبان iyo Abuu Xaatim\أبو حاتم ay Anas bin Maalik أنس \بن مالك ka wada wariyeen inuu yiri:
"Ma aanan arag axad caruurta uga naxariis badan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wiilkiisa lbraahiim\إبراهيم waxaa lagu nuujiyay xaafadda Al Caaliyah\العالية ee Al Madiinah\المدينة. Markaasuu aadi jiray, ayadoo aan annaguna la soconno. Markaasuu guriga galaa. Ninka haweenta nuujineysa qabana wuxuu ahaa tumaal. Markaasuu inta qaado dhunkadaa."

Wuxuu Al Bukhaarii\البخاري Caa'ishah\عائشة ka wariyay inay tiri:

"عاش سبعة عشر أو ثمانية عشر شهرا."

"Caasha sabcata cashra aw thamaaniyata cashra shahran."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"lbraahiim wuxuu noolaa toddoba iyo toban ama sideed iyo toban bilood."

Axmad\أحمد wuxuu isaguna wariyay inuu sided iyo toban bilood noolaa.

Al Waaqidii\الواقدي wuxuu wariyay inuu Ibraahii\إبراهيم ,Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhintay bisha Rabiicu Al Awwal\ربيع الأول, maalin talaado ah oo ay toban habeen ka gudbeen ee sanadka tobanaad ee Hijrada.

Muslim\مسلم wuxuu Jaabir\جابر ka wariyay inuu:

"Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf\عبد الرحمن بن عوف gacanta ku dhegey oo uu markaas keenay Al Nakhla\النخل oo ah geedaha timirta, mase waaba wiilkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo geeridu hayso.
Markaasuu soo qaaday oo uu dhabtiisa saaray, ayna labadiisa indhood, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ilmeeyeen, oo ay ilmadu kasoo hoortay. Kaddibna wuxuu yiri:

"إنا بك يا إبراهيم لمحزونون. تبكي العين ويحزن القلب وما نقول ما يسخط الرب."

"Innaa bika yaa Ibraahiimu la maxzuunuuna. Tabkii al caynu wa yaxzanu al qalbu, wa maa naquulu maa yaskhidhu Al Rabba."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Waan kuu tiiraanyeysannahay, Ibraahiimo\إبراهيم ! Ishu way ilmeyneysaa, qalbiguna waa tiiraanyeysan yahay, mana aan oraneynno, oo ku hadli maynno wax Rabbiga ka careysiiya."
Waxaa sidaas u wariyay Abuu Cumar bin Al Samaak \أبو عمر بن السماك.

Anas\أنس wuxuu intaas ku daray, siday saxiixa ugu sugnaatay:
"inuu Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** yiri:
"Adiguna waad booyeysaa!", isagoo la yaaban inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, booyayo.
Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ugu jawaabay:

"إنها رحمة."

"Innahaa raxmatun",
oo macneheedu yahay:
"Waa naxariis", oo macneheedu yahay inay ilmayntaasu tahay qalbi jilayc cunuggas dhintay, ayanse ahayn sabir darro iyo in Ilaahay loo caraysan yahay inuu Ibraahiim\إبراهيم qaatay."

Ibnu Sacd**إبن سعد** iyo Al Dhabraanii**الطبراني** waxay Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf **عبد الرحمن بن عوف** ka wariyeen inuu yiri:
"Markaasaan waxaan iri:
"Rasuula Ilaahayow, ma booyeysaa? Soo nagama aadan reebin boohinta marka qof dhinto?"
Markaassu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"إنما نهيت عن صوتين أحمقين فاجرين: صوت عند نغمة لهو ولعب ومزامير الشيطان، وصوت عند مصيبة، خمش وجوه، وشق جيوب، ورنة الشيطان. إنما هي رحمة، ومن لايرحم، لايرحم."

"Innamaa nahaytu can sawtayni axmaqayni faajirayni: sawtun cinda naghmata lahwin wa lacabin wa mazaamiira al sh-shaydhaani, wa sawtun cinda musiibatin, khamsha wujuuhin, wa shaqqa juyuubin, wa rannata al shaydhaani. Innamaa hiya raxmatun, wa man laa yarxamu, laa yurxamu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaan dadka ka reebay laba cod oo doqommo iyo xadgudub ah: (kow) hadal hoos loo yiraahdo marka lahwi iyo cayaar lagu dhexjiro iyo cuudka la afuufo –oo muusikada ah- ee shaydhaanka; iyo (labo) cod markay musiibo dhacdo, oo wajiyada ciddiyaha lagu xagto, dharka la xiran yahayna la jeexjeexo, iyo rannada -waa dhawaaqee- shaydhaanka, oo ah in lala qayliyo cod sanka kasoo baxaya. Boohintaanse waa naxariis, oo qofkaan naxariisanna isagana looma naxariisto."

Ibnu Xajar**إبن حجر** wuxuu Fatxu Al Baarii**فتح الباري** ku yiri:
"Wiilku, yaraantiisa daraadeed iyo inay markaas geeridiiba hayso ma uusan garanayn hadalka uu aabihiis, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, leeyahay, ee Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu hadalkaas ula dan lahaa dadka meeshaas goob joogga ahaa, uuna u sheegayo inayan taasi ka mid ahayn tii uu hore uga reebay."

Ibraahiim\إبراهيم, kaddib markuu dhintay, waxaa dhaqay Abuu Burdah**أبو بردة**, oo magaciisu yahay, sida caanka ah, Haani' Al Ansaarii**هانئ الأنصاري**.
Waxaa kaloola yiri waxaa dhaqay Al Fadlu ibnu Al Cabbaas**الفضل بن العباس**, Allaha raalli ka

wada noqdee. Waxaana dhici karta inay wada dhaqeen.

Markaasaa Ibraahiimإبراهيم waxaa looga soo qaaday sariir yar guriga haweenta nuujisay, ilaa laga keeno qubuuraha Al Baqiic\البقيع. Qubuurahaas dhexdooda ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku tukaday Salaadda janaazada, kulana tukaday afar Takbiirood. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"ندفنه عند فرطنا عثمان بن مظعون."

" **Nadfunuhu cinda fardhinaa Cuthmaan bin Mathcuun",**
oo macneheedu yahay:

"Waxaan ku ag duugeynnaa midka naga hormaray oo ah Cuthmaan bin Mathcuun\عثما بن مظعون."
Cuthmaan bin Mathcuunعثما بن مظعون wuxuu u dhashay Qurayshta\قريش reer Banii Jumax بني جمح\, wuxuuna ahaa ninka ugu horreeya ee Muhaajiriinta\المهاجرين Al Madiinah\المدينة ugu dhinta.

Caa'ishanaعائشة\ waxaa laga wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, uu dhunkaday Cuthmaan bin Mathcuunعثما بن مظعون oo mayd ah, isagoo ooyaya, labadiisa indhood ay ilmo ka hooreyso, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siduu ibnu Al Athiir\ابن الأثير Usudu Al Ghaabah\أسد الغابة ugu wariyay, uuna ku wariyay inuu ahaa ninka afar iyo tobnaad oo islaamah. Marka qabriga Ibraahiimإبراهيم halkaas laga qoday, waxaa qabrigiisa galay Al Fadlu ibnu Al Cabbaasالفصل إبن العباس\ iyo Usaamah bin Zayd bin Al Xaarithahأسامة بن زيد بن الحارثة\, ayadoo uu Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qabriga qarkiisa taagan yahay. Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu arkay meel luxudka ka daloosha, markaasuu ragga qabriga ku jira wuxuu u dhiibay cad dhoobo ah, wuxuuna yiri:

"إنها لاتضر ولاتنفع، ولكنها تقر عين الحي."

"Innahaa laa tadurru wa laa tanfacu, wa laakinnahaa taqarru cayna al xayyi",
siduu u wariyay ibnu Sacdابن سعد\, macneheeduna waxaa weeye:

"Wax dhib ahna ma gaysan karto, waxna tari mayso, laakiin waxaa ku farxaysa isha kan nool."

Markii qabriga ciidda lagu rogay, Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, biyo ayuu ku rusheeyey. Ibnu Sacdابن سعد\ wuxuu nin ka mid ah reer Aali Caliiآل علي\ ka wariyay inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam markuu Ibraahiimإبراهيم duugayey uu yiri:

"هل من أحد يأتي بقربة؟"

"Hal min axadin ya'tii bi qirbatin?"
oo macneheedu yahay:
"Axadkiinnee ayaa sibraar biyo ah noo keenaya?"
Markaasuu nin Ansaarta ka mid ihi keenay sibraar biyo ah. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qabriga Ibraahiimإبراهيم biyahaas ku rusheeyey.

Qabriga Ibraahiimإبراهيم waa qabriga ugu horreeyey oo la rusheeyo, siduu u yiri Al Zubayru ibnu Al Bakkaar\الزبير إبن البكار. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qabriga calaamad lagu aqoonsado ku calaamadeeyey. Qabriga Ibraahiimإبراهيم qofkii manta qabuuraha Al Baqiic\البقيع gala waa la yaqaannaa oo waa caan.

Maalintuu Ibraahiimإبراهيم, wiilka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhintay qorraxda ayaa madoobaatay. Markaasey waxay adadku yiraahdeen:
"Waxay la madoobaatay dhimashada Ibraahiimإبراهيم", ayagoo markaas ka hor rumaysnaan jiray inayan qorraxdu u madoobaan dhimashada qof wayn mooyee.
Markaasuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"إن الشمس والقمر آيتان من آيات الله، لاينخسفان لموت أحد، ولالحياته. فإذا رأيتم فصلوا وادعوا الله."

"Inna al sh-shamsa wa al qamara aayataani min aayaati Allaahi, laa yankasifaani li mawti axadin, wa laa li xayaatihi. Fa ithaa ra'aytum fa salluu wa udcuu Allaaha."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Qorraxda iyo dayuxu waa laba aayadood -calaamadood- ee aayaadka Ilaahay ka mid ah, umana ay madoobaadaan dhimashada axadna iyo noloshiisa midna. Marka haddaad aragtaan -waa qorraxda iyo dayaxa oo madoobaaday- salad tukada, Ilaahyna barya." Waxaana Xadiithka wariyey Al Bukhaarii iyo Muslim.

Markuu Ibraahiimإبراهيم dhintay, wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إن له مرضعا في الجنة."

"Inna lahu murdican fii at Jannati",
oo macneheedu yahay:

"Wuxuu ku leeyahay Jannada dhexdeeda haweeney nuujisa."
Waxaana wariyay Al Bukhaarii\البخاري iyo Ibnu Maajah\إبن ماجة.
Muslim\مسلم wuxuu wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إن له ظئرين يكملان رضاعه في الجنة."

"Inna lahu thi'rayni yakmilaani radaacahu fii al Jannati",
oo macneheedu yahay:
"Wuxuu Jannada dhexdeeda ku leeyahay laba haweeney oo nuujintiisa kaamilaya."

Abuu Cumar ibnu Cabdu Al Barr\أبو عمر إبن عبد البر wuxuu Anas bin Maalik\أنس بن مالك ka wariyay inuu yiri:
"Hadduu Ibraahiim\إبراهيم baaqi ahaan lahaa, wuxuu noqon lahaa Nabi. Laakiin baaqi ma uusan noqon, maxaa yeelay Nabigiinna, Sallaa Allaahu Calayhyi Wasallam, ayaa ah Nabiga ugu dambeeyey Anbiyada."

Saddex dariiq ayaa Xadiithkaan lagu wariyay, oo kala ah:

(Kow) Ibnu Maajah**إبن ماجة** iyo Al Bayhaqii**البيهقي** waxay ibnu Cabbaas**إبن عباس** ka wariyeen inuu yiri:
"Markuu dhintay Ibraahiim**إبراهيم**, wiilka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu ku tukaday, wuxuuna yiri:

"إن له مرضعا في الجنة، ولو عاش لكان صديقا نبيا. ولو عاش لاعتقت أخواله من القبط، وما استرق قبطي."

"Inna lahu murdican fii Al Jannati, wa law caasha la kaana Siddiqan Nabiyyan. Wa law caasha la actaqtu akhwaalahu mina al Qibdhi, wa maa istaraqqa Qibdhiyyun."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Wuxuu leeyahay murdicad Jannada dhexdeeda ku nuujineysa. Hadduu noolaan lahaana wuxuu ahaan lahaa Runlow Nabi ah. Haduu noolaan lahaana waxaan xorayn lahaa abtiyaalkiisa Qibdhiyyiinta ah, oo ah dadka Masar dega. Qof Qibdhi ahna lama addoonsadeen."

Al Burhaanu**البرهان** wuxuu yiri:
"Macneheedu waxaa weeye, hadduu noolaan lahaa, oo ay abtiyaalkiis arkaan way farxi lahaayeen, oo ay markaas islaami lahaayeen ku farxiddiisa iyo karaameyntiisa. Markaasaa jizyada laga ridi lahaa, ayadoo aan muslinka jizyo laga qaadin. Markaasey markay islaamaan ayagoo xor ah, lama addoonsanayo, ayadoo xorka muslinka ah aan la addoonsan karin."

(Labo) Xadiithka labaad waxaa wariyay Ismaaciil Al Suddii**إسماعيل السدي**, Abuu Muxammad **أبو محمد**, oo runlow ahaa reer Kuufah**كوفة** ah, oo uu Muslim**مسلم** afar Xadiith ka wariyay, wuxuuna wariyay inuu Anas**أنس** yiri:
"Ibraahiim**إبراهيم** xoolka oo ah gogosha caruurta -waana al mahdi**المهد**- ayuu buuxiyay, hadduu noolaan lahaana wuxuu ahaan lahaa Nabi. Laakiin baaqi ma uusan noqon, maxaa yeelay Nabigiinna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa ah Nabiga ugu dambeeyey Anbiyada".

(Saddex) Xadiithka saddexaad waxaa waraiyay Al Bukhaarii**البخاري**, oo ka wariyay Sheekhiisa Muxammad bin Bishr Al Cabdii Abii Cabdu Allaahi**محمد بن بشر العبدي أبي عبد الله** oo reer Kuufah **كوفة** ahaa, thiqqada lagu kalsoon yahay, ahaana xaafithka, dhintayna sanadka Hijriga ah ee laba boqol iyo saddex, wuxuuna Xadiithkaan ka wariyey Ismaaciil bin abii Khaalid al Axmasii al Bajalii**إسماعيل بن أبي خالد الأحمسي البجلي**, thiqqada lagu kalsoon yahay, dhammaantoodna ay Axaadiithta ka wariyeen, dhintayna sanadka laba boqol iyo lix iyo afartanka Hijriga, kanoo yiri:
"Waxaan Cabdu Allaahi bin Abii Awfaa**عبد الله بن أبي أوفى** ku iri, waana Saxaabiga Calqamah bin Khaalid bin Al Xaarith Al Aslamii**الصحابي علقمة بن خالد بن الحارث الأسلمي**, aabihiisna Saxaabi ahaa, kuna dhintay Kuufah**كوفة** sanadka toddoba iyo sideetanaad ee Hijrada, ahaana kan ugu dambeeyey Saxaabada oo Kuufah**كوفة** ku dhintay:
"Ma aragtay Ibraahiim**إبراهيم** , wiilka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?"
Wuxuu yiri:
"Wuxuu dhintay isagoo yar. Haddii la qadayn lahaa –oo uu Ilaahay sidaas xukumi lahaa- inuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nabi ka dambeeyo, wiilkiisa Ibraahiim**إبراهيم** **إبراهيم** wuu noolaan lahaa. Laakiin Nabi ka dambeeya ma jiro, Ilaahayna taas ma xukumin".

Ibnu Mundah**إبن منده** wuxuu ku daray inuu yiri:
"Haa waan arkay, isagaana dadka ugu ekaan badnaa."

Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Axmad**أحمد,** oo ka wariyay sheekhiisa Wakiic bin Al Jarraax وكيع بن الجراح, reer Kuufah**كوفة** ah, thiqqo lagu kalsoon yahay ah, xaafith iyo caabid ah.
Axmad**أحمد** wuxuu yiri:
"Ma aanan arag axad ka weeleyn badan cilmiga, kana xifthin badan, walina ma aanan arag isagoo kitaab wata ama warqad." Wuxuuna dhintay sanadka boqol iyo lix iyo sagaashanka Hijriga.
Wakiic**وكيع** wuxuu Xadiithkaas ka wariyay Ismaaciil**إسماعيل** –oo ah midka aan hore usoo sheegnay- oo yiri:
"Waxaan maqlay ibnu Abii Awfaa**إبن أبي أوفى** oo leh:
"Hadduu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dabadiis ahaan lahaa Nabi, wiilkiisa Ibraahiim**إبراهيم** ma dhinteen." Sidaas ayuu Xadiithakaani saxiix ku yahay.

Ibnu Al Qayyim**إبن القيم** iyo ghayrkiisba marka laga warramayo in Ibraahiim**إبراهيم** wiilka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, nuujintiisa lagu kaamilayo Jannada dhexdeeda, wuxuu yiri:
"Waxaa Xadiithkaas ku sugan inuu Ilaahay Subxaanahu dadka ehelu Jannada ah -ahlu al sacaadah**أهل السعادة**- kaddib markay dhintaan naaqusnimada ku sugnayd intay adduunkaan joogeen uu u kaamilayo, xattaa kan cilmiga baranaya ama Quraanka xifithaya markuu dhinto uu u kaamil yeelayo, oo u helayo dhimashadiisa kaddib." Allaha annagana noo kaso.

Ekaanshaha Ibraahiim**إبراهيم**

Wuxuu ibnu Mundah**إبن منده** wariyay inuu Ismaaciil bin abii Khaalid Al Axmasii Al Bajalii **إسماعيل بن أبي خالد الأحمسي البجلي\,** marka la waydiiyay inuu indhihiisa ku arkay Ibraahiim**إبراهيم** wiilka Nabi Mumammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yiri:
"Haa, waan arkay, isagaana dadka ugu ekaansho badnaa, waa aabihiise, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam".

Afar. Zaynab**زينب**, Sallaa Allahu Calayhaa Wasallam

Zaynab**زينب**, gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayadaa ugu wayn gabdhahiisa, oo ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu wariyay inay Zaynab**زينب** dhalatay markay soddon sano kasoo wareegatay dhalashadiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ahna toban sano Bicthada**البعثة** horteed.

Zaynab**زينب** Nabinnimada iyo Islaamka way soo gaartay, wayna islaamtay, Al Madiinaha Al Munawwarah**المدينة المنورة** ayay Hijradii u hijrootay mar ku began Duullaanka Badr**غزوة بدر** dabadeed, siduu ibnu Isxaaq\إبن إسحاق u wariyay, uuna ka wariyay Caa'ishah**عائشة,** Allaha raalli ka wada noqdee.

Zaynab**زينب** waxaa la oofsaday sanadka sideedaad ee Hijrada, siduu Al Waaqidii**الواقدي** uga wariyay Cabdu Allaahi bin Abii Bakr bin Xazm**عبد الله بن أبي بكر بن حزم.**

Waxaa sidoo kale u sugay Ibnu Xajar Al Casqalaanii**إبن حجر العسقلاني**, oo ku sugay kitaabkiisa Al Isaabah**الإصابة**. Ayagaas ghayrkoodna isla sidaas ayay wariyeen.

Zaynab**زينب** waxaa lagu oofsaday guriga ninkay u dhaxday, oo isla markaas ah ina habaryarteed, koofaartiisuna tahay Abuu Al Caasii**أبو العاصي**, magaciisuna Qaasim**قاسم**, siday u wariyeen Al Suhaylii**السهيلي** iyo ibnu Xajar**إبن حجر** oo Fatxu Al Baarii**فتح الباري** sidaas ku sheegay.
Abuu Al Caas**أبو العاص** magaciisoo buuxana waa Qaasim ibnu Al Rabiic ibnu Cabdu Al Cuzzaa bin Cabdu Shams bin Cabdu Manaaf Al Qurashiyyi Al Cabdshamiyyi **قاسم إبن الربيع إبن عبد العزى بن عبد شمس بن عبد مناف القرشي العبشمي**\.
Abuu Al Caasii**أبو العاصي** hooyadiisa dhashay waa Ummu Al Mu'miniina Khadiijah bintu Khuwaylid**أم المؤمنين خديجة بنت خويلد** walaasheed oo magaceedu yahay Haalah bintu KhuwayIid**هالة بنت خويلد** , oo ayada lafteedu Saxaabiyad ahayd.
Haalah**هالة** ayaa mar Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka ithan qaadatay inay usoo gasho, waana kaddib markii Khadiijah**خديجة** la oofsaday, markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu aqoonsaday ithan qaathashadii Khadiijah, markaasuu naxay, wuxuuna yiri:

"أللهم هالة!"

"Allaahumma Haalah",
oo macneheedu yahay:
"Ilaahayow Haalah", siduu Al Bukhaarii**البخاري** Caa'ishah**عائشة** uga wariyay.

Calii**علي**, wiilka Zaynab**زينب**

Zaynab**زينب** waxay Abuu Al Caasii**أبو العاصي** u dhashay wiil la yiraahdo Calii**علي**, saxaabina ah, sida aabihiis oo kale, kana mid ah **Asbaadha****الأسباط** Nabi Muxammad, Sallaa Allaahyu Calayhi Wasallam. Calii waxaa nuujisay haweeney u dhalatay reer Banii Ghaadirah**بني غديرة**.

Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kasoo qaatay, ayadoo uu Abuu Al Caasii **أبو العاصي** markaas Makkah**مكة** ku sugan yahay isagoo wali gaal ah.
Markaasuu wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"من شاركني في بني فأنا أحق به منه. وأيما كافر شارك مسلما في شيئ فالمسلم أحق به منه."

"Man shaarakanii fii baniyya fa anaa axaqqu bihi minhu. Wa ayyamaa kaafirin shaaraka musliman fii shay'in fa al muslimu axaqqu bihi minhu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Qofa caruurteyda ila wadaaga, anigaa isaga uga xaq leh. Qof walba oo gaal ah oo muslim shay kula shirkoobana muslimka ayaa isaga shaygaas uga xaq leh."
Ibnu Xajar**إبن حجر** ayaa Al Isaabah**الإصابة** ku wariyay. Waxaana kaloo wariyay Al Dhabraanii**الطبراني**.

Wiilkaasu wuxuu dhintay markuu da'da lagu qaangaaro u dhowaaday, kaddib dhimashada

hooyadiis, isagoo uu markaas aabihiis nool yahay, siduu Al Zubayru\الزبير uga wariyay Cumar bin Abii Bakr al Muusilii\عمر بن أبي بكر الموصلي.

Ibnu Casaakirna\إبن عساكر wuxuu yiri:
"Culummo cilmiga nasabka ku xeel dheer waxay sheegeen in Calii\علي lagu dilay Duullaanka Maalinta Yarmuuk\يوم يرموك, sanadka laba iyo tobnaad ee Hijrada, cahdiga Abuu Bakar Al Siddiiq\أبو بكر الصديق, Allaha raalli ka wada noqdee."

Calii\علي wuxuu hasha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka saarna xagga dambe ee ah dhabarka Rasuulka, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maalintuu Makkah\مكة furtay.

Umaamah\أمامة, gabadha Zaynab\زينب

Zaynab\زينب waxay kaloo Abuu Al Caasii\أبو العاصي u dhashay gabar magaceebu yahay Umaamah\أمامة, ahna gabarta uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, tunkiisa ku qaaday Salaadda Subax isagoo tukanaya, siduu u wariyay Al Zubayru ibnu Bakkaar\الزبير إبن البكار.

Abuu Daa'uudna\أبو داود wuxuu Abuu Qataadah\أبو قتادة ka wariyay inuu yiri:
"Annagoo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sugaynna, oo Salaadda Duhur ama Casar, ayuu inoo soo baxay (oo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam gurigiisa oo albaab Masjidu furma leh kasoo baxay), ayadoo ay Umaamah\أمامة tunkiisa saran tahay. Markaasuu Salaadda u istaagay, annaguna gadaashiisa ayaan istaagnay."

Sidaasoo kale wuxuu Imaam Maalik\الإمام مالك ku wariyay kitaabkiis Al Muwadh-dha'\أ الموطأ .

Al Bukhaarii\البخاري iyo Muslim\مسلم waxay ayaguna ka wariyeen Abuu Qataadah\أبو قتادة
"inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, tukanayey isagoo Umaamah\أمامة xambaarsan. Markaasuu markuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sujuudo ayuu dhulka dhigaa, markuu istaagana uu qaadaa."

Muslim-na\مسلم wuxuu yiri:
"Markuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rukuuco, dhulka ayuu dhigaa, markuuna madaxiisa sujuudda kasoo qaadana wuu soo celiyaa."

Wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sidaas u yeelayaa isagoo Umaamah\أمامة jeclaa, una naxariis badnaa.

Axmad\أحمد wuxuu Caa'ishah\عائشة ka wariyay inay tiri:
"Al Najaashii\النجاشي (oo ahaa Boqorka arliga amxaarada) ayaa wuxuu hadiyad ahaan ugu soo diray xullatan\حلة (oo ah waxay hawenku xirtaan oo qaaliga ah sida murriyadda dahabka ah), uuna ku jiro faragashi dahab ah, faskiisuna uu xabashi yahay. Markaasuu Umaamah\أمامة siiyay."

Ibnu Sacad\إبن سعد iyo Axmad\أحمد iyo Abuu Yaclaa\أبويعلى waxay ayaguna Caa'ishah\عائشة ka

wada wariyeen inay tiri:"
"أهديت له هدية فيها قلادة، جزع معلمات بالذهب ونساؤه كلهن مجتمعات في بيت، وأمامة تلعب في جانب البيت بالتراب، فقال: "كيف ترين هذه؟" فنظرنا إليها فقلنا: "ما رأينا أحسن منها، ولاأعجب"، فقال: "لأدفعنها إلى أحب أهلي إلي"، فقالت النساء: "ذهبت بها ابنة أبي قحافة"، فدعا صلى الله عليه وسلم أمامة بنت زينب فعقدها بيده في عنقها وكان على عينها عمص، فمسحه بيده." وفي رواية: "فأقبل بها حتى وضعها في رقبة أمامة، فسري عنا."

“Uhdiyat lahu hadiyatun fiihaa qalaadatun, jazacun mucallimaatun bi al thahabi wa nisaa’uhu kulluhunna mujtamicaatun fii baytin, wa Umaamah talcabu fii jaanibi al bayti bi al turaabi, fa qaala: “kayfa tariini haathihi?” Fa natharnaa ilayhaa fa qulnaa: “maa ra’aynaa axsana minhaa. Wa laa acjaba”. Fa qaala: “la adfacannahaa ilaa axabba ahlii ilayya.” Fa qaalati al nisaa’u: “thahabat bihaa ibnatu Abii Quxaafah.” Fa dacaa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam Umaamah binti Zaynab fa caqadahaa bi yadihi fii cunuqihaa wa kaana calaa caynihaa camsun, fa masaxahu bi yadihi.” Wa fii riwaayatin: “fa aqbala bihaa xattaa wadacahaa fii raqabati Umaamah, fa suria cannaa.”
Xadiitha macnihiisu waxaa weeye:

Waxaa loo keenay oo loo hadiyeeyey Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam hadiyad ay ku jirto qoorxir iyo xariir dahab lagu dheehay oo lagu calaamadeeyey dahab, ayadoo ay haweenkiisu kulligood guri ku wada kulansan yihiin, Umaamahna ay guriga dhiniciisa ay ciid ku cayaareyso. Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:
"Sideebaa middaan u aragtaan?"
Markaasaan fiirinnay, aanna niri:
"Wax ka qurxoon hore uma aanan arag, kana yaab badan!"
Markaasuu wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:
"Waxaan siinayaa qofka aan ehelkeyga ugu jeclahay."
Markaasey haweenku waxay yiraahdeen:
"Hadaba waxaa qaadatay, oo la siiyay, gabadha Abii Quxaafah (oo ah Caa'ishah lafteeda)". Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u yeeray Umaamah\أمامة gabadha Zaynab\زينب, oo uu markaas gacantiisa qoorta ugula xiray, ayadoo uu (waa gabadhee) uu indhaha cunnada la yiraahdo aal camasu uga taallo.
Markaasuu, Sallallaahu Calayhi Wasallam, (gabadha indheheeda cunnadaas ku taalla) gacantiisa uga tiray".
Umaamahأمامة waxaa guursaday Amiirul Al Mu'miniina Calii bin Abii Dhaalib أمير المؤمنين علي بن أبي طالب\, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayadoo ay Faadhimah\فاطمة, Sallaa Allaahu Calayhaa Wasallam, kala dardaarantay ayada dabadeed inuu Umaamah guursado, waxaana u guuriyey Al Zubayru bin Al Cawwaamuالزبير بن العوام, ayadoo uu Umaamahأمامة aabeheed Al Zubayruالزبير kala dardaarmay.

Caliiعلي\ waxaa la dilay isagoo ay u dhaxdo, intuusan dhimanna wuxuu kala dardaarmay Al Mughiirah bin Nawfal bin Cabdu Al Xaarith bin Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim المغيرة بن نوفل بن عبد الحارث بن عبد المطلب بن هاشم\ inuu guursado isaga dabadiis.

Markaasu Al Mughiirahالمغيرة\ geerida Caliiعلي\ kaddib guursaday, waxayna u dhashay wiil la

yiraahdo Yaxyaa\يحيى, oo isaga lagu koofaaray oo la oran jiray Abuu Yaxyaa\أبو يحيى oo ah Yaxyeيحيى aabihiis.

Umaamahأمامة waxaa la oofsaday ayadoo Al Mughiirahالمغيرة u dhaxda. Waxaa kaloo la sheegay inayan Caliiعلي iyo Al Mughiirahالمغيرة ayan midkoodna caruur u dhalin.

Hijrada Zaynab\زينب

Ninkay Zaynab\زينب u dhaxday, oo ah Abuu Al Caasii\أبو العاصي, wuxuu ka mid ahaa gaalada uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Maalinta Badar\غزوة بدر kusoo qafaalay. Gaar ahaan Abuu Al Caasiiأبو العاصي waxaa soo qafaalay saxaabiga la yiraahdo Cabdu Allaahi bin Jubayr Al Ansaarii\عبد الله بن جبير الأنصاري.

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق iyo ghayrkiisba waxay yiraahdeen:
"Marka Abuu Al Caasii\أبو العاصي duullaanka Badar\غزوة بدر lagu soo qafaalay (isagoo wali markaas gaal ah), Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu ku manneystay inuu xoreeyey, markuu Makkah\مكة kusoo laabtay, ayuu wuxuu Zaynabزينب ku amray inay xagga aabeheed, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u haajirto, oo ay u guurto Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة.

Dhacdadaasi waxay ahayd hal bil in xoogaa ka badan dagaalka Badar\بدر dabadiisa.
Markaasey Zaynabزينب socdaalkaas isku diyaarisay. Markay Zaynabزينب diyaar noqotay ayuu wuxuu ku qaaday hawdaj\هودج (hawdaj waxaa la yiraahdaaq aqalka yar oo haweenka ratiga lagu qaadayo looga kor dhiso, si ay u asturnaato, uuna dabaysha iyo kulaylka iyo qabawga iyo ciidda iyo roobka iyo isha dadkaba uga dhawro) rati korkiisa ah, uuna hoggaankiisa hayo isaga walaalkiis oo magaciisu yahay Kinaanah ibnu Al Rabiic\كنانة إبن الربيع.

Kinaanahكنانة wuxuu watay qaansadiisa iyo gabooye ay fallaaro ugu jiraan. Markuu la dhaqaaqay, oo uu xagga Al Madiinbah Al Munawwarah\المدينة المنورة ula kacay, ayaa waxaa kasoo daba baxay rag Quraysh\قريش ah, ugana daba tegey meesha la yiraahdo Thii Dhuwaa ذي طوى\.

Raggaas waxaa Zaynabزينب ugu horreeyey nimanka la kala yiraahdo Habbaar bin Al Aswad هبار بن الأسود iyo Naafic bin Cabdi Qays al Fihriyyi\نافع بن عبد قيس الفهري, midkaan damboo mar dambe islaamay.
Markaasuu Habbaarهبار gabadha warankiisa ku cabsiiyey, ayadoo markaas xaamilo ah, oo uur leh. Markaasey ratiga kasoo dhacday, cunuggiina uu kasoo dhacay. Markaasaa waxaa kacay dumaashigeed Kinaanahكنانة, oo intuu fallaarihiisa hortiisa ku daadiyay ayuu wuxuu yiri:
"Wa Allaahi\والله inaan ninkii ii soo dhowaada (waana Zaynabزينب iyo isaga laftiisa usoo dhowaada) fallaar ku dhejinayo."

Markaasey ka kala carareen. Markaasaa waxaa Kinaanahكنانة u yimid Abuu Sufyaan\أبو سفيان oo ay la socdaan madax badan ee Quraysh\قريش, wuxuuna Kinaanahكنانة ku yiri:
"War naga jooji fallaarahaaga, inaan kula hadalno ayaan dooneynaaye."

Markaasuu fallarihiisa ka celiyay. Markaasuu intuu u yimid ayuu Abuu Sufyaan\أبو سفيان wuxuu yiri:
"Waad ogsoon tahay musiibada na haleeshay iyo dhibaataduu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, noo geystey. Marka, haddaad gabadhiisa ayadoo uu dadku u jeedo la baxdid, dadku wuxuu u maleynayaa inay taasi ku ahaatay dulli ka yimid musiibadeenna (waana jabka Badar\بدر gaalada reer Makkah\مكة lagu jabiyay, oo wax la dilay -oo toddobaatan nin ahaa- iyo wax la qafaashay -oo ayaguna toddobaatan nin ahaa- iyo wax cararay noqday oo dhabarka jeediyey) iyo taagdarro. Annaguna inaan gabadha aabeheede, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka celinno dan kama lihin. Marka, markaan Makkah\مكة ku noqo, oo markuu hadalku damo, laguna sheekeysto inaan (Zaynab\زينب) soo celinnay, si sir ah ula xaluulo, aabeheedna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka daba gee."

Thuu Dhuwaa\ذو طوى

Meeshaas "Thuu Dhuwaa\ذو طوى la yiraahdo waxay hadda ka mid tahay magaalada Makkah Al Mukarramah\مكة المكرمة, oo waa la deggan yahay, waana beesha ay ku yaallaan xaafadaha la kala yiraahdo Al Cutaybah\العتيبة, iyo Jarwal\جرول iyo Al Tandabaawaa\التندباوى iyo Xaarratu Al Barnuu\حارة البرنو (oo al Barnuu waa qabiil ka mid ah dadka Nigeria dega iyo gobol Nigeria ka mid ah, oo dad asalkooda halkaas ka yimid ayaa halkaan deggan) iyo inta badan ee wadada la yiraahdo Shaaricu Al Mansuur\شارع المنصور, iyo Al Liidh\الليط. Magacaasu wuxuu hadda ku koobmay ceel xaafadda Jarwal ku yaalla oo la yiraahdo Bi'ru Dhuwaa\بئر طوى, ahna bartuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kula hoyday jayshkiisa Jayshu Al Fatxi\جيش الفتح, maalintuu Makkah\مكة furtay.
Walaaleheen reer Maghrib\المغرب way ku dadaalaan booqashada ceelkaas iyo inay biyihiisa wax ka cabbaan."
Waxaan warkaas kasoo qaadannay kitabka la yiraahdo Mucjamu al macaalimi al jughraafiyyah fii Al Siirah Al Nabawiyyah\معجم المعالم الجغرافية في السيرة النبوية, uuna dhigay Caatiq bin Ghayth Al Balaadii\عاتق بن غيث البلادي, oo sucuudi u dhashay Allaha u naxariistee, bogga boqol sideed iyo sideetan, ayna daabacday Daaru Makkah ee Makkah Al Mukarramah ku taalla. Anigo ceelkaas waan dul istaagay, waxaana ku jaban quful albaabkiisa, waxaana ku dhigan Bi'ru Dhuwaa بئر طوى\.

Hind bintu Cutbah\هند بنت عتبة oo xaalka Zaynab\زينب baareysa

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Waxaa la ii wariyay inay Zaynab\زينب tiri:

"بينا أنا أتجهز بمكة للحوق بأبي لقيتني هند بنت عتبة، فقالت: "يا بنت محمد، ألم يبلغني أنك تريدين اللحوق بأبيك؟" قالت: فقلت: "ما أردت ذلك"، فقالت: "إي إبنة عمي، لاتفعلي، إن كانت لك حاجة بمتاع مما يرفق في سفرك، أو بمال تتبلغين به إلى أبيك، فإن عندي حاجتك، فلا تضطني مني، فإنه لا يدخل بين النساء ما بين الرجال." قالت: "والله ما أراها قالت ذلك إلا لتفعل"، قالت: "ولكني خفتها، فأنكرت أن أكون أريد ذلك، وتجهزت."

“Baynaa anaa atajahhazu lilluxuuqi fi abii laqaytunii Hindu bintu Cutbah, fa qaalat:

“Alam yablughnii annaki turiidiini al lluxuuqa bi abiiki?” Qaalat: faqultu: “maa aradtu thaalika.” Fa qaalat: “Ayy bintu cammii, laa tafcalii, in kaanat laki xaajatun bi mataacin mimmaa yarfuqu biki fii safariki, aw bi maalin tataballaghiini bihi ilaa abiiki, fa inna cindii xaajatuki, falaa tad-dhanii minnii, fa innahu laa yad-khulu bayna al nisaa’i maa bayna al rijaali.’ Qaalat: “”Wa Allaahi maa araahaa qaalat thaalika illa li tafcala”. Qaalat: “wa laakinnii khiftuhaa, fa ankartu an akuuna uriidu thaalika, wa tajahhaztu.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weey:

"Anigoo Makkah**مكة** jooga, oo isku diyaarinaya inaan aabahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka daba tago, ayaa waxaa ila kulantay, oo ii timid Hind bintu Cutbah**هند بنت عتبة**.
Markaasey waxay tiri:
"Ina Muxammaday! Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo ima ayan soo gaarin inaad dooneysid inaad aabahaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka daba tagtid?"
Markaasaan waxaan ku iri:
"Taas ma doonin."
Markaasey waxay tiri:
"Ina adeerteeyey! Ha yeelin. Haddaad u baahan tahay mataac safarkaaga kuu sahli kara, ama maal aad ku gaartid aabahaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, anigaa kuu haya waxaad u baahan tahay, ee marka ha xishoon, ayadoo uusan haweenka kala dhexgelin wax ragga kala dhex gala."
Zaynab**زينب** waxay tiri:
"Wa Allaahi**والله** uma aanan arag inay sidaas u tiri inay waxaas ay tiri yeesho mooyee (oo ah inay aabeheed Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ka daba tagto, ayaduna ay sahay siineyso hadday u baahan tahay), laakiin ayadaan ka baqay. Markaasaan is diyaariyay."
Waa intaas warka Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** uu wariyay.

Zaynab**زينب** waxay hijrootay habeennimo

Sidaasuu Abuu Sufyaan**أبو سفيان** ku taliyay ayuu Kinaanah**كنانة** yeelay, oo Zaynab**زينب** Makkah **مكة** ayuu dib ugula noqday, halkaasoo ay hebeenno joogtay.
Kaddib habeennimo ayuu la baxay, uuna waday ilaa uu hoggaan ratigeeda uga dhiibo, oo uu gacanta u geliyo Zayd bin Xaarithah**زيد بن حارثة** iyo saaxiibkiisa Ansaarta ka mid ah, labadaasoo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo diray, uuna ku amray inay istaagaan bartamah waadiga Ya'jaj**يأجج,** halkaasna ay ku sugnaadaan ilaa ay kasoo marto Zaynab**زينب**, wuxuuna yiri:

"كونا ببطن يأجج حتى تمر بكم زينب. فأصحباها حتى تأتياني بها."

"Kuunaa bi badhni Ya'jaj xattaa tamurra bikumaa Zaynab. Fa asxabaahaa xattaa ta'tiyaanii bihaa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ku sugnaada bartamaha waadiga Ya'jaj**يأجج** ilaa ay idinka soo marto Zaynab**زينب**. Markaas soo raaca ilaa aad aniga iiga keentaan."

Markaasey markay Zaynabزينب halkaas soo martay ayay Kinaanah\كنانة kala wareegeen, oo ay aabeheed, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u keeneen oo ay gacanta usoo geliyeen.

Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu isaguna Cabdu Allaahi bin Al Zubayr\عبد الله بن الزبير ka wariyay inuu yiri:

"Nin ayaa Zaynabزينب xagga Al Madiinah\المدينة usoo waday. Markaasaa waxaa ka daba tegay laba nin oo Quraysh\قريش ah, markaasey ninkii waday uga adkaadeen oo ay ratigay saarnayd kasoo tuureen, oo ay dhagax wayn kusoo kor dhacday.

Markaasuu cunuggay uurkiisa lahayd kasoo dhacay, dhiig badanna uu ka baxay. Markaasey intay qaadeen waxay u geeyeen Abuu Sufyaan\أبو سفيان. Abuu Sufyaan\أبو سفيانgurigiisa ayaa markaas waxaa Zaynabزينب ugu yimid haweenka reer Banuu Haashim\بني هاشم.

Markaasuu Abuu Sufyaan\أبو سفيان Zaynabزينب haweenkaas u dhiibay oo siiyay. Markaas kaddibna way hijrootay.

Zaynabزينب way dareemi jirtay xanuunka maalintaas gaaray, oo kama uusan tegin ilaa ay ka dhimatay. Sidaas daraadeed ayuu wuxuu dadku u arkayey inay Zaynabزينب shahiidad tahay. Waxaad mooddaa inuu Abuu Sufyaan\أبو سفيان markuu dumaashigeed soo celiyay, uuna beer dulucsaday, oo uu markaas gurigiisa geeyey, si uu taas caan ugu noqdo, oo loo ogaado inuu isagu Zaynabزينب Makkah\مكة kusoo celiyay. Markaasey markay haweenka reer Banuu Haashim بني هاشم\ u yimaadeen ayuu ayaga u dhiibay. Sababtuna waxay tahay inuu Abuu Sufyaan\أبوسفيان faanka jeclaa."

Zaynabزينب waxay haajartay Abuu Al Caasii\ابو العاصي hortiis.

Waadii Ya'jaj\وادي يأجج

"Ya'jaj\يأجج waa waadi k amid ah waadiyada Makkah\مكة, xagga waqooyina ka xigah Al Tanciimu\التنعيم oo ah meeshuu ku yaallo Masjidu Caa'ishah\مسجد عائشة.

Waadiga Waadii Al Tanciim\وادي التنعيم ayaa ku biyo roga Waadii Ya'jaj\وادي يأجج, kuna roga dariiqa Al Madiinah\المدينة loo aado meel dariiqaasi gooyo oo Kacbada toban kiiloomitir waqooyiga ka xigta. Hadda waxaa loo yaqaannaa **Yaaj\ياج,** waxaana degah qabiilka Lixyaanلحيان oo Huthayl\هذيل ka tirsan"

Waxaa sidaas sheegay Caatiq bin Ghayth Al Balaadiyyu\عاتق بن غيث البلادي, uguna sheegay kitaabkiisa Mucjamu Al Macaalimi Al Jughraafiyyah fii Al Siirah Al Nabawiyyah معجم المعالم الجغرافية في السيرة النبوية\.

Habbaar\هبار dhiiggisu waa xalaaloobay

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:

"Abuu Hurayrah\أبو هريرة wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa wuxuu diray ciidan duullaan ah, oo aan aniguna ku jiro, wuxuuna nagu yiri:

"إن ظفرتم بهبار بن الأسود، أو الرجل (الآخر) الذي سبق معه إلى زينب فحرقوهما بالنار."

"In thafirtum bi Habbaara bin Al Aswad, aw al rajula (al aakhar) allathii sabaqa macahu ilaa Zaynab fa xarriquuhumaa bi al nnaari".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Haddaad qabataan Habbaar bin Al Aswad\هبار بن الأسود iyo ninka kale (oo uu ibnu Hishaam إبن هشام\ sheegay inuu magaciisu ahaa Naafic bin Cabdi Qays\نافع بن عبد قيس) dab ku guba labadoodaba."
Xadiithka waxaana wariyay Al Daarimii\الدارمي iyo ibnu Abii Shaybah\إبن أبي شيبة.

Maalintii taas ku xigtay ayuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, noo soo ciddiray, markaan u nimidna wuxuu na yiri:

"إني كنت أمرتكم بتحريق هذين الرجلين إن أخذتموهما، ثم رأيت أنه لاينبغي لأحد أن يعذب بالنار إلا الله. فإن ظفرتم بهما فاقتلوهما."

"Innii kuntu amartukum bi taxriiqi haathayni al rrajulayni in akhath-tumuuhumaa, thumma ra'aytu annahu laa yanbaghii li axadin an yucath-thiba bi al nnaari illaa Allaahu. Fa in thafartum bihimaa fa aqtuluuhumaa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waa anigii idin amray inaad labadaas nin gubtaan haddaad gacanta ku dhigtaan. Kaddibna waxaan u arkay inayan axadna u habbooneyn inuu dab wax ku cathaabo Ilaahay mooyee. Marka haddaad labadooda qabataan dila."

Zaynabزينب oo madax furashada Abuu Al Caasii\أبو العاصي soo dhiibtay

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, intuu Makkah\مكة joogay waxna ma xalaaleyn jirin, waxna ma xaaraantimeyn jirin, isagoo amarkiisa looga adkaa (oo Dawladda Makkah\مكة ka dhisan gaalo ayay ahayd). Islaamka ayaana Zaynabزينب, gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallala Alaahu Calayhi Wasallam, iyo Abuu Al Caasii ibnu Al Rabiic **أبو العاصي إبن الربيع** kala geeyey. Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ma uusan karin inuu kala furo, oo weli sooma ayan degin Aayadda laba boqol iyo kow iyo labaatan ee Suuratu Al Baqarah\سورة البقرة (oo oraneysa:

وَلَا تُنْكِحُوا الْمُشْرِكِينَ

"Wa laa tunkixuu al mushrikiina(221)"
oo macneheedu yahay:
"Hana u guurinina ragga mushrikiinta ah(221)".).

Sidaas ayay Zaynab\زينب Abuu Al Caasi\i**أبو العاصي** agtiisa ku ahayd, ayadoo Muslimad ah, isaguna uu gaalnimadiisa ku taagan yahay, ilaa uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka haajiray.

Markaasey markay Qurayshi\قريش Badar\بدر tagtay, waxaa la socday Abuu Al Caasii bin Al

Rabiic**أبو العاصي بن أبي الربيع.** Markaasuu wuxuu ka mid noqday ragga qafaalka maalintaas Badar**بدر** ay muslimiintu gacanta ku dhigeen.
Markaasaa loo qaaday Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة,** oo uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, agtiisa joogay."

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu wariyay inay Caa'ishah**عائشة** tiri:

"لما بعث أهل مكة في فداء أسرائهم، بعثت زينب بنت رسول الله صلى الله عله وسلم في فداء أبي العاص إبن الربيع بمال، وبعثت فيه بقلادة لها كانت خديجة أدخلتها بها على أبي العاص حين بنا عليها"، قالت: "فلما رآها رسول الله صلى الله عليه وسلم رق لها رقة شديدة وقال: "إن رأيتم أن تطلقوا لها أسيرها، وتردوا عليها مالها، فافعلوا." فقالوا: "نعم يا رسول الله." فاطلقوه، وردوا عليها الذي لها."

“Lammaa bacatha Ahlu Makkah fii fidaa’i usaraa’ihim, bacathat Zaynab bintu Rasuuli Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam fii fidaa’i Abii Al Caas ibna Al Rrabiic bi maalin, wa bacathat fiihi bi qalaadatin lahaa kaanat Khadiijah ad-khalathaa bihaa calaa Abii Al Caas xiina banaa calayhaa.” Qaalat: “Falammaa ra’aahaa Rasuulu Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam raqqa lahaa raqqatan shadiidatan, wa qaala: “in ra’aytum an tudhliquu lahaa asiirahaa, wa tarudduu calayhaa maalahaa, fa afcaluu.” Fa qaaluu: “Nacam yaa Rasuula Allaahi.” Fa adhlaquuhu, wa rudduu calayhaa allathii lahaa.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Markay reer Makkah soo direen maalka madax furashada ragga laga qafaalay, ayay Zaynab, gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay soo dhiibtay madax furashada Abuu Al Caasii ibnu Al Rabiic. Maalkaasna waxaa ka mid ahaa tay haweenku qoorta ku xirtaan oo ay (hooyadeed) Khadiijah lahaan jirtay, ayna gabadheeda siisay habeenka Abuu Al Caasii loo aqal geeyey." Waxay tiri: "Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arkay ayuu u beer jilcay, beer jilayc xoog leh, wuxuuna yiri: "Haddaad sidaas u aragtaan, oo ay idinla noqoto inaad qafaalkeedana u sii deysaan, maalkeedana aad u celisaan, sidaas yeela." "Markasey sidaas yeeleen, waxayna yiraahdeen: "Waa yahay Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam!" Markaasey sii daayeen, maalkeedana u celiyeen."

Zaynab**زينب** oo Abuu Al Caasii**أبو العاصي** magangelisay

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Furashada Makkah in yar horteed ayuu Abuu Al Caasii**أبو العاصي** ganacsi ugu safray xagga Shaam**الشام,** isagoo wada maal uu leeyahay iyo mid ay rag Quraysh**قريش** ah u dhiibteen, isagoo ahaa nin aamin ah oo la aamino.
Markuu ganacsiga Shaam**الشام** kasoo jeestay, ayuu Al Caasii**أبو العاصي** wuxuu usoo gaddoomay xagga Makkah**مكة.** Markaasaa waxaa dariiqa ka helay ciidan Muslim ah. Markaasey maalka oo idil kala wareegeen, oo ay ghaniimaysteen, isaguna wuu ka baxsaday oo way gaari waayeen.
Markaasaa markuu ciidankaasu isagoo wata maalkay kala wareegeen Al Madiinah**المدينة** soo galeen, ayuu isaguna habeennimada magaalada soo xaluushay, oo gurigeeda ugu soo galay Zaynab**زينب,** gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uuna magangelyo weydiistay.

Markaasey magangelisay.
Sababtuu ugu yimidna waxay ahayd isagoo doonaya maalkiisa laga soo qaatay. Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Salaadda Subax usoo baxay, oo uu Takbiirsday oo Salaadda xirtay, dadkuna ay ka daba xirteen, ayay Zaynab**زينب** waxay ka qaylisay safka haweenka, waxayna tiri:

"أيها الناس! إني قد أجرت أبا العاص بن الربيع."

“Ayyuhaa al nnaasu! Inni qad ajartu Abaa Al Caas bin Al Rabiic.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Hooy dadow! Anigu waxaan magan geliyay Abuu Al Caasii bin Al Rabiic**أبو العاصي**."

Markaasuu markuu Salaadda dhammeeyey, oo uu Salaamo naqsaday, ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xagga dadka usoo jeestay, uuna yiri:

"أيها الناس! هل سمعتم ما سمعت؟"

“Ayyuhaa al nnaasu! Hal samictum maa samictu?”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Dadow ma maqasheen waxaan aniguna maqlay?"
Waxay yiraahdeen:
"Haa".
Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أما والذي نفس محمد بيده ما علمت بشيئ من ذلك حتى سمعت ما سمعتم. إنه يجير على المسلمين أدناهم."

"Amaa wa Allathii nafsu Muxammadin bi yadihi maa calimtu bi shay'in min thaalika xattaa samictu maa samictum. Innahu yujiiru calaa al Muslimiina adnaahum."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaan ku dhaartay Midkay nafta Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Gacantiisa ku jirto, inaanan shay'na ka ogayn arrinkaas jeer aan maqlay waxaad adinkuna maqasheen. Muslimiinta waxaa wax ka magan geliya kooda ugu tabar yar."

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Masjidka ka baxay, uuna gabadhiisa qolkeeda ugu galay, kuna yiri:

"أي بنية، أكرمي مثواه، ولا يخلصن إليك، فإنك لاتحلين له."

"Ay bunayyata, akrimii mathwaahu, wa laa yakhlusanna ilayki, fa innaki laa taxilliina lahu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Gabadhaydey, karaamee joogiddiisa iyo degmadiisa, yuunna kusoo gaarin oo yuusan ku taaban, maxaa yeelay adigu isaga xalaal uma tihid (oo ayaduna waa muslimad, isaguna markaas waa gaal)". Sharciguna waa kaas, oo gabar Muslimad ah nin gaal ahi xalaal uma aha oo ma guursan karo. Waxaa kaloo wariyay Al Dhabraanii\الطبراني.

Islaamidda Abuu Al Caasii bin Al Rabiic\أبو العاصي بن الربيع

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u ciddiray oo u yimid ragga maalka Abuu Al Caasii kala wareeegay, wuxuuna ku yiri:

"إن هذا الرجل منا حيث علمتم، وقد أصبتم له مالا. فإن تحسنوا وتردوا عليه الذي له، فإنا نحب ذلك. وإن ابيتم فهو فيئ الله الذي أفاء عليكم، فأنتم أحق به."

"Inna haathaa al rajulu minnaa xaythu qad calimtum, wa qad asabtum lahu maalan. Fa in tuxsinuu wa tarudduu calayhi allathii lahu, fa innaa nuxibuu thaalika. Wa in abaytum fa huwa fay'u Allaahi allathii afaa'a calaykum, fa antum axaggu bihi."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ninkaani waxaad ogsoon tihiin ayaan u nahay, waxaadana ka qaadateen maal. Marka, haddaad samafashaan oo uu wuxuu leeyahay aad usoo celisaan, taasi waa mid aan jecel nahay. Haddaad diiddaanna, maalkaasu waa fay uu Ilaahay idin siiyay (Fay\فيئ waa maalka gaalada lagala wareego dagaal iyo xarbi la'aan), adinkaana ku xaq leh."

Markaasey waxay yiraahdeen:
"Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, bal waa usoo celineynnaa."
Markaasey usoo celiyeen ilaa heer ay rag baaldi usoo celiyey iyo sibraar duug ah iyo harag duug ah ilaa qori go'iis. Sidaas ayay maalkiisii oo dhan ugu soo celiyeen, oo uusan shayna ka maqnayn.
Markaasuu Abuu Al Caasii\أبو العاصي maalka Makkah\مكة ula gaddoomay, uuna nin walba oo Quraysh\قريش ah maalkuu lahaa u celiyey, iyo kii isaga laftiisa wax ku darsadayba.
Intaas markuu falay kaddib ayuu wuxuu yiri:
"Ragga Qurayshow\قريش! Miyuu midkiinna maal uu leeyahay agteyda ku haray oo uusan qaadan?"
Waxay yiraahdeen:
"Maya. Ilaahay khayr ha kaaga abaalgudo. Waxaanna aragnay inaad tahay mid ammaanada oofiya oo kariim ah."
Markaasuu wuxuu yiri:

"Ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa anna Muxammadan Cabduhu wa Rasuuluhu **أشهد أن لاإله إلا الله وأن محمدا رسول الله.** Wa Allaahi\والله inuusan iga hor istaagin inaan agtiisa ku islaamo (waa Nabigee, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) waxaan ahayn inaan ka baqay inaad u malaysaan inaan u islaamay inaan maalkiinna cuno (ayadoo uu qofka Muslimka ah maalka gaalka dagaal ka dhexeeyo xalaal u yahay). Markaasaan markuu Ilaahay maalkiinna idiin soo celiyay, aniguna aan idinku wareejiyay, oo aan kasoo jeestay, ayaan islaamay."

Markaasuu Makkah\مكة kasoo baxay, oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid oo la degay."
Ibnu Hishaam\إبن هشام wuxuu yiri:
"Markuu Abuu Al Caasii ibnu Al Rabiic|أبو العاصي إبن الربيع ka yimid Shaam\الشام, isagoo wada maalka gaalada, waxaa lagu yiri:
"Maad islaamtid, oo aad markaas maalkaan qaadatid, isagoo maal gaalo ah?"
Markaasuu Abuu Al Caasii**أبو العاصي** wuxuu ku yiri:
"Maxaa ka xun oo aan islaannimadeyda ku bilaabi lahaa, haddaan sidaas yeelo, oo aan wixii la igu ammaaneystey aan khayaano?"

Zaynab\زينب oo Abuu Al Caasii أبو العاصي loo celiyey

Al Suhaylii\السهيلي wuxuu sheegay in ninka Abuu Al Caasii**أبو العاصي** Badar\بدر kusoo qafaalay uu ahaa Cabdu Allaahi bin Jubayr Al Ansaarii\عبد الله بن جبير الأنصاري. Kaddibna Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayuu u haajiray. Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuu ammaanay xididnimadiisa, wuxuuna yiri:

"حدثني فصدقني، ووعدني فوفاني."

"Xadathanii fa sadaqanii, wa wacadanii fa wafaanii."
Xadiithka macnihiisu waqxaa weeye:

"Wuu ii warramay, runta ayuuna ii sheegay, ballan ayuuna iga qaaday, waana ii oofiyay."

Al Tarmathii\النرمذي iyo ibnu Maajah\إبن ماجة waxay Camr bin Shucayb bin Muxammad bin Cabdu Allaahi bin Camr Al Caasii\عمرو بن شعيب بن محمد بن عبد الله بن عمر العاصي, midka runlowga ahaa, ka wariyeen inuu aabihiis Shucayb bin Muxammad**شعيب بن محمد** , oo runlow la rumaysto ah, ayna sugnaatay inuu warkaas dhegihiisa ku maqlay, inuu ka wariyay awoowihiis Cabdu Allaahi bin Camar bin Al Caasii**عبد الله بن عمر العاصي** inuu yiri:
"Wuxuu ugu soo celiyay nikaax cusub sanadka toddobaad ee Hijrada."
Abuu Al Caasii**أبو العاصي** markay Zaynab islaamtay\زينب , isaguna uu gaalnimada ku haray, ayaa islaamku kala geeyey. Markaasuu markaan dambe Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, nikaax cusub ugu soo celiyay.

Dhimashada Zaynab\زينب

Zaynab\زينب , gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la oofsaday sanadka sideedaad ee Hijrada.

Muslim\مسلم wuxuu Ummu Cadhiyyah\أم عطية ka wariyay inay tiri:
"Markay dhimatay Zaynab\زينب , gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"أغسلناها وترا ثلاثا أو خمسا، واجعلن في الآخرة كافورا."

"Aghsilnahaa wataran thalaathan aw khamsan, wa ajcalna fii al aakhirati kaafuuran". Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Tiro is dhaafsan dhaqa; saddex ama shan, marka ugu dambeysana waxaad biyahaad ku dhaqeysaan ku dartaan kaafuur."

Zaynab\زينب waxaa dhaqay Ummu Ayman\أم أيمن iyo Ummu Al Mu'miniina Sawdah bintu Zamcah\أم المؤمنين زينب بنت زمعة iyo Ummu Al Mu'miniina Ummu Salamah أم المؤمنين أم سلمة\.

Zaynab\زينب waxaa ku tukaday aabeheed Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagaana qabrigeeda galay, isagoo uu la socdo ninkay u dhaxday Abuu Al Caasii\أبو العاصي. Laga bilaabo guriga ilaa qubuuraha Al Baqiic\البقيع wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Zaynab\زينب ku qaaday nacash loo sameeyey. Waxaana la yiri ayadaa ugu horreysey qof nacash lagu qaado.

Shan. R u q a y y a h\رقية, Saallaa Allahu Calayhaa Wasallam

Ruqayyaah\رقية waa gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxayna dhalatay markay saddex iyo soddoon sano kasoo wareegatay dhalashada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Ibnu Xajar\إبن حجر isaguna sidaas ayuu Al Isaabah\الإصابة ku wariyay. Ruqayyah\رقية, waxaa soo doonay oo la siiyay Cutbah bin Abii Lahab\عتبة بن أبي لهب, kanoo kadiibna islaamay isaga iyo walaalkiis Mucattab\معتب.

Ruqayyah\رقية walaasheed Ummu Kulthuum\أم كلثوم, gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa ayadana soo doonay oo la siiyay Cutbah walaalkiis oo magaciisu yahay Cutaybah, ina Abuu Lahab\عتيبة بن أبي لهب.

Cutaybah\عتيبة wuxuu ku dhintay gaalnimadiisa. Labadaas walaalaha ah oo labada gabdhood oo Nabi Muxammad, Saallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo doonay oo la siiyey, intuusan midkoodna guursan oo uusan la aqal gelin, ayaa waxaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kusoo degatay Aayadda laba boqol iyo afar iyo toban ee Suuratu Al Shucaraa' سورة الشعراء\, oo lagu amrayo inuu cashiiradiisa u dhigo. Aayaddu waxay leedahay:

وَأَنْذِرْ عَشِيرَتَكَ الْأَقْرَبِينَ (214)

"Wa anthir cashiirataka al aqrabiina(214)",
oo macneheedu yahay:
"Una dig qaraabadaada kuu sii dhaw(214)."

Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, cashiiradiisa isugu yeeray oo uu u digay. Markaasuu Abuu Lahab**أبولهب** wuxuu yiri:

"تبا لك سائر اليوم ألهذا جمعتنا؟"

"Tabban laka saa'ira al yami a li haathaa jamactanaa?"
Xadiithka macnihiisu waxaa weey:

"Ma taasaad isugu kaaya soo yeertay, maalintoo idil hoog oo khasaare?"

Markaasaa waxaa soo degatay Suuradda Tabbat**تبت,** oo oraneysa:

بسم الله الرحمن الرحيم. تَبَّتْ يَدَا أَبِي لَهَبٍ وَتَبَّ (1) مَا أَغْنَى عَنْهُ مَالُهُ وَمَا كَسَبَ (2) سَيَصْلَى نَارًا ذَاتَ لَهَبٍ (3) وَامْرَأَتُهُ حَمَّالَةَ الْحَطَبِ (4) فِي جِيدِهَا حَبْلٌ مِنْ مَسَدٍ (5).

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Tabbat yadaa abii Lahabin wa Tabba(l)**Maa aghnaa canhu maaluhu wa maa kasaba**(2)**Sayaslaa naaran thaata lahabin**(3)**Wa imra'atuhu xammaalata al xadhabi**(4)**Fii jiidihaa xablun min mmasadi**(5)**"**
Suuradda macneheedu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxaa khasaaray labada gacnood ee Abuu Lahab **أبو لهب** -ujeedaduna waa isagoo idil(l)Waxna uma tarin maalkiisa iyo wuxuu kasbaday toona, oo cathaabta Ilaahay kama ayan celin karaan(2)Wuxuuna gelayaa Naar, waa dabee, olol leh, waa holocee(3)Haweentiisuna, midda qoryaha xambaari jirtay, oo intay qoryaha qodax leh iyo qodax qaaddo ayay waxay dhigi jirtay dariiqa uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maro oo gurigiisa ka baxa, si ay u cirba goyso. Ayaduna Naar ololeysa ayay geleysaa(4)Luqunteedana waxaa ku xiran silsilad bir ka sameysan oo toddobaatan diraac ah oo inta afkeeda ka gasha dabadeeda kasoo baxaysa inta kasoo hartana qoorta loogu duubayo. Masadka waxaa kaloo la yiraahdaa liifka gedaha laga falkiyo(5)".

Markay Suuraddaas Tabbat**سورة تبت** soo degatay ayuu Abuu Lahab**أبو لهب** intuu labadiisa wiil u yeeray ayuu wuxuu ku yiri:

"Madaxaygu madixiinna waa ka xaaraan -oo macneheedu yahay ha ii soo dhowaanina, ayadoo ay labada is jecel hal barkin wada barkadaan-, haddaydnaan labada gabdhood ee Muxammad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) furin."

Markaasey amarkiisa yeeleen oo labada gabdhood fureen, ayagoo aan weli la aqal gelin. Markaasuu Amiiru Al Mu'miniina Cuthmaan bin Caffaan**أمير المومنين عثما بن عفان** wuxuu Makkah**مكة** ku guursaday Ruqayyah**رقية,** gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Ruqayyah**رقية** aad ayay u qurux badnayd, oo waxay lahayd qurux indhaha qabata. Sidoo kale, Cuthmaan bin Caffaan**عثما بن عفان** aad ayuu u qurxoonaa. Ruqayyah**رقية** waxay ka mid tahay kuwa Banii Aadanka ugu qurux badan.

Intay Ruqayyah**رقية** iyo Cuthmaan**عفان** arliga Xabashada joogeen, ayaa waxaa Ruqayyah**رقية**

arkay rag amxaaro ah, markaasey intay quruxdeeda la yaabeen ayay raqsiyeen, oo ay sidaas yeelaan markay arkaanba. Ayaduna arrinkoodaas way dhibsatay.
Ruqayyah رقية iyo asxaabteeduna, maadaama ay arligaas qariibiin ku ahaayeen, waxba kama ayan oran karin. Markaasey raggaasu Boqorkooda Al Najaashiyyi\النجاشي xarbiga cadawgiisa ku kacdoonmay u raaceen. Markaasaa raggaas dhammaantood dagaalkaas lagu wada dilay, ay ayaduna ka raaxeysatay, Boqorkuna uu cadawgiisa kasoo adkaaday.

Al Zubayr bin Bakkaar\الزبير إبن البكار wuxuu wariyay oo yiri inuu:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, nin ayuu u diray Ruqayyah رقية iyo Cuthmaan\عثمان, uuna ugu dhiibay cunno yar oo uu u hadiyeeyey. Markaasuu ninkii kasoo raagay. Markaasuu markuu kusoo laabtay oo uu u yimid, ayuu wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, ku yiri:

"إن شئت أخبرتك ما حبسك."

"In shi'ta akhbartuka maa xabasaka",
oo macneheedu yahay:

"Haddaad dooneysid waxaan kuu sheegayaa waxaad la soo daahday oo ku reebay."
Markaasuu ninku wuxuu yiri:
"Waa yahaye ii sheegay."
Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"وقفت تنظر إلى عثمان ورقية، تعجب من حسنهما."

"Waqafta tanthuru i1aa Cuthmaan wa Ruqayyah, tacjabu min xusnihimaa",
oo macneheedu yahay:

"Waxaad istaagtay adigoo fiirinaya Cuthmaan iyo Ruqayyah, lana yaaban quruxdooda."
Waxaa wariyay Al Suhaylii\السهيلي.

Riwaayad kalena waxay sheegtay inuu ninkaasu ahaa Usaamah wiilka Zayd bin Xaarithah أسامة بن زيد بن حارثة\, midkay koofaartiisu ahayd "Xibbu Xibbu Rasuuli Allaahi|"حب حب رسول الله oo macneheedu yahay "Midkuu jecelyahay midkuu Rasuulka Ilaahay jecelyahay" oo Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aad ayuu Zayd\زيد u jeclaa iyo wiilkiisa ah Usaamah\أسامة.

Markaasaa waxaa la oran jiray: "Labada is qabta oo la arkay oo ugu qurxoon waa Ruqayyah\رقية iyo ninkeeda Cuthmaan\عثمان."

Ruqayyah رقية iyo Cuthmaan عثمان waxay u haajireen labada Hijraba, oo marka koowaad arliga xabashada ayay u haajireen. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, warkooda waayey, ilaa ay haweeney uga timaaddo, ayna u sheegaty inay soo aragtay, waxayna tiri: "Waxaan arkay labadoodaba, ayadoo uu Cuthmaan عثمان haweentiisa dameer ku qaaday."
Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"صحبهما الله."

"Saxabahumaa Allaahu.",
oo macneheedu yahay:

"Allaha la jiro."

Waxaana Anas bin Maalik\أنس بن مالك ka wariyay Yacquub bin abii Sufyaan\يعقوب بن أبي سفيان. Riwaayad kalena waxay warisay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"صحبهما الله. إن عثمان أول من هاجر بأهله بعد لوط."

"Saxabahumaa Allaahu. Inna Cuthmaana awwalu man haajara bi ahlihi bacda Luudhin",
oo macneheedu yahay:

"Allaha lajiro. Cuthmaan waa kan ugu horreeya oo ehelkkiisa (waa haweentiise) la haajiray (Nabi) Luudh dabadiis".
Waxaa wariyay ibnu Al Mubarrak\إبن مبارك iyo ghayrkiisba.

Ibnu Hishaam\إبن هشام wuxuu yiri:
"Ruqayyah\رقية waxay Cuthmaan\عثمان arliga Xabshada ugu dhashay Cabdu Allaahi\عبد الله, oo Cuthmaanعثمان lagu koofaari jiray, oo la oran jiray "Abuu Cabdu Allaahi\أبو عبد الله", oo ah "Cabdu Allaahi\عبد الله aabihiis."

Fatxu Al Baarii\فتح الباري wuxuu wariyay inuu Cabdu Allaahiعبد الله noolaa lix sano, wuxuuna dhintay, siduu ibnu Sacadإبن سعد u wariyay sanadka afaraad ee Hijrada, ayadoo uu diiq dooro gafuurkiisa isha uga muday. Markaasuu hooyadiis dabadeed dhintay."

Wuxuu yiri:
caruur aan Cabdu Allaahi\عبد الله ahaynna uma ayan dhalin. Cabdu Allaahi\عبد الله markuu dhintay, Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu saaray dhabtiisa wuxuuna yiri:

"إنما يرحم الله من عباده الرحماء."

"Innamaa yarxamu Allaahu min cibaadihi al ruxamaa'u".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu addoommadiisa uga naxariistaa kuwa ayaguna naxariista. "

Guurka Ruqayyah\رقية

Abuu Sacad\إبن سعد wuxuu kitaabkiisa Al Sharfالشرف Cuthmaan\عثمان uga wariyay inuu yiri, waana markuu islaamay kaddib markuu warka sheegayaa: "Anigoo Kacbada deydkeeda jooga ayaa waxaa la yiri:
"Muxammad-Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam-wuxuu Cutbah\عتبة u guuriyey gabadhiisa Ruqayyah\رقية. Markaasaa waxaa qalbigeyga galay xasrah\حسرة -oo ah danqasho laga danqado

wax suuban oo ku dhaafay- inaanan isaga uga hormarin. Markaasaan gurigeyga aaday, halkaasoo aan ka helay habaryartay Sacdaa bintu Kurayz\سعدى بنت كريز, oo ii sheegtay inuu Ilaahay Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo diray, ayna igu boorrisay inaan raaco." Wuxuu yiri: "Waxaan lahaa majlis aan la fariisan jiray Al Siddiiqu\الصديق (waana Abuu Bakar\أبوبكر), kaasoo aan majliskii ka helay, isagoo keligiis ah. Markaasuu wuxuu iga wareystay waxaan fakarayo. Markaasaan waxaan u sheegay waxaan habaryartay ka maqlay. Markaasuu Abuu Bakarna\أبوبكر igu boorriyey inaan islaamo.".

Wuxuu yiri:
"Markaasaa isla markaasba waxaa meesha soo maray (Nabiga) Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo uu la socdo Calii\علي, oo maro u sida. Markaasuu Abuu Bakar\أبوبكر u kacay, taasoo uu ku farxay. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam fariistay, oo intuu igu soo jeestay wuxuu yiri:

"أجب الله إلى الجنة، فإني رسول الله إليك وإلى جميع الخلق."

"Ajib Allaaha i1aa Jannatihi, fa innii Rasuulu Allaahi ilayka wa ilaa jamiica khalqihi." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Oggolow Jannadiisa uu Ilaahay kuugu yeerayo, oo anigu waxaan ahay Rasuulka Ilaahay oo adiga laguu soo diray iyo khalqigiisa dhammaantoodba."
Markaasaan wa Allaahi\والله is hayn waayey markaan maqlay, oo aan islaamay. Markaaseeyan kasoo wareegan in yar mooyee, ee gabadhiisa ayaan guursaday Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."

Geerida Ruqayyah\رقية

Ruqayyah\رقية , inanta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la oofsaday ayadoo uu aabeheed, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, duullaanka Badar\بدر ku maqan yahay, ayadoo labaatan jir ah, siduu Fatxu Al Baarii\فتح الباري u wariyay, markuu Zayd bin Xaarithah زيد بن حارثة\ keenay Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة bishaarada guusha Ilaahay Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siiyay iyo laynta gaaladii duullaankaas u timid.

Zayd\زيد waxaa inuu reer Al Madiinah\المدينة bishaaradaas u geeyo usoo diray Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo dhawr maalmood kaddib imaan doona.

Markuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, duullaankaas u kicitimay, Ruqayyah\رقية way xanuunsaneyd, markaasuu Cuthmaan\عثمان ku reebay si uu u xannaaneeyo. Sidaas ayuusan Cuthmaan\عثمان Badar uga qayb galin, Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu u siiyey ajarkiisa Badar\بدر iyo sahmigiisaba ghaniimada, sida ragga ka qayb gal ay oo kale.

Sidoo kale wuxuu Ruqayyah\رقية markaas ku reebay Usaamah bin Zayd\أسامة بن زيد. Ruqayyah\رقية waxaa ku dhacay oo lala oofsaday cudurka la yiraahdo al xasbah\الحصبة, oo aan ku wado inay tahay jadeecada.

Zayd bin Xaarithah\زيد بن حارثة wuxuu Al Madiinah\المدينة soo galay isagoo uu Cuthmaan \عثمان qabrigeeda dul taagan yahay.

Ibnu Sacad\إبن سعد wuxuu Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas\عبد الله إبن عباس ka wariyay inuu yiri: "Markay Ruqayyah\رقية dhimatay wuxuu (Nabigu) Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"إلحقي بسلفنا عثمان بن مظعون."

"I1xaqii bi salafinaa Cuthmaan bin Mathcuun",
oo macneheedu yahay:

"Ka daba tag midkeenna noo hormaray oo ah Cuthmaan bin Mathcuun**عثمان بن مظعون** ". Cuthmaan bin Mathcuun**عثمان بن مظعون** wuxuu ahaa ninka ugu horreeya ee Muhaajiriinta**المهاجرين** Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** uga dhinta, iyo kan ugu horreeyey oo qubuuraha Al Baqiic**البقيع** lagu duugo.

Markay Ruqayyah\رقية dhimatay ayay haweenkii booyeen. Markaasaa waxaa u yimid Cuthmaan \عثمان oo garaacay.
Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"مهما يكن من العين والقلب، فمن الله والرحمة، ومهما يكن من اليد واللسان فمن الشيطان."

"Mahmaa yakun mina al cayni wa al qalbi, fa mina Allaahi wa al raxmah. Wa mahmaa yakun mina al yadi wa al lisaani fa mina al sh-shaydhaani."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxa ka sugnaada isha -oo ah oohinta- iyo qalbiga-oo ah tiiraanyada- waxay ka yimaadeen Ilaahay iyo naxariista. Wixiise ka ahaada gacanta -sida wajiga oo la iska xagto, ama dharka oo la iska dillaciyo- iyo carrabka -oo ah wax aan habbooneyn oo laga yiraahdo waxay ka yimaadeen shaydhaanka".

Markaas ayay Faadhimah\فاطمة qabriga qarkiisa fariisatay, ayadoo booyeysa. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu darafta maradiisa ka mariyay labadeeda indhood, isagoo illinta ka tiraya.
Al Waaqidii**الواقدي** wuxuu yiri:

"Waxay tani ixtimaaleysaa inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam tegey qabrigeeda kaddib markuu Badar**بدر** kasoo laabtay."

Lix. U m m u K u l t h u u m\أم كلثوم, Sallaa Allaahu Calayhaa Wasaallam

Ummu Kulthuum**أم كلثوم** waa gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
Ummuu Kulthuum**أم كلثوم** magaceeda lama yaqaanno, waxaase loo yaqaannaa koofaarteeda oo

ah Ummu Kulthuum**أم كلثوم**, sida muuqatana magac kaleba looma bixin, oo koofaarteeda ayaa magaceedana ah. Ummu Kulthuum**أم كلثوم** waxay u doonnayd Cutaybah ibnu Abii Lahab **عتيبة إبن أبي لهب\.** Cutaybah**عتيبة** wuxuu ku dhintay gaalnimadiisa.

Labadaas walaalaha ah oo labada gabdhood oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo doonay oo la siiyey, intuusan midkoodna guursan oo uusan la aqal gelin, ayaa waxaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kusoo degatay Aayadda laba boqol iyo afar iyo toban ee Suuratu Al Shucaraa'**سورة الشعراء**, oo lagu amrayo inuu cashiiradiisa u dhigo. Aayaddu waxay leedahay:

وَأَنْذِرْ عَشِيرَتَكَ الْأَقْرَبِينَ (214)

"Wa anthir cashiirataka al aqrabiina(214)**"**,
oo macneheedu yahay:

"Una dig qaraabadaada kuu sii dhaw(214)."

Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, cashiiradiisa isugu yeeray oo uu u digay. Markaasuu Abuu Lahab wuxuu yiri: "Ma taasaad isugu kaaya soo yeertay, hoog oo khasaare?" Markaasaa waxaa soo degatay Suuradda Tabbat**سورت تبت,** oo oraneysa:

بسم الله الرحمن الرحيم. إِنَّا أَعْطَيْنَاكَ الْكَوْثَرَ (1) فَصَلِّ لِرَبِّكَ وَانْحَرْ (2) إِنَّ شَانِئَكَ هُوَ الْأَبْتَرُ (3)

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Tabbat yadaa abii Lahabin wa Tabba(l)**Maa aghnaa canhu maaluhu wa maa kasaba**(2)**Sayaslaa naaran thaata lahabin**(3)**Wa imra'atuhu xammaalata al xadhabi**(4)**Fii jiidihaa xablun min mmasadi**(5)**"**
Suuradda macneheedu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. iyo wuxuu Waxaa khasaaray labad gacnood ee Abuu **أبو لهب** Lahab -ujeedaduna waa isagoo idil(1) Waxna uma tarin maalkiisa kasbada toona, oo cathaabta Ilaahay kama ayan celin karaan(2)Wuxuuna gelayaa Naar, waa dabee, olol leh, waa holocee(3)Haweentiisuna, midda qoryaha xambaari jirtay, oo intay qoryaha qodax leh iyo qodax qaaddo ayay waxay dhigi jirtay dariiqa uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maro oo gurigiisa ka baxa, si ay u cirba goyso. Ayaduna Naar ololeysa ayay geleysaa(4)Luqunteedana waxaa ku xiran silsilad bir ka sameysan oo toddobaatan diraac ah oo inta afkeeda ka gasha dabadeeda kasoo baxaysa inta kasoo hartana qoorta loogu duubayo. Masadka waxaa kaloo la yiraahdaa liifka gedaha laga falkiyo(5)".

Cutaybah ina Abuu Lahab\عتيبة إبن أبي لهب libaax ayaa cunay

Markay Suuraddaas Tabbat**تبت** soo degatay ayuu Abuu Lahab**أبو لهب** intuu labadiisa wiil u yeeray ayuu wuxuu ku yiri:
"Madaxaygu madixiinna waa ka xaaraan -oo macneheedu yahay ha ii soo dhowaanina, ayadoo ay labada is jecel hal barkin wada barkadaan-, haddaydnaan labada gabdhood e.e Muxammad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) furin."

Markaasey amarkiisa yeeleen oo labada gabdhood fureen, ayagoo aan weli la aqal gelin.
Ibnu abii Khathmah\إبن أبي خيثمة wuxuu Qataadah\قتادة ka wariyay inuu Cutaybahعتيبة markuu Ummu Kulthuum\أم كلثوم furay uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid, oo uu ku yiri:
"Diintaada waan ku kufriyey -oo macneheedu yahay inuu gaalnimadiisa ku taagnaanayo, isagoo aan horeba u islaamin-, gabadhaadana waan furay. Sababtaas daraadeed ayaadana adiguna ii jeclayn, aniguna aanan kuu jeclayn."
Hadalkiisaasna wuxuu salka ku haya oo ku dhisan yahayba gaalnimo iyo cinaad. Markuu intaas yiri ayuu intuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku dhegey ayuu khamiiskiisa jeexay, sida Qataadah\قتادة laga wariyay.
Markuu sidaas falayo, Cutaybahعتيبة wuxuu u socdaa Shaam\الشام, oo uu ganacsi u aadayaa. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"أما إني أسأل الله أن يسلط عليك كلبه."

"Ammaa innii as'alu Allaahu an yusallidha calayka kalbahu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Aniguna waxaa Ilaahay ka baryayaa inuu kugu sallido -waa kugu diree- eygiisa, oo uu ku dilo."

Al Xaakimna\الحاكم wuxuu wariyay riwaayad oraneysa inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"أللهم سلط عليه كلبا من كلابك."

"Allaahumma! Sallidh calayhi kalban min kilaabika",
oo macneheedu yahay:

"Ilaahayow ku sallidh, oo ha cuno, ey eeyahaaga ka mid ah."

Abuu Dhaalib\أبو طالب, oo markaas goob joog ahaa ayaa wuxuu markaas Cutaybah\عتيبة ku yiri, isagoo habaarkaas ka calool xumaaday:

"ما كان أغناك عن دعوة ابن أخي."

“Maa kaana aghnaaka can dacwata ibna akhii.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Yaa kaa celinaya, Cutaybahowعتيبة, habaarka wiilka walaalkay?" isagoo ogsoon inuu Ilaahay Tacaalaa ducada Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aqbalayo.

Markaas kaddib ayuu Cutaybahعتيبة wuxuu rag ganacsado ah oo Quraysh\قريش ah ula safray xagga arliga Shaam\الشام. Markaasey waxay degeen meel Shaam\الشام ku taalla oo la yiraahdo Al Zarqaa'\الزرقاء, markay habeen noqotay.
Markaasaa waxaa habeennimadaas ku dul wareegtay libaax. Markaasuu Cutaybahعتيبة wuxuu

yiraahdaa, oo uu ku celceliyaa:
"يا ويل أمي، هو والله آكلي، كما دعى علي محمد، أقاتلني ابن أبي كبشة وهو بمكة وأنا بالشام!؟"

“Yaa wala ummii, huwa wa Allaahi aakilii, kamaa dacaa calayya Muxammadun, aqaatilinii ibnu abii Kabshah wa huwa bi Makkah wa anaa bi Al Shaami?!”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Hooyaday way hoogtay -oo macneheedu yahay: waan ka dhimanayaa, ayaadana ii sababtay inaan falo waxaan falay, oo markaan amarkeeda yeelayna, oo ahaa inaan gabadha furo, waxaa u sugnaatay inaan halligmo, oo ay sidaas igu waydo-. Wa Allaahi libaaxaani aniguu i cunayaa, siduu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iigu habaaray. Ma wuxuu ibnu Abi Kabshah -oo uu ka wado Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayadoo ay gaalada qaarkood sidaas ugu yeeri jireen- i dilayaa isagoo Makkah\مكة jooga, aniguna aan Shaam \الشام ku suganahay!"

Markaasuu libaaxu inta dadka kale soo dhaafay ayuu isaga weeraray, oo markuu u yimid uu madaxiisa afka gashaday oo uu burburiyay.

Riwaayad kalena waxay warisay sidatan:
"Markaasuu libaaxu yimid, oo uu wajiyada ragga ursursaday. Markaasuu intuu saynta laabtay oo uu isku guda celiyay uu Cutaybahعتيبة kusoo booday oo uu markaas mar keli ah ku dhuftay oo uu googooyey. Markaasuu Cutaybahعتيبة wuxuu yiri:

"قتلني."

“Qatalanii.”
Oo macnihiisu yahay:
"Wuu i dilay". Kaddibna wuu dhintay."

Riwaayad kalena waxay warisay inuu libaaxu ragga kale kasoo kor tillaabsaday, oo markuu Cutaybahعتيبة u yimid, uu madaxa ka qabtay oo uu burburiyay. Waxaana riwaayaddaan wariyay Al Duulaabii\الدولابي, ahna al xaafith Abuu Bishr\الحافظ أبو بشر.

Libaaxa waxaa ey loo yiri inuu sida eyga oo kale markuu kaadshayo uu lugta kor u qaado, siduu Al Dimyarii\الدميري u yiri.

Abuu Nucaym\أبو نعيم wuxuu wariyay riwaayad kale, uuna ka wariyay Al Asada bin Habaar الأسد \بن هبار, oo yiri:
"Abuu Lahab\أبو لهب iyo wiilkiisa Cutaybahعتيبة ayaa waxay isku diyaariyeen Safar ganacsi ee Shaam\الشام. Markaasaan aniguna raacay. Kaddib waxaan ku degannay meel u dhow guri uu deggan yahay nin raahib\راهب ah, waa wadaad krishtaan ahe. Markaasuu raahibku wuxuu yiri: "Maxaa meeshaan idin dejiyay? Meeshaan waxay leedahay dugaag wax cuna".
Markaasaa Abuu Lahab\أبو لهب wuxuu yiri:

"أنتم عرفتم سني وحقي."

“Antuma caraftum sinnii wa xaqqii.”
Oo macnihiisu yahay:

"Adinku waxaad ogsoontihiin da'deyda iyo xaqqaygaba!"
Waxaan niri: "Haa".
Wuxuu yiri:

"إن محمدا دعا على ابني، فاجمعوا متاعكم على هذه الصومعة، ثم افرشوا عليها وناموا حوله."

“Inna Muxammadan dacaa calaa ibnii, fa ajmacuu mataacakum calaa haathihi al sawmacati, thumma afrishuu calayhaa wa naamuu xawlahu.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Muxammad\محمد, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wiilkeyga ayuu habaaray. Marka, alaabtiinna waxaad wada keentaan guriga wadaadkaan dhexdiisa. Markaas alaabta korkeeda u gogla, kaddibna hareerihiisa seexda."
Sidaas ayaanna yeelnay.

Cutaybahna\عتيبة wuxuu seexday alaabta korkeeda. Markaasaa waxaa yimid libaaxa, oo markaas wajiyadeenna ururssaday, kaddibna wuxuu ku booday alaabteenna korkeeda, oo uu markaas (Cutaybahعتيبة) madaxa ka gooyey, uuna isla saacaddaasba meeshaas ku dhintay. Markaasaan daba galnay libaaxa waana waynay."

Guurka Ummu Kulthuum\أم كلثوم

Al Bukhaarii**البخاري** wuxuu Amiiru Al Mu'miniina Abuu Xafs Cumar ibnu Al Khadh-dhaab **أمير المؤمنين أبو حفص عمر بن الخطاب**, Allaha raalli ka noqdo isagana wax raalli geliyay siiyee, ka wariyay inuu yiri:
"Waxaan usoo jeediyey Abuu Bakar\أبوبكر inuu Xafsah\حفصة guursado. Markaasuu iga aamusay.

Markaasaan waxaan la kulmay Cuthmaan**عثمان** -waana kaddib markay Ruqayyah\رقية, gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka dhimatay-markaasaan usoo jeediyay inuu Xafsahحفصة guursado -oo ah gabadha uu Cumar**عمر** dhalay, oo uu ninkeedii ka dhintay-. Markaasuu wuxuu yiri: "Waa ka fiirsanayaa."
Markaasuu dhawr habeen joogay, kaddibna uu yiri: "Waxay iila muuqatay inaanan maantadaan guursan."

Markaasuu Cumar**عمر** wuxuu Abuu Bakar\أبوبكر iyo Cuthmaan**عثمان** kala kulmay u sheegay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Cumar**عمر** ku yiri:

"يتزوج حفصة من هو خير من عثمان، ويتزوج عثمان من هي خير من حفصة."

"Yatazawwaju Xafsah man huwa khayrun min Cuthmaana, wa yatazawwaju Cuthmaanu man hiya khayrun min Xafsah."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaa Xafsah**حفصة** guursanaya mid isagu ka khayr badan Cuthmaan**عثمان**. Cuthmaanna **عثمان** wuxuu guursanayaa mid ayadu Xafsah**حفصة** ka khayr badan."

Markaasu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Xafsah guursaday,oo ay sidaas Ummu Al Mu'miniina\أم المؤمنين hooyadeen ku noqotay. Cuthmaanna**عثمان** wuxuu guursaday gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ummu Kulthuum**أم كلثوم.**
Xadiithkaan ayay culummadu u daliilsadaan inay gabdhihiisu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka fadli badan yihiin haweenkiisa.

Ummu Kulthuum**أم كلثوم** waxay Amiiru Al Mu'miniina Cuthmaan bin Caffaan "Thuu Al Nuurayni"**أمير المؤمنين عثمان بن عفان "ذا النورين"** guursatay bisha Rabiicu Al Awwal**ربيع الأول** ee sanadka saddexaad ee Hijrada, caruurna uma ayan dhalin.
Ibnu Sacad**إبن سعد** wuxuu wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cuthmaan**عثمان** ku yiri markay Ruqayyah**رقية** ka dhimatay:

"والذي نفسي بيده، لو أن عندي مأة بنت يمتن واحدة بعد واحدة، زوجتك أخرى."

"Wa Allathii nafsii bi Yadihi, law anna cindii mi'atu bintin yamutna waaxidatan bacda waaxidatin, zawwajtuka ukhraa".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaan ku dhaartay Midkay nafteydu Gacantiisa ku jirto, haddaan lahaan lahaa boqol gabdhood oo ay middoodba tan kale dabadeeda dhimato, hadba mid kale ayaan kuu guurin lahaa."

Taasoo ammaan wayn iyo faan Cuthmaan**عثمان** u ah, kana mid ah manaaqibtiisa. Wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hadalkiisaas ku xoojiyay isagoo yiri:

"هذا جبريل، أخبرني أن الله يأمرني أن أزوجك."

"Haathaa Jibriilu, akhbaranii anna Allaaha ya'murunii an uzawwijakahaa",
oo macneheedu yahay:

"Kani waa Jibriil oo ii sheegay inuu Ilaahay igu amrayo inaan -Ummu Kulthuum- kuu guuriyo."
Waxaa Xadiithkaan wariyay Al Fadaa'ilii**الفضائلي.**

Ibnu Mundah**إبن منده** wuxuu Ummu Cayaash**أم عياش** ka wariyay, oo ahayd mawlada Ruqayyah **رقية** gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, inay tiri:
"Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo leh:

"ما زوجت عثمان أم كلثوم إلا بالوحي من السماء."
"Maa zawwajtu Cuthmaana Ummu Kulthuuma illaa bi waxyin mina Al Ssamaa'i." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Uguma aanan guurin Cuthmaan Ummu Kulthuum waxaan ahayn waxyi Samada ka yimid."

Abuu Hurayrah**أبو هريرة** wuxuu wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أتاني جبريل، فقال: "إن الله يأمرك أن تزوج عثمان أم كلثوم على مثل صداق رقية، وعلى مثل صحبتها."

"Ataanii Jibriilu, fa qaala: "Inna Allaaha ya'muruka an tuzawwija Cuthmaana Ummu Kulthuuma calaa mithli sadaaqi Ruqayyah, wa calaa mithli suxbatihaa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaa ii yimid Jibriil**جبريل** oo yiri: "Ilaahay wuxuu ku amrayaa inaad Cuthmaan**عثمان** ugu guurisid Ummu Kulthuum**أم كلثوم** meher la mid ah meherkii Ruqayyah**رقية** iyo suxbo la mid ah suxbadeeda."
Labadaanba waxaa wariyay ibnu Mundah**إبن منده**.

Dhimashada Ummu Kulthuum**أم كلثوم**

Ummu Kulthuum**أم كلثوم** , gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay dhimatay bisha Shacbaan**شعبان** ee sanadka todoobaad ee Hijrada, ayadoo u dhaxda Amiiru Al Mu'miniina Cuthmaan bin Caffaan "Thuu Al Nurayni" **أمير المؤمنين عثمان بن عفان "ذو النورين"\,** Allaha raalli ka wada noqdee.

Ummu Kulthuum**أم كلثوم** waxaa dhaqay Asmaa' bintu Cumays**أسماء بنت عميس,** Allaha raalli ka noqdee, ahaydna haweenta Jacfar bin Abii Dhaalib**جقفر بن أبي طالب** oo isagoo qaba la dilay. Dabadiisna waxaa guursaday Abuu Bakar Al Siddiiq**أبوبكر الصديق,** oo ay u dhashay wiilkiisa Muxammad ibnu Abuu Bakar Al Siddiiq**محمد بن أبي بكر الصديق.**
Abuu Bakar**أبوبكر** waxaa la oofsaday ayadoo u dhaxda.

Markaasaa waxaa guursaday Calii bin Abii Dhaalib**علي بن أبي طالب**, waxayna u dhashay laba wiil oo la kala yiraahdo Yaxyaa bin Calii**يحيى بن علي** iyo Cawn bin Calii**عون بن علي**.
Asmaa'**أسماء** aabeheed waxaa la yiraahdaa Cawf bin Zuhayr bin Al Xaarith**عوف بن زهير بن الحارث** oo qabiilka Kinaanah**كنانة** u dhashay.

Asmaa'**أسماء** waa walaasha la dhalatay Ummu Al Mu'miniina Maymuunah binti Al Xaarith Al Hilaaliyyah**أم المؤمنين ميمونة بنت الحارث الهلالية,** haweenta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ay isku hooyo yihiin.

Waxay kaloo ay walaalo yihiin, oo ay wada dhasheen Lubaabah Ummu Al Fadl\لبابة أم الفصل, haweenta Al Cabbaas\العباس, Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, adeerkiis, waxayna ahaayeen sagaal gabdhood oo wada dhashay, isku wada hooyana ah, uuna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka yiri:

"الأخوات مؤمنات."

"Al akhwaatu mu'minaatun",
oo macneheedu yahay:

"Gabdhaha walaalaha ahi waa mu'minaat."
Xadiithkana waxaa wariyay Al Xaakim\الحاكم iyo Al Dhabarii\الطبري iyo ibnu Sacad\إبن سعد.

Waxaa kaloo Ummu Kulthuum\أم كلثوم wax ka dhaqday Safiyyah bintu Cabdu Al Mudh-dhalib\صفية بنت عبد المطلب, siduu ibnu Sacad\إبن سعد u wariyay.
Waxaa ayaduna go ob joog ahayd Ummu Cadhiyyah\أم عطية, oo ahayd haweenta maydka haweenka dhaqi jirtay, siduu ibnu Xajar\إبن حجر u wariyay.
Ummu Cadhiyyahأم عطية waxay tiri, ayadoo ay Xadiithkaan wariyeen Al Bukhaarii\البخاري iyo Muslim\مسلم iyo Maalik\مالك:
"Waxaa noo soo galay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, marka gabadhiisa la oofsaday, wuxuuna yiri:

"أغسلناها ثلاثا، أو خمسا، أو سبعا، أو أكثر من ذلك إن رايتن ذلك، بماء وسدر، واجعلن في الآخرة كافورا. فإذا فرغتن فاذناني."

"Aghsilnahaa thalaathan, aw khamsan, aw sabcan, aw akthara min thaalika in ra'aytinna thaalika, bi maa'in wa sidrin, wa ajcalni fii al aakhirati kaafuuran. Fa ithaa faraghtunna fa athinnanii."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaad dhaqdaan saddex goor, ama shan, ama toddoba, ama intaas ka badan hadday idinla noqoto in loo baahan yahay, kuna dhaqa biyo iyo sidr -oo ah dhir hilibka jirka isku qabata-. Marka u dambeysana waxaad biyahaad ku dhaqaysaan ku dartaan dhirta kaafuurka\كافور -oo ah dhir carfoon, oo jirka carfineysa, jirkana qaboojineysa, siineysana xoog, iskuna hayneysa, xasharaadkana ka eryeysa-. Markaad kasoo jeesataanna isoo ogeysiiya."

Markaasaan markaan kasoo jeesannay, ayaan ogeysiinnay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu wuxuu noo soo tuuray go'iisa wuxuuna yiri:

"أشعرنها إياه."

"Ashcarnahaa iyyaahu",
oo macneheedu yahay:

"Jirkeeda ku duuba oo kafanta ka xijiya", oo kafanta go'a korkiisa ku duuba."

Ibnu Xajar Al Casqalaanii\إبن حجر العسقلاني wuxuu yiri:
"Waxaa la yiri xikmada ku jirta inuu bixinta go'a dib ugu dhigay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ilaa ay dhaqiddeeda kasoo jeestaan waxaa weeye, oo uusan marka horeba ugu dhiibin, inuu go'u ahaado mid markaasba isaga jirkiisa kariimka ah, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kasoo wareegay, oo markuu jirkiisa kasoo wareegayo uuna keeda usoo wareegayo uusan waqti kala gooya u dhexeyn. Arrinkaan ayaana ah asliga uu ku fadhiyo in ragga saalixiinta ah woxooda laga barakeysto."
Waa intaas warka Ibnu Xajar Al Casqalaani\إبن حجر العسقلاني .

Ummu Cadhiyyah\أم عطية waxay tiri, siduu Al Bukhaarii\البخاري Xafsah\حفصة uga wariyay: "Markaasaan u shanleynnay, una yeelnau saddex tidcood oo waaweyn, ahna galaamidda timaha, aan xagga dambe ee madaxeeda ku dhejinnay", ayagoo oofinaya amarkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ku yiri:

"واجعلن لها ثلاثة قرون."

"Wa ajcalna lahaa thalaathata quruunin",
oo macneheedu yahay:

"Waxaadna u yeeshaan saddex tidic oo waaweyn."

Ummu Kulthuum\أم كلثوم, gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaau Calayhi Wasallam, waxaa lagu duugay xabaalaha Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة ee la yiraahdo Al Baqiic \البقيع, godkeedana waxaa galay Calii bin Abii Dhaalib\علي بن أبي طالب iyo Al Fadlu bin Al Cabbaas\الفضل بن العباس iyo Usaamah bin Zayd\أسامة بن زيد, Allaha dhamaantood raalli ka noqdee.
Waxaa sidaas wariyay Al Waaqidii\الواقدي.

Al Bukhaarii\البخاري wuxuu Anas bin Maalik\أنس بن مالك ka wariyay inuu yiri:
"Waxaan goob joog ka ahayn duugidda gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, RasuuIka Ilaahayna, Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu fariistay qabriga dushiisa, ayadoo ay labadiisa indhood ilmo ka hooreyso, wuxuuna yiri:

"هل فيكم من أحد لم يفارق الليلة؟"

"Hal fiikum min axadin lam yufaariq allaylata?"
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ma idinku jiraa mid aan xalay gogol gelin?
Markaasuu Abuu Dhalxah\أبو طلحة yiri:
"Aniga".
Markaasu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri:

"أنزل قبرها."

"Anzil qabrahaa",
oo macneheedu yahay:

"Qabrigeeda hoos ugu dego."
Markaasuu ku degay.

Taasi waxay ishaaro u tahay inay habboon tahay inuu maydka qabriga geliyo qof macaansiga muddo moog, haba ahaado nin ay haweentiisu dhimataye, ayadoo uu Cuthmaan\عثمان markaas goobjoog yahay. Cuthmaan\عثمان habeenkaas wuxuu la gogol galay, siduu u wariyay ibnu Xabiib\إبن حبيب, gabar addoon ah oo uu leeyahay.

Sidaas ayaa Ummu Kulthuum\أم كلثوم, gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, loo duugay.

Toddoba. Faadhimah\فاطمة, Sallaa Allaahu Calayhaa Wasallam

Faadhimahفاطمة waa gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Manaaqibta iyo tilmaamaha ay leedahay oo sarreynta makaankeeda tilmaamaya, mudanna in lagu ammaano, lama tirin karo, oo halkaan laguma soo koobi karo, oo kitaab dhan ama kutubbo badan ayay u baahan yihiin. Aniguna isku dayi mayo inaan halkaan intooda badanba ku sheego ee wax yar ayaan kasoo qaadaneynnaa.

Waxaaba Faadhimahفاطمة ammaan ugu filan inay tahay haweeneyda ummaddaan ugu khayr badan, iyo inay Caa'ishahعائشة\ tiri:

"ما رأيت أحدا قط أفضل من فاطمة غير أبيها."

“Maa ra’aytu axadan qadh-dh afdala min Faadhimah ghayra abiihaa.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ma aanan arag waligay qof Faadhimah ka fadli badan, oo ka sarreeya, oo aan aabeheed ahayn, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."

Al Dhabraanii\الطبراني iyo ghayrkiiisba waxay wariyeen inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Faadhimahفاطمة ku yiri:

"إن الله يغضب لغضبك، ويرضا لرضاك."

"Innaa Allaaha yaghdibu li ghadabika, wa yardaa li ridaaka."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay waxaad u carooto Isaguna wuu u caroodaa, waxaad raalli ka noqotana raalli ayuu ka noqdaa."

Ibnu Xajar\إبن حجر wuxuu Al Isaabah\الإصابة ku wariyay inay Faadhimahفاطمة koofaarteedu ahayd "Ummu abiihaa\أم أبيها" oo macneheedu yahay: "Hooyada aabeheed".

Faadhimahفاطمة waxay dhalatay sanadka kow iyo afartanaad ee dhalashada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kasoo wareegatay, waana Nabinnimada kaddib, siduu u wariyay Abuu Cumar ibnu Cabdu Al Barr\أبو عمر إبن عبد البر, oo ka wariyay Cubaydu Allaaahi bin Muxammad bin Sulaymaan bin Jacfar Al Haashimii عبيد الله بن محمد بن سليمان بن جعفر الهاشمي\.

Faadhimahaفاطمة waxay Caa'ishaعائشة\ ka da' wayntahay qiyaas shan sano.

Waxaa Cabdu Allaahi ibnu Mascuudعبد الله بن مسعود\ laga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إنما سميت فاطمة لأن الله فطمها وذريتها عن النار يوم القيامة."

"Innamaa summiyat Faadhimah li anna Allaaha fadhamahaa wa thurriyatahaa cani Al Nnnaari Yawma Al Qiyaamati."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaa Faadhimahفاطمة loogu bixiyey maxaa yeelay Ilaahay wuxuu ka reebay ayada iyo dhasheedaba Naarta Maalinta Qiyaame", oo erayga al fadhmu\الفطم waxaa la yiraahdaa al mancu المنع oo ah ka reebidda.
Sidaas ayaa marka ilmaha naaska laga gooyo waxaa la yiraahdaa fudhima\فطم, oo ah naaska ayaa laga gooyey.
Arrinkaan waxaa Faadhimahفاطمة iyo intay dhashayba oo ayada ku abtirsata ugu sugan bishaaro wayn iyo inay islaannimo ku dhimanayaan, Naarna ayan geleyn, muslinkoo idil Allaha ka fogeeyee.
Waxaa kaloo wariyay Xadiithkaan ibnu Casaakir\إبن عساكر iyo ghayrkiisba.

Al Ghassaaniiالغساني iyo al Khadhiib\الخطيب waxay wariyeen inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"سميت فاطمة لأن الله فطمها ومحبيها عن النار."

"Summiyat Faadhimah li anna Allaaha fadhamahaa wa muxibbiihaa cani Al Nnnaari."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaa Faadhimah loogu bixiyay ayadoo uu Ilaahay ayada iyo inta jecelba Naarta ka mamanuucay, oo ayan geleyn weeye." Allow naga mid dhig kuwa ayada iyo dhasheedaba jecel."
Xadiithkaanna waxaa bishaaro ugu jirtaa qof kasta oo muslin aah oo Faadhimahفاطمة , gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, jecel.

Faadhimahفاطمة waxaa kaloo lagu koofaaraa **Al Batuul**\البتول, looguna bixiyey ayadoo ka sare

martay oo ka go'day haweenka zamankeeda, xagga fadliga iyo sarreynta iyo diinta iyo gobannimada iyo laan dheeraantaba, ayadoo kaddib marka walaaleheed la oofsaday, ayan adduunka jirin haweeney fadligaas la wadaagta.
Waxaa kaloo la yiri waxaa Al Batuul\البتول loogu bixiyay, siduu ibnu Al Athiir\إبن الأثير u yiri, go'iddeeda ay Ilaahay Tacaalaa u go'day, ayadoo adduunkaan ka go'day, oo al tabattul waa go'idda, sidayba non sheegtay Aayadda sideedaad ee Suuratu Al Muzammil\سورة المزمل, oo uu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى ku yiri:

وَاذْكُرِ اسْمَ رَبِّكَ وَتَبَتَّلْ إِلَيْهِ تَبْتِيلًا (8)

"Wa athkur Isma Rabbika wa tabattal I1ayHi tabtiilan(8)",
oo macnheedu yahay:

"Xusna magaca Rabbigaa, cibaadadiisana u go'(8)."

Faadhimah waxaa kaloo la yiraahdaa **Al Zahraa'a**\الزهراء, looguna bixiyey midabkeeda oo ahaa caddaan nuuraya.

Guurka Faadhimah\فاطمة

Faadhimah\فاطمة , gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay guursatay Amiiru Al Mu'miniina Al Imaamu Calii bin Abii Dhaalib bin Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim Al Haashimii\أمير المؤمنين علي بن أبي طالب بم عبد المطلب بن هاشم الهاشمي, Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam, bisha Muxarram\محرم ee sanadka saddexaad ee Hijrada. Taariikho kalena waa la sheegay, aanse ka fogeyn middaan. Waxaa kaloo la yiri waxay guursatay afar bilood iyo nus kaddib markuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Caa'ishah\عائشة la aqal galay, tanoo ahayd bisha Shawwaal\شوال ee sanadka labaad ee Hijrada, oo markaas ku beegan nuska bisha Safar\صفر, ama toddoba bilood Hijrada dabadeed.

Calii\علي wuxuu Faadhimah\فاطمة la aqal galay toddoba bilood iyo nus nikaaxa dabadiis, taasoo ku beegan bisha Shawwaal\شوال ee sanadka saddexaad ee Hijrada.
Waxaa kaloo la yiri: bal wuxuu guursaday bisha Safar\صفر ee sanadka labaad, wuxuuna la aqal galay bisha Thuu Al Xijjah\ذوالحجة ee ay labo iyo labaatan bilood kasoo wareegteen Hijrada.

Ibnu Sacad\إبن سعد wuxuu wariyay inuu Calii\علي guursaday bisha Rajab\رجب ee sanadkay Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة yimaadeen, wuxuuna la aqal galay markay duullaanka Badar\غزوة بدر kasoo laabteen.

Faadhimah\فاطمة waxay Calii\علي ku guursatay amarka Ilaahay, oo wuxuu Al Dhabraanii \الطبراني wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallallaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إن الله أمرني أن أزوج فاطمة من علي."

"Innaa Allaaha amaranii an uzawwija Faadhimah min Calii."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu i amray inaan Faadhimah**فاطمة** u guuriyo Cali**علي** ."

Markaas ay guursaneyso, waxay Faadhimah**فاطمة** jirtaa shan iyo toban sano iyo shan bilood iyo nus, siduu ibnu Cabdu Al Barr**إبن عبد البر** u wariyay.
Calina**علي** wuxuu markaas jiraa afar iyo labaatan sano iyo bil iyo nus. Intaasoo taariikhood midday ahaydna Ilaahayga aan waxba ka qarsooneyn ayaa og.

Siduu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Faadhimahفاطمة **u jeclaa**

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, caruurtiisa oo idil wuu jeclaa, wuxuuna Al Tarmathii**الترمذي** iyo al Xaakim**الحاكم** ay Usaamah**أسامة** ka wariyeen inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أحب أهلي إلي فاطمة."

"Axabba ahlii ilayya Faadhimahفاطمة**"**,
oo macneheedu yahay:

"Ehelkeyga waxaan ugu jeclahay Faadhimah."
Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Waxa ugu xoog badan oo taas loo daliilsan karo ay tahay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إنها سيدة نساء العالمين إلا مريم."

"Innahaa sayyidatu nisaa'i al caalamiina illaa Maryama."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Aayadu – Faadhimah**فاطمة** - waa Sayyidda, waana hoggaamiyasada madaxda u ah haweenka caalamiinta, intaan Maryama**مريم** ahayn"

Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalla, saddexdiisa gabdhood oo kale, waxaa la oofsaday oo ay dhinteen ka hor intuusan isagu adduunkaan ka tegin, oo sidaas ayay ayagu isaga saxiifadiisa ugu jiraan oo musiibadaaas iyo dhibaatada ku timid dhimashada ubadkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo sabarka uu u sabray ajar looga siinayaa.
Nabiguse, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu adduunkaan ka tegey ayadoo ay Faadhimah **فاطمة** nooshahay, oo sidaas ayuu isagu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayada saxiifadeeda ugu jiraa, oo musibadaas ku timid oo ah waayidda aabeheedii Nabiga iyo RasuuIka Ilaahay ahaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo sabridda ay musiibadaas u sabartay, ayaa looga ajar siinayaa. Qiimaha waynta aabahaasna, oo ah Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ilaahay Tacaalaa keli ah ayaa qadarkeeda og.

Abuu Jacfar Al Dhabarii**أبو جعفر الطبراني** wuxuu tafsiirkiisa ku wariyay inay Faadhimah**فاطمة** tiri:

"أنه صلى الله عليه وسلم ناجاني، فبكيت، ثم ناجاني فضحكت فسألتني عائشة فقلت: "أأخبرك بسر رسول الله صلى الله عليه وسلم؟"، فلما توفى سألتني، فقالت: قال: "احسب أني ميت في عامي هذا، وأنه لم ترزأ امرأة من المسلمين مثل ما رزئت، فلا تكوني مثل امرأة منهن صبرا." فبكيت، فقال: "أنت سيدة نساء أهل الجنة إلا مريم"، فضحكت."

“Ananahu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam naajaanii, fa bakaytu, thumma naajaanii fa daxiktu, fa sa’alatnii Caa’ishah fa qultu: “a’ukhbiriki bi sirri Rasuuli Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam?” Falammaa tuwafaa sa’alatnii”. Fa qaalat: “qaala: “axsabu annii mayyitun fii caamii haathaa, wa annahu lam tazra’ imra’atun mina al muslimiina mithla maa ruz’iti, falaa takuunii mithla imra’atin mihunna sabran.” Fa bakaytu. Fa qaala: “Anti Sayyidatu nisaa’i ahli al jannati illaa Maryama.” Fa daxiktu.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Wuu ila faqay (waana aabeheed, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu hayey xanuunbka loo oofsan doono), markaasaan ooyay. Markaasuu hadana ila faqay, markaasaan qoslay. Markaasey Caa'ishah\عائشة i waydiisey, waxaanna ku iri: "Miyaan sirta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu CaIayhi Wasallam, kuu sheegaa?" Markaasey markii la oofsaday, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hadana i weydiisay". Markaasey waxay tiri: wuxuu yiri: "Waxaan u maleynayaa inaan sanadkaan dhimanayo, ayanna jirin haweeney ka mid ah haweenka muslimiinta oo ay haleeleyso dhibaatada adigu ku haleeleysa mid la mid ah. Marka sabarkaagu yuusan la mid ahaanin ayaga sabarkooda -oo haweenka kale aabohood oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ah kama uusan bixin."

Ibnu Cabdu Al Barr**إبن عبد البر** wuxuu yiri:
"Faadhimah**فاطمة** waxay ahayd midduu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gabdhihiisa ugu jecel yahay (siduu Nabiga laftiisuba, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yiriba:

"أحب أهلي إلي فاطمة."

"Axabba ahlii ilayya Faadhimah"
oo ah macneheedu yahay:

"Ehelkeyga waxaan ugu jeclahay Faadhimah", wuxuuna ka dhunkan jiray afka , wuxuuna nuujin jiray carrabkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, si ay calyadiisu calyadeeda ugu qasanto oo ay sidaas uurkeeda ku gasho. Hadduu socdaal u ambabaxayana, qofka ugu dambeeya oo uu sagootiyo oo ehelkiisa ka mid ahna waxay ahayd Faadhimah**فاطمة** . Markuu safarka kasoo noqdana, markuu laba rakco masjidka ku tukado, gurigeeda ayuu ugu hor geli jiray (Siduu Axmadna|**أحمد** Thawbaan**ثوبان** uga wariyay)".

Arooska Faadhimah**فاطمة**

Sanadka labaad ee Hijrada ayay Faadhimah**فاطمة** waxay guursatay Calii bin Abii Dhaalib **علي بن أبي طالب**, Ilaahay wajigiisa ha karaameeyee.

Al Dhabarii**الطبري** wuxuu sheegay inay guursatay bisha Safar**صفر,** waxayna la aqal gashay bisha

Thuu Al Xijjah\ذوالحجة ee isla sanadkaas, markay labo iyo labaatan bilood kasoo wareegeen Hijrada.

Markaas ay guursaneyso Faadhimah\فاطمة waxay jirtaa shan iyo toban sano iyo shan bilood ama lix bilood iyo nus. Caliina\علي wuxuu markaas jiraa kow iyo labaatan sano iyo shan bilood. Calii\علي Faadhimah\فاطمة haween kale lama uusan guursan, mana uusan guursan ilaa ay Faadhimah\فاطمة ka dhimato.

Furashada Makkah\مكة kaddib ayuu Calii\علي doonay Juwayriyyah\جويرية, gabadha uu dhalay Abuu Jahahl\أبوجهل, uuna doonay inuu Faadhimah\فاطمة la guursado.
Markaasey Faadhimah\فاطمة waxay aabeheed ku tiri:

"زعم قومك أنك، لاتغضب لبناتك، وهذا علي ناكح بنت أبي جهل."

“Zacama qawmuka annaka laa taghdibu li banaatika, wa haathaa Caliyyun naakixun binta Abii Jahl.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Dadku waxay leeyihiin in gabdhahaaga marka lagu xadgudbo aadan ka caroon. Midkaanna waa Calii\علي oo guursanaya gabadha Abuu Jahal."
Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, intuu istaagay masjidka dhexdiisa, oo uu asha-haatay ayuu wuxuu yiri:

"إني أنكحت أبا العاصي، فحدثني فصدقني. ووعدني فوفى لي. وإن فاطمة بضعة مني. فمن أغضبها أغضبني. وإني أكره أن يسوءها. والله لا تجتمع بنت رسول الله وبنت عدو الله عند رجل واحد."

"Innii ankaxtu Abaa Al Caasii, faxadathanii fa sadaqanii. Wa wacadanii fa wafaa lii. Wa inna Faadhimah badcatun minnii. Fa man aghdabahaa aghdabanii. Wa innii akrahu an yusuu'ahaa. Wa Allaahi laa tajtamicu bintu Rasuuli Allaahi wa bintu caduwwa Allaahi cinda rajulin waaxidin."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaan gabadheyda (waa Zaynab\زينب) u guuriyey Abaa Al Caasii\أبا العاصي.
Abuu Al Caasii\أبا العاصي wuu ii warramay, runta ayuuna ii sheegay. Ballan ayuu iga qaaday, wuuna ii oofiyay. Faadumana\فاطمة waa cad aniga hilibkeyga ka mid ah, qofka ka careysiiyana aniguu iga careysiiyay, aniguna waa necbahay inuu dhibaateeyo, oo wa Allaahi\والله inayan gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo gabadha cadawga Ilaahay nin uusan wada qabi karin, oo ayan agtiisa ku kulmeyn."

Waxaa sidaas u wariyay Al Bukhaarii\البخاري iyo Muslim\مسلم. Intaas kaddib wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Faadhimah\فاطمة ku yiri:

"أوما ترضين أن تكوني سيدة نساء المؤمنين."

"Awa maa tardiina an takuunii sayyidata nisaa'a al mu'miniina?"
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Miyaadan raalli ku ahayn inaad ahaato sayyidda hoggaamisa haweenka mu'miniinta?"
Waxaa wariyay Muslim**مسلم.**

Axmad**أحمد** wuxuu wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أفضل نساء أهل الجنة."

"Afdala nisaa'a ahli al Jannati",
oo macneheedu yahay:

"Midda ugu sarreysa haweenka Jannada."

Gabadhaas uu Abuu Jahal**أبو جهل** dhalay, dhacdadaas kaddib waxaa guursaday saxaabiga la yiraahdo Cattaab bin Asiid bin Abii Al Ciisii bin Umayyah bin Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah Al Qurayshiyyi Al Amawii **عتاب بن أسيد بن أبي العاصي بن أمية بن عبد شمس بن عبد مناف بن قصي بن كلاب بن مرة القرشي الأموي**, oo isagoo kow iyo labaatan jir ah uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Makkah**مكة** markuu furtay uu guddoomiye uga dhigay.

Cattaab**عتاب** markay qisadaas dhacday ayuu wuxuu yiri: "Anigaa dhibkeeda -waana Juwayriyyah**جويرية,** gabadha Abuu Jahal**أبو جهل**-idinka qaadaya", oo uu markaas guursaday. Cattaab**عتاب** waa ninkuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu xilkaas guddoomiyennimada Makkah**مكة** u dhiibay, uu ku yiri, siduu Ibnu Al Athiir**إبن الأثير** u wariyay**:**

"يا عتاب، تدري على من استعملتك؟ استعملتك على أهل الله عز وجل. ولو أعلم لهم خيرا منك استعملته عليهم."

"Yaa Cattaab, tadrii calaa man istacmaltuka? Istacmaltuka calaa ahli Allaahi Cazza wa Jalla. Wa law aclamu lahum khayran minka istacmaltuhu calayhim."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Cataabow**يا عتاب,** ma ogsoon tahay dadka aan taladooda kuu dhiibay oo aan guddoomiye kaaga dhigay? Waxaan kuu dhiibay xilka ehelka Ilaahay**الله** Cazza\عز wa**و** Jalla\جل. Haddaan ogaan lahaa qof adiga kaa khayr badan oo an xilkooda u dhiibo, isagaan xilkooda u dhiibi lahaa."
Taas waxay Cattaab**عتاب** u tahay bishaaro iyo faan manaaqibtiisa ka mid ah.

Anas**أنس** waxaa laga wariyay inuu yiri:
"Waxaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid Abuu Bakar**أبوبكر,** kaddibna Cumar**عمر**, ayagoo doonaya Faadhimah**فاطمة** . Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka aamusay labadoodaba, uusan hadalna u celin, oo uusan u jawaabin. Markaasey labadooduba Calii**علي** u tageen, ayna ku amreen inuu isagu Faadhimah**فاطمة** doono. Calii**علي** wuxuu yiri:
"Waxay igu baraarujiyeen arrin aan moogganaa. Markaasaan anigoo farax daraadiis go'ayga la

jiidaya kacay oo aan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u imid, waxaanna ku iri: "Faadhimah ma ii guurineysaa?"
Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"عندك شيئ؟"

"Cindaka shay'un?" oo ah
"Waxad meher ahaan u siisid ma haysataa?"
Waxaan iri:
"Faraskeyga iyo diraceyga, oo ah gaashaanka."
Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أما فرسك فلابد لك منها، وأما بدنك فبعها."

"Ammaa farasuka fa laa budda laka minhaa, wa ammaa badanaka fa bichaa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Faraskaaga waa lagama maarmaan inaad leedahay, oo jihaadaka ayaad ugu baahan tahay, gaashaankase gad."

Markaasuu Calii\علي diracaas wuxuu ka gaday Cuthmaan bin Caffaan**عثمان بن عفان,** kana siiyey afar boqol iyo sideetan dirham. Kaddibna Cuthmaan**عثمان** gaashaankaas wuu usoo celiyay.

Markaasuu Calii**علي** wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ula yimid lacagtii iyo gaashaankiiba. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cuthmaan u duceeyey. Markaasaan dhabtiisa -waa lacagtiiye- Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam saaray. Markaasuu lacagta qaarkeed gacantiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku qabtay, wuxuuna yiri:

"أي بلال، إبتع بها لنا طيبا."

"Ay Bilaal, ibtac bihaa lanaa dhiiban".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Bilaalow, cadar noogu soo gad."
Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu amray in Faadhimah**فاطمة** la diyaariyo, oo loo aqal dhiso, wuxuuna u sameeyey sariir ka sameysan qoryo xargo la isku xirxiray, iyo barkin harag ka samaysan oo liif laga buuxiyay."

Jaabir**جابر** wuxuu isaguna wariyay inay Faadhimah**فاطمة** gogosheedu habeenka la aqal geeyey ay ahayd wan haraggiisa, siduu ibnu Faaris**إبن فارس** u wariyay.

Riwaayadda ibnu Isxaaqna**إبن إسحاق** wuxuu Calii**علي** ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"هل عندك شيئ؟"

"Hal cindaka shay'un?"

oo ah
"Waxad meher ahaan u siisid ma haysataa?"
Waxaan iri:
"Faraskeyga iyo diraceyga, oo ah gaashaanka."
Waxaan iri: "Maya".
Markaasuu wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"فما فعل الدرع الذي صلحتكها؟"

"Fa maa facala al dircu allathii sallaxtukahaa?"
Xadiithka macnihiisu waxa weeye:
"Maxaa ku dhacay gaashaankaan hub ahaan kuu siiyey?"
Gaashaankaasu wuxuu ka mid ahaa maalkii Badar**بدر** laga ghaniimaystay gaalada.

Axmad**أحمد** wuxuu isaguna Calii**علي** ka wariyay inuu yiri: "Waxaan u kacay inaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka doono gabadhiisa. Markaasaan waxaan is iri: "Wa Allaahi iaanan maal lahayn."
Kaddibna waxaan xusuustay siduu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam riximka u xiriiriyo, uguna noqnoqdo. Markaasaan ka doonay. Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"هل عندك شيئ؟"

"Hal cindaka shay'un?"
oo ah
"Waxad meher ahaan u siisid ma haysataa?"
Waxaan iri: "Maya".
Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"فأين درعك الحطيمة اللتي أعطيتك يوم كذا وكذا؟"

"Fa ayna dircuka Al Xadhiimah allatii acdhaytuka yawma kithaa wa kithaa?"
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"oo mee gaashaankaaga magaciisu yahay Al Xadhiimu**الحطيمة** oo aan ku siiyey maalin hebla iyo hebla?"
Waxaan iri:
"Waan haystaa."
Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"فاعطيها إياها."

"Fa acdhiihaa iyyaahaa"
oo macneheedu yahay:

"Hadaba isagaas ayada meher u sii."

Markii Faadhimahفاطمة la aqal geynayey, ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Caliiعلي ku yiri:

"إذا اتتك فلا تحدثي شيئ حتى آتيك."

"ithaa atatka fa laa taxdith shay'an xattaa aatiika."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Markay kuu timaaddo waxba ha samayn, jeer aan kaaga imaado."

Aqalkana waxaa diyaarisey saxaabiyadda Asmaa' bintu Cumaysأسماء بنت عميس, haweenta Jacfar bin Abii Dhaalibجعفر با أبي طالب, Allaha dhamaantood raalli ka noqdee.
Markaasey Faadhimahفاطمة aqalka timid ayadoo ay la socoto Ummu Aymanأم أيمن, oo ay qolka dhinac kale ka fariisatay.

Markaasaa waxaa yimid Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kaddib markuu Salaadda cishaha soo tukaday, wuxuuna yiri:

"أههنا أخي؟"

"Ahaahunaa akhii?"
oo macneheedu yahay:

"Ma joogaa walaalkey?"

Markaasey Ummu Aymanأم أيمن waxay tiri:
"Waxaad leedahay walaalkeeyow, adigoona gabadhaada u guurisay."
Wuxuu , Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"نعم."

"Nacam" oo ah "Haa".

Markaasuu intuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qolka galay, ayuu wuxuu Faadhimahفاطمة ku yiri:

"أأتني بماء."

"A'atinii bi maa'in", oo ah: "Biyo ii keen."
Markaasey istaagtay, ayadoo xishood daraadiis maradeedaku turunturrootay, oo ay markaas kalax qori ka samaysan oo guriga dhex yiillay biyo kusoo shubtay, oo ay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u keentay.
Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kalaxaas biyo ka cantuugay, uuna biyahaas afkiisa ku jira kalaxa dib ugu celiyay. Markaasuu wuxuu Faadhimah ku yiri:

"تقدمي."

"Taqaddamii", oo macneheedu yahay: "Hore usoo tillaabso oo ii soo dhowow".

Markaasey soo hor istaagtay. Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, biyahaas labadeeda naas dhexdooda uga rusheeyey iyo madexeedaba, wuxuuna yiri:

"أللهم إني أعيذها بك وذريتها من الشيطان الرجيم."

"Allaahumma innii uciithuhaa bika wa thurriyatahaa mina al shaydhaani al rrajiimi." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahayow, Adiga ayaan ayada iyo ubadkeedaba shaydhaanka la rajmo oo la dhagaxyeeyo kaa magan geliyay."

Intaas kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam hadana Faadhimah ku yiri:

"أدبري."

"Adbirii", oo macneheedu yahay: "Sii jeeso."

Markaasay sii jeesatay, oo ay aabeheed, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dhabarkeeda xijisay. Markaasuu wuxuuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam biyaha ku shubay labadeeda garab dhexdooda.

Intaas kaddib ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Calii\علي ku yiri:

"أأتني بماء."

"A'atinii bi maa'in", oo macnihiisu yahay: "Biyo ii keen."

Calii\علي wuxuu yiri:
"Markaasaan waxaan gartay wuxuu doonayo. Markaasaan kacay oo aan kalaxa biyo kasoo buuxiyay oo aan u keenay. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam kalaxa biyo ka cantuugay oo uu afka ka buuxsaday, kaddibna uu biyahaas ku shubay madaxayga korkiisa iyo labadayda naas dhexdooda. Intaas kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam igu yiri:

"أدبر."

"Adbir", o macnihiisu yahay: "Sii jeeso."

Markaasuu biyaha labada garab dhexdooda iiga shubay, kaddibna uu yiri:

"أللهم إني أعيذه بك وذريته من الشيطان الرجيم."

"Allaahumma innii uciithuhu bika wa thurriyatahu mina al shaydhaani al rrajiimi"

oo macnihiisu yahay:
"Ilaahayow, Adiga ayaan isaga iyo ubadkiisaba shaydaanka la rajmo oo la dhagaxyeeyo kaa magan gelinayaa."

Intaas kaddib ayuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Calii\علي ku yiri:

"ادخل باهلك بسم الله والبركة."

"Udkhul bi ahlika bi Ismi Allaahi wa al barakah".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ugu gal ehelkaaga magaca Ilaahay iyo barakadiisa", siday Asmaa' binti Cumays**أسماء بنت عميس** uga wariyeen Axmad**أحمد** iyo ibnu abii Xaatim**إبن أبي حاتم** iyo ghayrkoodba.

Ibnu Casaakir**إبن عساكر** iyo ghayrkiisba, sida abuu Al Khayr Al Qazwiinii**أبو الخير القزويني** waxay Anas**أنس** ka wariyeen inuu Calii\علي Faadhimah\فاطمة doonay, kaddib markay Abuu Bakarأبوبكر iyo Cumar**عمر** dooneen, oo uu markaas Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri:

"قد أمرني ربي بذلك."

"Qad amaranii Rabbii bi thaalika",
oo macneheedu yahay:
"Rabbigay ayaa i amray inaan kuu guuriyo."

Waliimada arooska Faadhimahaفاطمة

Al Xaafith abuu Bishr Muxammad bin Axmad Al Raazii Al Duulaabii **الحافظ أبوبشر محمد بن أحمد الرازي الدولابي** wuxuu Asmaa' binti Cumays**أسماء بمن عميس** ka wariyay inay tiri:
"Calii\علي wuxuu arooska Faadhimahفاطمة u walimeeyey waliimo aan mid tiisa ka fiican waagaas la arag. Gaashaankiisa ayuu nin yuhuudi ah u rahmay, uuna kasoo qaatay hal wasaq oo shaciir ah nuskiis iyo timir iyo subag la isku daray, iyo al aqdhi**الأقط**, iyo wan Sacad**سعد** bixiyey iyo dhawr aasac oo haruur ah oo ay koox ansaarta ahi bixisay."

Hal wasaq nuskiis, siduu ugu xisaabay Dr. Yuusuf Al Qardaawii**د\يوسف القرضاوي** kitaabkiisa axkaamta Zakada**أحكام الزكات,** wuxuu la mid yahay saddex iyo toban kiilo iyo lix boqol oo graam. Al Aqdhi**الأقط** waxaa la yiraahdaa jubnada fadhida oo adag, oo laga sameeyo caanaha hore loo subag bixiyay, afka ingiriiskana lagu yiraahdo cheese. Saac waa beeg, halkii saacna wuxuu u dhigmaa labo kiilo iyo boqol iyo lix iyo toddobaatan graamo.

Aqaldhiska Faadhimahفاطمة

Axmad**أحمد** wuxuu Manaaqibta Calii**مناقب علي** ku wariyay inuu aqal dhiska Faadhimahفاطمة ahaa "kadiifad dhogor khafiif ah leh, iyo sibraar biyaha lagu shubto, iyo barkin harag ka samaysan liifna laga buuxiyay."

Waxaa intaas dheer sariir ka sameysan qoryo xargo la iskula xiray (oo la mid ah sariirtay soomaalidu tahay "sariir caddiir ah") iyo joodari wan haraggiisa ka samaysan.

Caruurta Faadhimahفاطمة

Faadhimah waxay Calii u dhashay shan cunug oo kala ah:

Kow. Al Xasanu, wiilka Faadhimahالحسن إبن فاطمة\

Faadhimahفاطمة, gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay ku curatay oo ay Caliiعلي\ u dhashay Amiiru Al Mu'miniinaأمير المؤمنين Al Xasanuالحسن\, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ahna sibdhigaالسبط\ Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ahna isaga iyo walaalkiis Al Xusaynuالحسين\ madaxda shabaabta Jannada.
Warbixinta Al Xasanالحسن\ iyo Al Xusaynالحسين\ kutubbo dhan ayay u baahantahay, oo halkaan uga warbixin maynno. Wuxuu ahaa ninka ugu horreeeya oo Carbeed oo magacaas loo bixiyo, ayadoo uu Ilaahay magacaas, isaga iyo walaalkiisba, u qariyay.

Al Imaamu Al Xasanuالإمام الحسن\ wuxuu dhashay nuska Ramadaanرمضان\ ee sanadka saddexaad ee Hijrada, Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ugu walqalay wan, timaha ayuuna ka xiiray, isaga iyo walaalkiisa Al Xusaynbaالحسين\ oo uu culeyskooda oo qalin ah masaakiinta ku sadaqaystay.
Jibriilجبريل\ ayaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Jannada uga keenay go' xariirta Jannada ah oo uu magaca Al Xasanuالحسن\ ku dhigan yahay.

Al Xasanuالحسن\ ayaa dadka ugu ekaa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, madaxiisa ilaa laabtiisa. Al Xasanuالحسن\ wuxuu Amiiru Al Mu'miniinaأمير المؤمنين\ ahaa, waa boqorka dawladda islaamkee, lix bilood iyo labaatan maalmood, kaddibna wuxuu xukunka ku wareejiyay Mucaawiyah bin Abii Sufyaanمعاوية بن أبي سفيان\.

Kaddibna Al Xasanالحسن\ waa la sumeeyey, oo uu Al Madiinah Al Munawwarahالمدينة المنورة\ ayuu ku dhintay, kaddib markuu afartan maalmood xanuunsanaa, sanadka sagaal iyo afartanaad ee Hijrada. Al Xasanالحسن\ waxaa hooyadiis Faadhimahفاطمة\ lagula duugay Al Baqiicالبقيع\.

Labo. Al Xusaynu, wiilka Faadhimahالحسين إبن فاطمة\

Faadhimahفاطمة\, gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay kaloo Caliiعلي\ u dhashay Al Imaamu Al Xusaynuالإمام الحسين\, sibdhigaالسبط\ Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Al Xusaynuالحسين wuxuu calool galay konton habeen dhalashada Al Xasanالحسن\ kaddib.
Al Xasanالحسين iyo Al Xusaynالحسين\ iyo Muxassinمحسن\ waxaa saddexdoodaba magacda u bixiyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Markuu dhashay wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu walqalay wan. Al Xusaynالحسين ayaa dadka ugu ekaa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, min laabtiisa ilaa lugihiisa.

Al Xusaynuالحسين waxaa lagu dilay meesha la yiraahdo Karbalaa'\كربلاء ee ku taalla dalka Ciraaq\عراق sanadka kow iyo lixdanaad ee Hijrada.
Qabriga Al Xusaynuالحسين meeshuu ku yaallo Ilaahay Tacaalaa keli ah ayaa og. Waxaase loo badiyaa inuu isaguna Al Baqiic\البقيع ee Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة ku duugan yahay hooyadiis iyo walaalkiis agtooda.

Saddex. Muxassin, wiilka Faadhimahمحسن إبن فاطمة\

Faadhimah\فاطمة, gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay kaloo Calii\علي u dhashay wiil la yiraahdo Muxassinمحسن, oo isagoo yar dhintay. Dhicis ayuu ahaana waa la wariyay, siduu u wariyay Kitaabu Al Shajarati Al Nabawiyyah\كتاب الشجرة النبوية.

Afar. Ummu Kulthuum, gabadha Faadhimahأم كلثوم بنت فاطمة\

Faadhimah\فاطمة waxay kaloo Calii\علي u dhashay gabar la yiraahdo Ummu Kulthuumأم كلثوم . Ummu Kulthuumأم كلثوم waxaa Caliiعلي kasoo doonay oo ay guursatay Abuu Xafs, Amiiru Al Mu'miniina Cumar ibnu Al Khadh-dhaab\أبو حفص أمير المؤمنين عمر بن الخطاب, oo ay u dhashay wiil Zayd\زيد la yiraahdo iyo gabar Ruqayyah\رقية magaceedu yahay, oo uusan midkoodna ciribi ka harin.

Markuu Caliiعلي gabadha siiyey, ayuu Cumarعمر wuxuu tegey majliska Muhaajiriinta\المهاجرين oo uu ku yiri:
"i aqal geeya."
Markaasey waxay yiraahdeen:
"Yaan kuu aqal geynnaa?"
Wuxuu yiri:
"Waxaan guursaday Ummu Kulthuumأم كلثوم , gabadha Caliiعلي. Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo leh:

"كل سبب ونسب وصهر ينقطع يو القيامة إلا نسبي وسببي وصهري."

"Kullu sababin wa nasabin wa sihrin yanqadhicu Yawma Al Qiyaamati illaa nasabii wa sababii wa sihrii",
oo macneheedu yahay:
"Xarig kasta iyo nasab kasta iyo xididnimo kasta way go' ayaan Maalinta Qiyaame intaan ka ahayn aniga nasabkeyga iyo xariggeyga iyo xididnimadeyda."
Oo maalintaas waxba la iskuma aha, intaan ahayn xarigga iyo nasabka iyo xididnimada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Marka Cumar\عمر la dilay ayadoo u dhaxdana waxay Ummu Kulthuumأم كلثوم guursatay Cawn

bin Jacfar bin Abii Dhaalib\عون بن جعفر بن أبي طالب, oo ka dhintay.

Markaasaa waxay guursatay walaalkiis Muxammad bin Jacfar bin Abii Dhaalib محمد بن جعفر بن أبي طالب\, oo isaguna ka dhintay.

Markaasey waxay guursatay walaalkooda saddexaad Cabdu Allaahi bin Jacfar bin Abuu Dhaalib \عبد الله بن جعفر بن أبي طالب, oo ay ayadoo u dhaxda dhimatay.

Markay saddexdaan walaalaha ah kooda u dambeeyey ay guursatay, oo ah Cabdu Allaahi bin Jacfar bin Abii Dhaalibعبد الله بن جعفر بن أبي طالب , waxay Ummu Kulthuumأم كلثوم tiri, siduu ibnu Sacadإبن سعد\ u wariyay:

"إني لأستحي من أسماء بنت عميس، مات ولداها عندي، فتخوف على الثالث."

"Waxaan ka xishoonayaa Asmaa' bintu Cumays, oo labadeeda wiil ayaa agteyda ku dhinteen, waxaanna u baqanayaa kooda saddexaad."

Asmaa' bintu Cumaysأسماء بنت عميس\ waxay ahayd hooyada saddexdaas wiil Jacfar bin Abii Dhaalibجعفر بن أبي طالب u dhashay.
Al Nasaa'iiالنسائي\ wuxuu Cabdu Allaahi bin Jacfarعبد الله بن جعفر بن أبي طالب ka wariyay inuu yiri:
"Markii Jacfar la dilay ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"أدع إلي بني أخي."

"Udcuu ilayya banii akhii" oo ah:

"iigu yeera wiilasha walaalkey".

Markaasaa naloo keenay, annagoo aad caruurta digaagga na moodid. Markaasuu midka timaha xiira amray oo timaha madaxa nalaga wada xiiray, kaddibna wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أما محمد فيشبه عمنا أبا طالب. وأما عبد الله فيشبه خلقي وخلقي وأما عون فيشبه خلقي وخلقي."

"Ammaa Muxammad fa yashbahu cammanaa Abaa Dhaalib. Wa ammaa Cabdu Allaahi fa yashbahu khalqii wa khuluqii wa ammaa Cawn fa yashbahu khalqii wa khuluqii"
oo macneheedu yahay:

"Muxammadnaمحمد\ wuxuu u egyahay adeerkeen Abuu Dhaalibأبوطالب\, Cabdu Allaahiعبد الله\ se aniguu ii egyahay xagga abuuritaanka iyo dabeecadaba. Cawnseeعون\ aniguu ii egyahay xagga abuuritaanka iyo dabeecadaba."

Kaddib intuu gacanta iga qabtay oo uu leexiyay, kaddibna uu yiri:

"أللهم أخلف في جعفر في أهله وبارك لعبد الله في سفقة يمينه."

"Allaahumma akhluf fii Jacfaran fii ahlihi waa baarik li Cabdu Allaahi fii safqati yamiinihi",
oo macneheedu yahay:

"Ilaahayow Jacfar**جعفر** ehelkiisa u tarmi, Cabdu Allaahina**عبد الله** ganacsigiisa yu barakee."

Saddexdaas walaalaha ah waxay caruur uga dhashay midka labaad oo ah Muxammad**\محمد,** waxayna u dhashay gabar ayadoo yar dhimatay. Sidaas ayeeyan Ummu Kulthuum**\أم كلثوم** ciribi uga harin, ayaa la yiri, siduu Al Qasdhalaanii**\القسطلاني** u wariyay.

Shan. Zayanab, gabarta Faadhimah\زينب بنت فاطمة

Faadhimah**\فاطمة,** gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay kaloo Calii**\علي** u dhashay gabar la yiraahdo Zaynab**\زينب,** oo guursatay Cabdu Allaahi bin Jacfar bin Abuu Dhaalib**عبد الله بن جعفر بن أبي طالب** , markay walaasheed ka dhimatay, waxayna u dhashay caruur ay ka mid yihiin Calii**علي** iyo Ummu Kulthuum**أم كلثوم** .

Ummu Kulthuum-taan**أم كلثوم** waxay guursatay ina adeerkeed Al Qaasim bin Muxammad bin Jacfar bin Abii Dhaalib**\القاسم بن محمد بن جعفر بن أبي طالب,** ayna caruur u dhashay ay ka mid yihiin Faadhimah**فاطمة** oo guursatay Xamzah bin Cabdu Allaahi bin Al Zubayr bin Al Cawwaam**\حمزة بن عبد الله بن الزبير بن العوام,** oo ay ciribi uga hartay.

Sidaas ayuu ubadka Cabdu Allaahi bin Jacfar**\عبد الله بن جعفر** wuxuu ka tarmay oo ka faafay wiilkiisaan Calii**\علي** iyo walaashiis Ummu Kulthuum**\أم كلثوم,** oo labadooduba sidaas ku yihiin caruurta Zaynab Al Zahraa'**\زينب الزهراء.**

Qof kasta oo ayaga ku abtirsadana waxaa la yiraahdaa Jacfarii**\جعفري,** oo awoowohood loogu magac daray, waana **ashraaf**شراف, oo dhasha Jacfar**جعفر** waxay ka mid yihiin Aalu Al Bayti **\أهل البيت**, zakaduna waa ka xaaraan, waxayna wax ku leeyihiin sahamka Thuu Al Qurbaa **ذو القربى\,** oo qoyska Nabi Muxammad, Sallaa Alaahu Calayhi Wasallam, ayay ka mid yihiin.

Dhasha kale oo ku abtirsata Jacfar bin Abii Dhaalib**جعفر بن أبي طالب** , ayanse Zaynab**زينب** , gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhalin, ayaguna waa **Ashraaf**أشراف, oo dhasha Jacfar**جعفر** waxay ka mid yihiin Aalu Al Bayti**أهل البيت** , oo waa reer Banii Haashim**\بني هاشم** iyo dhasha Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, adeerkiis, zakaduna waa ka xaaraan, waxayna wax ku leeyihiin sahamka Thuu Al Qurbaa**\ذو القربى** , oo qoyska Nabi Muxammad, Sallaa Alaahu Calayhi Wasallam, ayay ka mid yihiin, waxaase ka sharafbadan kuwa Zaynab**زينب** , gabadha Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku abtirsada.

Waxaase dhammaantood ugu sharafbadan dhasha ku abtirsata Al Xasan\الحسن iyo Xusayn \الحسين.

Wuxuu Al Xaakim\الحاكم Jaabir\جابر ka wariyay, Abuu Yaclaa\أبويعلى uu isaguna Faadhimah\فاطمة ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"لكل بني أم عصابة إلا إبني فاطمة: أنا وليهما وعصبتهما."

"Li kulli bunayya Ummu Casabah illaa ibnay Faadhimah: anaa waliyuhumaa wa casabathumaa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Caruurteyda kulligood waxay leeyihiin Ummu casabah, intaan ahayn labada wiil oo Faadhimah فاطمة: labadooda anigaa waligooda iyo casabadoodaba ah."

Casabah\عصبة waxaa la yiraahdaa qaraabada iyo tolka ninka aabihiis ku abtirsado. Sidaas ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu abtirsiga Al Xasanu الحسن iyo Al Xusaynu الحسين geliyay oo uu u nisbeeyey isaga laftiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Walaashood ay wada dhasheenna kuma uusan darin, maxaa yeelay caruurta ay dhalaan waxaa loogu abtirinayaa aabayaalkooda dhalay, oo sidaas ayuusan cunug kasta oo ay shariifadi dhashay shariif ku ahayn oo nasabka aabaha dhalay ayuu qaadanayaa, siduu ku qoray Al Sayuudhii\السيوطي kitaabkiisa Al Sulaalatu Al Zaynabiyyah\السلالة الزينبية. Wiilkase ama cunug kasta oo uu nin shariif ah dhalo, waa shariif, oo zakadu uma bannaana.

Sahriif\الشريف

Al Zarqaanii\الزرقاني wuxuu yiri:
Sharaf\شرف waxaa la yiraahdaa, siduu Al Raazii\الرازي Mukhtaaru Al Sixaax\مختار الصحاح ugu yiri, Sarreynta iyo makaanka sarreeya, oo jabalun mushrifun\جبل شريف waa buur korreysa. Marka shariif\شريف waa qof sarreeya, oo makaan sare adduunkaan dadka dhexdiisa ku leh. Sarreyntaasna waxaa lagu helaa oo keli ah ayuu Lisaanu Al Carabi\لسان العرب yiri aabayaalka gobta ah oo kariimiinta ah.
Khalqigana waxaa ugu sarreeya oo ugu khayr badan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Ehelu Baytkiisa\أهل البيت.
Sida dhasha Al Xasanu الحسن iyo Xusaynu الحسين ashraaf\أشراف loo yiraahdo ayaa ubadka Al Cabbaas\العباس, Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, adeerkiis, iyo dhasha Caqiil bin Abii Dhaalib\عقيل بن أبي طالب, iyo Al Calawiyyuuna\العلويون oo ah dhashay Muxammad "Al Xanafiyyah" bin Al Calii bin Abii Dhaalib\محمد الحنفية بن علي بن أبي طالب oo hooyadiisna la yiraahdo Khawlah bintu Iyaas bin Jacfar Al Xanafiyyah\خولة بنت إياس بن جعفر الحنفية, iyo dhasha ay Calii bin Abii Dhaalib\علي بن أبي طالب u dhaleen haween kaleba, ayna ashraaf ku noqdeen sharafta reer Banii Haashim\بني هاشم ay leeyihiin.

Al Zarqaanii\الزرقاني wuxuu yiri:
"Arrinka bilowgiisa waxaa Shariif\شريف la oran jiray qofkasta oo Aalu Al Bayti\أهل البيت ka mid

ah, ha ahaado "Xasanii\حسني" oo Al Xasan\الحسن ku abtirsada, ama "Xusaynii\حسيني" oo Al Xusayn\الحسين ku abtirsada, ama "Calawii\علوي" oo Calii\علي ku abtirsada, ama "Cabbaasii\عباسي" oo Al Cabbaas\العباس ku abtirsada, ama "Jacfarii\جعفري" oo Jacfar bin Abii Dhaalib\جعفر بن أبي طالب ku abtirsada, ama "Caqiilii\عقيلي" oo Caqiil bin Abii Dhaalib\عقيل بن أبي طالب ku abtirsada.

Sidaas ayayna ugu magacaaban yihiin Kitaabka Taariikhda ee Al Thahabii\تاريخ الذهبي, isagoo oranaya Al Shariifu Al Cabbaasii\الشريف العباسي, Al Shariifu Al Caqiilii\الشريف العقيلي, Al Shariifu Al Jacfarii\الشريف الجعفري, Al Shariifu Al Zaynabii\الشريف الزينبي.

Markaasey markay Faadhimiyiintu\الفاطميون (waxayna ahaayeen shiico) la wareegeen xukunka arliga Masar\مصر, ayay waxay magacaas kusoo koobeen oo ay Shariif\شريف yiraahdeen dhasha Al Xasanu\الحسن iyo Al Xusaynu\الحسين oo keli ah. Sidaas ayuuna ku socday Masar\مصر ilaa hadda." Waa intaas warka Al Zarqaanii\الزرقاني.

Ibnu Xajar\إبن حجر wuxuu kitaabkiisa Nuzhatu Al Albaabi fii Macrifati Al Alqaabi نزهت الألباب في معرفة الألقاب\ ku yiri:
"Nin kastoo u dhashay reer Banii Al Cabbaas\بني العباس oo Baghdaad\بغداد joogay, waxaa la oran jiray Shariif\شريف. Sidoo kale nin kasta oo Calawii\علوي ah (oo Calii\علي ku abtirsada) oo Masra\مصر joogana waxaa la oran jiray Shariif\شريف."
Al Zarqaanii\الزرقاني wuxuu yiri:
"Wuxuu Al Cajaajata\العجاجة ku yiri:
"Shaki kuma jiro in sida hore loo oran jiray ay mudnaanta koowaad leedahay, ahna in shariif\شريف la yiraahdo kulli mid kasta oo Calawii\علوي ah iyo Jacfarii\جعفري iyo Caqiilii\عقيلي iyo Cabbaasii\العباسي, siduu Al Thahabii\الذهبي yeelay oo kale, iyo siduu u ishaaray Al Maawardii\الماوردي oo Shaaficiyada ka mid ah iyo Al Qaadii Abuu Yaclaa أبو القاضي يعلى\ oo Xanaabisha ka mid ah, iyo siduu isaguna Maalik\مالك u yiri, ayadoo uu Aalkiisu|آله, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay sharfatu kaamil u noqotay."
Waa intaas warka uu Al Zarqaani\الزرقاني wariyay.

Baghdaad\بغداد

Magaalada Baghdaad\بغداد la yiraahdo ee arliga Ciraaq\عراق caasimadda u ah waxaa aasaasay oo dhagexeeda dhigay, oo intuu injineerrada adduunka ugu fiican isugu yeeray dhisay, kaddibna magaalo madaxda Dawladda Islaamka ka dhigay midka labaad ee Khulafada Cabbaasiyiinta\الخلفاء العباسيين oo magaciisu ahaa Cabdu Allaahi bin Muxammad bin Calii bin Cabdu Allaahi bin Cabbaas\عبد الله بن محمد بن علي بن عبد الله بن عباس, koofaartiisuna tahay Abuu Jacfar AI Mansuur\أبو جعفر المنصور, oo uu sidaas Cabdu Allaahi bin Cabbaas عبد الله بن عباس ku yahay awoowihiisa labaad, dhammaantood Allaha raalli ka noqdee, wuxuuna degay isagoo jayshkiisa wata markay boqol iyo shan iyo afartanka sano iyo afar bilood iyo si deed maalmood kasoo wareegteen Hijrada, wuxuuna u bixiyey **Daaru Al Ssalaami\Madiinatu Al Ssalaamu**مدينة السلام\دار السلام, ayadoo u dhow wabiga Dajlah\دجلة oo ay Carabtu u tiqiinnay Qasru Al Ssalaamu\قصر السلام.

Carabtu way kahan jirtay inay yiraahdaan Baghdaad\بغداد, ayadoo bartaasi suuq ahaan jirtay uu oolli jiray sanam ay iiraaniyiintu caabudi jireen oo magaciisu ahaa Bagh\بغ.
Marka Baghdaad\بغداد macneheedu waxaa weeye Bagh\بغ oo sanamka magaciisa ah iyo daad\داد oo macneheedu yahay siinta ama hadiyada, oo afka iiraaniyiinta waxaa weeye siinta ama hadiyada uu bixiyay sanamkaas Bagh\بغ la yiraahdo.
Waxaa sidaas wariyay Al Imaam al xaafith Abii Bakr Axmad bin Calii "AI Khadhiibu Al Baghdaadii\"الأمام الحافظ أبي بكر أحمد بن علي الخطيب البغدادي, kuna wariyay kitaabkiisa qiimaha badan ee Taariikhu Baghdaad Aw Madiinatu Al Ssalaamu\تاريخ بغداد أو مدينة السلام. Imaamkaanu wuxuu dhintay sanadka afar boqol iyo saddex iyo lixdan Hijriga, Allaha u naxariistee.
Al Mansuur\المنصور wuxuu caasimadda kasoo raray magaalada magaceedu ahaa Al Haashimiyyah\الهاشمية, oo ayaduna isla Ciraaq\عراق ku tiillay, uuna dhisay walaalkiisa khaliifnimada ugu horreyey, ahaan kan ugu horreeyey Khulafada Cabbaasiyiinta, lana oran jiray Al Saffaax\السفاح.
Al Mansuur\المنصور wuxuu xukunka qabtay sanadka boqol iyo lix iyo soddon, siduu Ziriklii\الزركلي u wariyey.

Dhimashada Faadhimah\فاطمة

Faadhimah\فاطمة ,gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la oofsaday lix bilood Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dabadiis, markay saddex habeen ka gudbeen bisha Ramadaan\رمضان ee sanadka kow iyo tobnaad ee Hijrada, ayadoo sagaal iyo labaatan sano jirta.

Ibnu Cabdu Al Barr\إبن عبد البر wuxuu wariyay inay Faadhimah\فاطمة ku tiri Asmaa' bintu Cumays\أسماء بنت عميس:

"إني قد استقبحت ما يصنع بالنساء يطرح علي المرأة الثوب فيصفها." فقالت أسماء: "يا بنت رسول الله ألا أريك شيئا رأيته بأرض الحبشة، فدعت بجرائد رطبة، فحنتها ثم طرحت عليها ثوبا، فقالت فاطمة: "ما أحسن هذا، تعرف به المرأة من الرجل، فإذا أنا مت فاغسلني أنت وعلي، ولا يدخلن علي أحد."

"Inni qad istaqbaxtu maa yusnacu bi al nisaa'i yudhraxu calaa al mar'ati al thawbu fa yasifuhaa." Fa qaalat Asmaa'u: "Yaa binta Rasuuli Allaahi alaa uriika shay'an ra'aytuhu bi ardi al xabashah, fa dacat bi jaraa'idi rudhbatin fa xanat-haa thumma dharaxat calayhaa thawban, fa qaalat Faadhimatu: "Maa axsana haathaa, tucrafu bihi al mar'atu mina al rajuli, fa ithaa anaa mit-tu fa aghsilnii anta wa Caliyyun, wa laa yadkhulanna calayya axadun."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Waxaan u arkay inay aad u xuntahay waxaa haweenkas lagu falo (markay dhintaan oo maydkooda qubuuraha loo qaadayo): waxaa la dul saaraa maro markaas jirkeeda tilmaameysa oo sifeyneysa!" Markaasay Asmaa'u\أسماء waxay tiri: "Inanta Rasuulka Ilaahayow, ma ku tusaa waxaan kusoo arkay arliga al xabashah! Markaasay waxay tiri in loo keeno laamo geed (timireed) oo qoyan, markaasay laabtay oo ay dhigo oo kale ka dhigtay, oo ay markaas maro ku dabooshay oo ay sariirta ku dul dhistay. Markaasay Faadhimah\فاطمة waxay tiri: "maxaa sidaan ka fiican! (oo laamahaas la goday oo marada la dul saaray ayaa sariirta maydka haweenka lagu

qaadayo la dul saarayaa: waana waxaan maanta nacashka niraahdno oo rag iyo dumarba lagu qaado) oo sidaasaa haweenka looga aqoonaya raga. Marka markaan anigu dhinto adiga iyo Caliiعلي i dhaqa, axad kalena yuusan ii soo gelin.”

Sidaas ayaana la yeelay. Faadhimahفاطمة\ waxaa ku tukaday, siduu Al Bukhaariiالبخاري\ u wariyay, Calii bin Abii Dhaalibعلي بن أبي طالب\, Allaha raalli ka wada noqdee.
Faadhimahفاطمة\ waxaa qabrigeeda galay, siduu ibnu Sacadإبن سعد\ u wariyay Al Cabbaasالعباس\, Nabi Muxammad, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, adeerkiis iyo wiilkiisa Al Fadlu bin Al Cabbaasالفضل بن العباس\ iyo Calii bin Abii Dhaalibعلي بن أبي طالب.
Faadhimahفاطمة waxay ahayd qofka ugu horreeya oo nacash maro lagu deday lagu qaado.

Naqshad guriga Ummu Al Mu’miniina Khadiijaأم المؤمنين خديجة بنت خويلد aanna kasoo qaadannay kitaabkaأم المؤمنين خديجة بنت خويلد سيدة في قالب المصطفى uuna dhigay الدكاور محمد عبد يماني oo sucuudi ah oo nool **(www.dryamani.com):**



رسم تقريبي لبيت السيدة خديجة المشهور بمولد السيدة فاطمة (بمكة)

انظر الصورة أسفل الصفحة ٤١ ←

٤٠

Naqshadda siduu ahaa guriga Ummu Al Mu’miniina Khadiija**\أم المؤمنين خديجة بنت خويلد** .
Gurigu wuxuu u qaybsanaa:
Kow. Qolka Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ahna qolka midig, dhererkiisuna lix mitir yahay, ballaciisuna afar mitir.
Laba. Qolkuu ku tukan jiray Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam “Al Musallaa**\المصلى”** oo qolka jiifka ku dheggan oo bidix ka qabanaya, cabbirkiisuna yahay saddex mitir oo dherer ah iyo saddex mitir oo ballac ah.

Saddex. Qolkay Faadhimah\فاطمة ku dhalatay, Sallaa Allaahu Calayhaa Wa Sallamoo qolka jiifka dhinaca hoose ee masawirkaan ku yaalla, cabbirkiisuna yahay toddoba mitir iyo nus oo dherer ah iyo afar mitir oo ballac ah .
Afar. Qolkuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wufuudda ku qaabili jiray oo dhererkiisu toban mitir yahay..
Shan. Meeshay tiillay badeecada ganacsi ee Khadiijahخديجة , oo bakhaar wayn ah, masawirkana ugu korreeya.



رسم تقريبي للكعبة المشرفة وللدور التي كانت تحيط بها كما وصفت في الكتب القديمة
ومنها دار أسد بن عبد العزى جد السيدة خديجة وهي الدار التي سكنتها قبل زواجها

منظر عام لبيت السيدة خديجة رضي الله عنها كما كشفت عنه حفريات التوسعة
وتظهر فيه غرف المنزل وساحاته كما وصفت في الكتب القديمة

٤١

Guriga Hooyo Khadiijah\أم المؤمنين خديجة بنت خويلد markii dhowaan dhulka laga qoday, siduu ahaa. Masawirka korena waa siday ahayd Makkah\مكة waagaas oo ay u yarayd.



صورة مكبرة للمحراب الموجود بمكان استقبال الوفود في منزل السيدة خديجة وكان يصلي فيه الرسول ﷺ

٤٢

Mixraabka ku yiillay qolka wufuudda lagu qaabili jiray, Nabiguna Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam ku tukan jiray oo ku yiillay guriga Khadiijah**خديجة** .



Albaabka qolka Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, qolkuna wuxuu ka mid ah meeluhu ku cibaadeysan jiray Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.



مكان مولد السيدة فاطمة الزهراء رضي الله عنها

٤٤

Qolka iyo bartay ku dhalatay al Sayyidah Faadhimah Al Zahraa’u\السيدة فاطمة الزهراء



Khariidhadaan waxaad ka arkaysaa guryaha ku wareegsan Al Masjidu Al Xaraami**المسجد الحرام**oo ah inta dhexe oo midabka cagaaran ku tilmaaman, gacankiisa dheerna waa Al Mascaa**المسعى** meesha la isaga socdo Al Saffaa**الصفا**-oo midgta xigta- wa Al Marwata**المروة** – oo bidixda kaa qabanaysa masawirkaan una eg ul dheer:

waxaa halkaas ku yaalla albaabka masjidka kasoo baxa oo saaxada usoo baxa halkaas ayuu ku yiillay guriga Hooyo Khadiijah**أم المؤمنين خديجة بنت خويلد** . Al Xaarithi**الحارثي** wuxuu yiri: "Daartaasu meeshay ku tiillayna markay masjidka la waasiciyay waa saaxada qorrax kasoo bax ka xigta Al Mascaa una jirta sideed iyo toban mitir darbigeeda waqooyi xigtana albaabka qorrax

kasoo bax oo ku geynaya saaxada u dhexeysa Maktabatu Makkah Al Mukarramah**مكتبة مكة المكرمة** iyo inta ka hartay (suuqa) Al Qashaashiyah**القشاشية".** Suuqaas wali maanta qayb ayaa ka hartay, waana balanbalada ganacsatadu wax ku gataan oo musqulaha korkooda ah.

Waxaad kaloo masawirkaan uga jeeddaa guriga Abuu Dhaalib**\أبو طالب,** guriguu ku dhashay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam oo maanta ah Maktabatu Makkah Al Mukarramah**\مكتبة مكة المكرمة.** Shicbu Banii Haashim**\شعب بني هاشم,** ahna bartay saddexda sano ku takoornaayeen Banii Haashim**\بني هاشم بن عبد مناف** iyo Banii Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf**\بني المطلب بن عبد مناف**



٤٧

Masawir kale oo ku tusaya sida Xaramka hareerihiisa loo kala degganaa, waxaana Kacbada loogu kala dhowaa sida loo kala sharaf badan yahay oo loo kala madaxnimo badan yahay.

Sidaasuu noogu dhammaaday kitaabkaan Caruurta Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waxaanna ku gunaanadaynnaa annagoo leh:

الحمد لله رب العالمين وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله وصحبه وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون.

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM
Watertown, South Dakota, USA
Maalinta ciidda carafe kun afar boqol afar iyo soddon Hijriga una dhiganta afar iyo tobanka bisha Oktoobar labakun saddex iyo toban Miilaadiga.